GORFEYNTA FEMINISM

ABDI WALI AHMED

ARKANI

"Lafagurrida feminism iyo bayaaninta baadilnimadeeda"

Gorfeynta feminism

Lafagurrida feminism iyo bayaaninta baadilnimadeeda

Abdi wali ahmed (arkani)

Buugaan waa u fasaxan yahay qofkasta oo doonaya inuu si wanaagsan u isticmaalo , hadii ay noqot daabicid ama faafin , waxa kaliya aan ogaleyn waa wax ka badalidda ama in qeyb yar laga qaato si loo badalo asalka micna

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

Hordhac

Mahad oo dhan waxaa iska leh Allaah, Rabbiga abuuray lab iyo dheddig. Naxariis iyo nabadgelyo ha ahaato Nebigeenna Muxammad ﷺ, ehelkiisa, asxaabtiisa iyo dhammaan intii jidkiisa ku taagan ilaa Maalinta Qiyaame.

Qorista buuggan waxaa igu dhiirrigeliyey faafida ay feminism ku faafayso baraha bulshada somalida , halka muslixiinta raddiya baadilnimada fikradaan ay aad u yaryihiin baraha bulshada ama codkooda uusan meel dheer gaarin

Waxaa muhiim ah in akhristuhu ogaado in buuggani uusan ku dhisnayn hadallo dareen ku salaysan ama eedeyn guud, balse uu ku dadaalayo in dood kasta lagu saleeyo daliil, Meel kasta oo ay jirto xaqiiqo ay tahay in la qiro, waa la qirayaa meel kasta oo ay jirto dood u baahan naqdin, waxaa la isku dayayaa in si caddaalad iyo hufnaan leh loo naqdiyo.

Sidoo kale akhristuhu waa inuu ogaada hadalada qaar waa naqlin oo aan soo naqlinaayo sidaa darteed hadalka waa inuu dhamaystaa si uu u fahmo aragtidayda iyo waxa aan soo naqliyey .

Waxaan Allaah ka baryayaa inuu ka dhigo camal daacad ah aan u qasdayWajigiisa, kana dhigo mid anfaca akhristayaasha, igana dhaafo wixii qalad ama gaabis ah ee ku jira.

TUSMO

CUTUBKA 1: FEMINISMKA: ASALKA IYO TAARIIKHDA

1.1 HAWEENKA TAARIIKHDA KAHOR FEMINISMKA: RUNTA IYO BEENTA
1.1.1 Hordhac
1.1.2 Runta Taariikhda

1.2 MOWJADDA KOOBAAD: (1790s-1920s)
1.2.1 Hordhac

1.3 MOWJADDA LABAAD (1960s-1980s)
1.3.1 Hordhac
1.3.2 Asalka Mowjadda Labaad
1.3.3 Dhibaatada Falsafada

1.4 MOWJADDA SADDEXAAD: (1990s-ila hadda)
1.4.1 Hordhac
1.4.2 Asalka Mowjadda Saddexaad
1.4.3 Fikradaha Ugu Muhiimsan ee Mowjadda Saddexaad
1.4.4 Rachel Wilson: Sixirka iyo Mowjadda Saddexaad

CUTUBKA 2: FEMINISMKA IYO SIXIRKA: XIDIDDADA QARSOON

2.0 HORDHAC CUTUBKA
2.1 RACHEL WILSON: DAADA KA QAADISTA FEMINISMKA QARSOON
2.1.1 Yay Tahay Rachel Wilson?

2.2 ASALKA SIXIRKA: RUUXIYADDII (SPIRITUALISM) QARNIGII 19-AAD
2.2.1 Waa Maxay Ruuxiyadda?
2.2.2 Xiriirka Ruuxiyadda iyo Feminismka
2.2.3 Tusaalooyin Taariikheed

2.3 SANABYADA HAWEENKA:
2.3.1 Hordhac
2.3.2 Marija Gimbutas: Fikradda
2.3.3 Feminist Spirituality:
2.3.4 Fikradda caabudida dheddiga ee Feminismka

2.4 DIANIC WICCA: DIINTA FEMINISMKA
2.4.1 Waa Maxay Wicca?
2.4.2 Dianic Wicca: Wicca Haweenka
2.4.3 Zusana Budapest: Aasaashii

2.4.4 Xafladaha iyo dhuquusta
2.4.5 Saamaynta Dianic Wicca ee Feminismka

CUTUBKA 3: ASAASKA FALSAFADA EE FEMINISMKA

3.1 SIMONE DE BEAUVOIR IYO "JINSIGA LABAAD"
3.1.1 Yay Tahay Simone de Beauvoir?
3.1.2 Buugga "Jinsiga Labaad" (The Second Sex)
3.1.3 Falanqaynta Taariikhda simone
3.1.4 Beauvoir iyo Qoyska
3.1.5 Naqdiinta Beauvoir: Duminta afkaarteed si cilmiyeysan

3.2 JUDITH BUTLER IYO ARAGTIDA JINSIGA
3.2.1 Yay Tahay Judith Butler?
3.2.2 Buugga "Gender Trouble" (1990)
3.2.3 Aqoonsigu Waa "Performance"
3.2.4 Butler iyo LGBT
3.2.5 Butler iyo Diinta

3.3 POSTMODERNISM-KA IYO FEMINISMKA
3.3.1 Waa Maxay Postmodernism?
3.3.2 Xiriirka Postmodernism-ka iyo Feminismka
3.3.3 Derrida iyo Feminismka
3.3.4 Naqdiinta Postmodernism-ka

3.4 ISBURINTA KU JIRTA FEMINSIM
3.4.1 Waa Maxay isburinta Aasaasiga ah?
3.4.2 Dhibaatooyinka "Standpoint Theory"
3.4.3 Naqdiinta Habka Cilmi-baarista
3.4.4 Tusaalooyin Cilmiyeed oo Feminismku Diiday
3.4.5 isburinta "Social Construction"
3.4.6 Natiijada: Feminismku waa Nidaam Xidhan

CUTUBKA 4: HOOS U DHACA FARXADDA HAWEENKA

4.0 HORDHAC CUTUBKA
4.1 XOGTA IYO CILMI-BAARISTA: MAXAA DHACAY?
4.1.1 Hordhac
4.1.2 Natiijooyinka Guud
4.1.3 Xogta Caalamiga

4.2 SABABAHA HOOS U DHACA FARXADDA
4.2.1 Hordhac
4.2.2 Sababaha Cilmiyeed

4.3 FEMINISMKA IYO SAAMAYNTA FARXADDA
4.3.1 Hordhac
4.3.2 "Wax Walba Hel"
4.3.3 xaqirida Doorka Hooyada

4.4 ISBARBARDHIGGA: NOLOSHA HAWEENKA KA HOR IYO KA DIB FEMINISMKA
4.5 : MAXAA LUMay?

CUTUBKA 5: FEMINISMKA IYO KALA FURIDDA QOYSKA

5.0 HORDHAC CUTUBKA

(Saamaynta Feminismka ee Qoyska)
(Maqnaanshaha Aabaha)
(Economics of Homemaking)
(Neuroscience of Motherhood)
(Haweenka u Dhexeysa Guriga iyo Shaqada)
(Daahinta Guurka)
(Xorriyadda Galmada iyo Burburka Ilbaxnimooyinka)

CUTUBKA 6: XADAARAHAHA IYO XUQUUQDHA HAWEENKA

6.0 HORDHAC CUTUBKA

6.1 XUQUUQDHA HAWEENKA IYO BILAWGA XADAARAHAHA
6.1.1 Fursadda Jinsiga ee Haweenka: Cunsurka Ugu Muhiimsan
6.1.2 "Legal Nonentities": Xaaladda Haweenka Bilawga Xadaaradaha
6.1.3 Muxuu Yahay "Absolute Monogamy"?

6.2 SIDA XUQUUQDA HAWEENKU U KORDHAYSO
6.2.1 Xoraynta Haweenku Waa Dhacdo Soo Noqnoqota
6.2.2 Isbeddelka Xuquuqda: Shan Tallaabo
6.2.3 Babylonia: Tusaale Dhammeystiran
6.2.4 Rome: Tusaale Kale
6.2.5 Athens:

6.3 ISKU MIDKA QAABKA U DHISNAAYEEN XADAARADAHA
6.3.1 Hal Qaab, Hal Sheeko
6.3.2 Qaabka Guud: Shan Tallaabo
6.3.3 Tusaalooyin Dhaqameed oo Kala Duwan

6.4 SADDEXDA JIIL: BILOW ILAA BURBUR
6.4.1 Waa Maxay?
6.4.2 Qaabka Saddexda Jiil
6.4.3 Tusaale: Athens
6.4.4 Tusaale: England

6.5 XIRIIRKA KA DHEXEEYA XUQUUQDHA HAWEENKA IYO TAMARTA BULSHO
6.5.1 Xiriirka Tooska Ah
6.5.2 Fursadda Jinsiga ee Haweenka: Cunsurka Ugu Saamaynta Badan
6.5.3 Tamarta Bulsho: Qiimaha Xuquuqda Haweenka

6.6 QAWAACIDDA AASAASIGA AH
6.6.1 Qaacidada Kowaad
6.6.2 Qaacidada Labaad
6.6.3 Human Entropy
6.6.4 Oraahdii Ugu Caansanayd

6.7 DHAQANKA GALBEEDKA IYO BARI: ISBARBAR DHIG
6.7.1 Galbeedka: Bilow Adag, Dhamaad Xorriyad
6.7.2 Bari: Ku Dayashada Galbeedka Burburay

6.8 FALSAFADDA STOIC AND EPICUREAN
6.8.1 Bilowga Stoic, Dhamaadka Epicurean
6.8.2 Tusaalooyinka
6.8.3 Qaabka Soo Noqnoqda

CUTUBKA 7: BADEECADAYNTA JIDHKA HAWEENKA

7.0 HORDHAC

7.1 BADEECADAYNTA JIDHKA HAWEENKA:
7.1.1 Fahamka Badeecadaynta Jidhka
7.1.2 Taariikhda Badeecadaynta: Gumeysiga iyo Jidhka Haweenka
7.1.3 Falanqaynta Badeecadaynta Qaababka Kala Duwan

7.2 XORRIYADDA GALMADA
7.2.1 Hordhac
7.2.2 Taariikhda Xorriyadda Galmada iyo Cawaaqibkeeda
7.2.3 Cilmi-Nafsiga Rabitaanka Galmada
7.2.4 Dhibaatooyinka Cilmiyeed ee Xorriyadda Galmada

7.3 DILKA CARUURTA
7.3.1 Fahamka Feminismka ee dilka caruurta
7.3.2 Fahamka Cilmiyeed

CUTUBKA 8: USUUSHA SHAYDAANIGA AH EE GENDER

8.0 HORDHAC
8.1 ASAASKA FALSAFADEED: SIMONE DE BEAUVOIR IYO GEERIDA FITRADA
8.1.1 "Gabadhu Ma Dhalato..."
8.1.2 Simone de Beauvoir: Qofnimadeeda iyo Anshax-xumada

8.2 DR. JOHN MONEY
8.2.1 Nurture vs Nature: Beentii John Money
8.2.2 Masiibadii Bruce Reimer (David Reimer)
8.2.3 Tijaabooyinkii Naxariis-darrada ahaa ee Xafiiska Money

8.3 XAQIIQADA: MASIIBADII IYO GEERIDII DAVID REIMER
8.4 BILL C-16

8.5 DHIBAATADA AAN LAA BOGSAN KARIN
8.5.1 Dr. Debra Soh: Dhammaadka gender-ka
8.5.2 Abigail Shrier: Irreversible Damage

8.6 ARAGTIDA ISLAAMKA: BURBURINTA FIDRADA IYO BALLANTII IBLIS
8.6.1 Beddelka khalqiga

CUTUBKA 9: SINAANTA LAB IYO DHEDIG

9.0 HORDHAC CUTUBKA
9.1 QEEXITAANTA: SINNAAN, CADDAALAD, IYO CADDAALAD-MA-AHA?
9.1.1 Sinnaan Qeexid
9.1.2 Caddaalad Qeexid
9.1.3 Farqiga Muhiimka Ah ee U Dhexeeya Sinnaanta Iyo Caddaaladda

9.2 FARQA BIOLOOJIGGA AH EE U DHEXEEYA RAGGA IYO DUMARKA
9.2.1 Genetic Differences
9.2.2 Farqiga Maskaxda Neuroscience
9.2.3 Farqiga Hormoonnada
9.2.4 Kala Duwanaanshaha Danaha Iyo Doorashada Xirfadaha

9.3 TIJABADDA ISKANDINAAFIYA: SIDA SINNANTA U KEENTAY KALA DUWANAANSHAHA
9.3.1 Tijaabada Iskandinaafiya
9.3.2 Natiijooyinka Tijaabada: "Gender Equality Paradox"
9.3.3 Tirakoobka STEM ee Adduunka
9.3.4 Kala Duwanaanshaha Doorashada Shaqooyinka
9.3.5 Kala Duwanaanshaha Shakhsiyadda

9.3.6 Xaaladda Wadamada Carabta Iyo Is-burinta Scandinavian-ka

9.4 XAALADDA DUMARKA EE CIIDANKA
9.4.1 Daraasadda US Marine Corps
9.4.2 Saamaynta Jirka ee Haweenka Dagaalka

9.5 DUGSIGA, TACLIINTA, IYO FARQA JINSIGA
9.5.1 Saamaynta Jinsiga Macallinka
9.5.2 Eexda Qiimeynta Dugsiga
9.5.3 Kala Duwanaanshaha Kalsoonida

CUTUBKA 1

FEMINISMKA: ASALKA IYO TAARIIKHDA

1.1 HAWEENKA TAARIIKHDA KAHOR FEMINISMKA: RUNTA IYO BEENTA

1.1.1 Hordhac

Marka la eego sheekada ay faafisay feminismku, waxaa la moodaa in haweenka taariikhda oo dhan ay ku noolaayeen nolol xun oo dulmi ah, ilaa feminismka xoreysay. Laakiin taariikhda dhabta ahi way ka duwan tahay sheekadan.

Al-Marrakshi wuxuu ku sheegay buuggiisa "جدل النسوية والذكورية" in taariikhdu aanay ahayn bog cad oo madow. Wuxuu yidhi:

"الأول: تكرار الحديث عن خصوص الظلم الواقع على المرأة قديما يشعِر بأن الرجل كان في بحبوحة من العيش، والحق أن الظلم كان واقعا على الجميع .الثاني: أن التاريخ لم يكن صفحة واحدة سوداء فهناك مراحل زمنية كانت المرأة تنعم فيها بأعلى درجات العدل خاصة في زمن النبوة والخلافة الراشدة.

“kow: Ku celcelinta hadalka ku saabsan dulmigii gaar ahaan dumarka ku dhacay waayadii hore waxay abuuraysaa dareen ah in raggu markaas ku noolaayeen nolol raaxo iyo barwaaqo leh, halka xaqiiqadu tahay in dulmigu ku dhacay dhammaan bulshada. Labo: Taariikhdu ma ahayn bog keliya oo madow. waxaa jiray xilliyo ay dumarku ku naaloonayeen heerarka ugu sarreeya ee caddaaladda, gaar ahaan xilligii Nebinimada iyo Khulafadii Raashidiinta”

1.1.2 Runta Taariikhda

Waxaa muhiim ah in la ogaado in taariikhda haweenka aysan ahayn mid madow ah. Marxaladihii nolosha adkeyd , raggana way ku adkeyd bal ayagaa darnaa , dagaalada lagu hoobayn jiray , hadii lagu qabto cadaab aad u daran la galin jiray ragga , inta waxaa dheer masuuliyadda ragga saarnayd ay aad u wayneyd ha ahaato masruufka gurigiisa , barashada cilmiga oo safaro adag loo gali jiray , askarnimo ha ahaato, laakin markasta feminism waxay isku daydaa in ay sawirto in dumarka kaliya ay nolo adag ku jireen laakin markii feminism soo baxday ay ka soo baxeen mugdiga waana baadil cad , xaqiiq u muuqata sida qoraxda in la iska indho itro.

Rachel Wilson buuggeeda "Occult Feminism" waxay ku doodaysaa in taariikhda haweenka la qalloociyay si ay ugu adeegto ujeeddooyinka feminismka. Waxay tiri:

"Feminist academics refuse to acknowledge all the things women could and diddo throughout history and the considerable power and influence held by womensince the dawn of civilization."

"*Aqoonyahannada feminism-ka taageera waxay diidaan inay qiraan dhammaan waxyaabihii ay dumarku awoodi kareen oo ay sameeyeen taariikhda oo dhan, iyo sidoo kale awooddii iyo saamayntii weynayd ee ay dumarku ku lahaayeen tan iyo bilowgii ilbaxnimada aadanaha*."

-Occult Feminism Chapter 2

Feminism marka ay ka dhaadhiciso atbaacdeeda in dulmane yihiin , taa oo u horseeda cadaawad iyo nacayb sidoo kale waxay daboolee baalal kamid ah taarikhda

Sheekh Cabdullahi Al-Khalifi wuxuu ka hadlay fikradda "dhibanaha" oo uu sheegay inay tahay rukun ka mid ah feminismka. Wuxuu yiri:

"فكرة أيديلوجيا الضحية تجعل كل ذنب للضحية هو مسئولية الجاني حتى وإن لم يكن له دخل مباشر. المتشبع بهذه الفكرة يُسقِط عن نفسه التكليف بطريقة أو بأخرى".

Fikradda 'ideolojiyadda dhibbanaha' waxay ka dhigaysaa in khalad kasta ama dhibaato kasta oo ku dhacda dhibbanaha loo nisbeeyo masuuliyadda dembiilaha, xitaa haddii uusan si toos ah qayb uga lahayn. Qofka si weyn ugu qancay fikraddan wuxuu si uun ama si kale isaga dulqaadaa mas'uuliyadda iyo waajibaadka saaran.

Haweenka taariikhda kahor feminismka kuma nooleen dulmi joogto ah. Xilliyadda dhibaatada jirtayna , dhibaato u dhiganta way haystay ragga .

Feminismku wuxuu qalloociyay taariikhda haweenka si uu ugu adeego ujeeddooyinkiisa. Tani waa qayb ka mid ah aydoloojiyadda "dhibanaha" oo ah rukunka feminismka.

1.2 MOWJADDA KOOBAAD: (1790s-1920s)

1.2.1 Hordhac

Mowjaddii koowaad ee feminismku waxay soo bilowday dabayaaqadii qarnigii 18-aad, waxayna socotay illaa horaantii qarnigii 20-aad.

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee uu daaha ka qaaday cilmi-baarista Rachel Wilson ayaa ah xiriirka ka dhexeeya mowjaddii koowaad ee feminismka iyo dhaqdhaqaaqyada ruuxiyadda iyo sixirka.

Wilson waxay ku sheegaysaa buuggeeda "Occult Feminism":

"Most people think of feminism as primarily a political movement. I never would have guessed just how much feminism was truly a religious movement and how deeply the beliefs of early feminists motivated the cause of women's liberation."

Dadka intooda badan waxay u haystaan in feminism-ku tahay dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo keliya. Anigu se ma aanan filayn in feminism ay heer intaas le'eg la xiriirto aragtiyo iyo caqiidooyin diimeed, iyo in rumaysnaantii dumarnimadii hore ay door aad u weyn uga qaadatay dhiirrigelinta iyo hagidda ololihii loogu magac daray xoraynta haweenka.

Waxay sheegaysaa in ay jiraan xidhiidh u dhexeeya:

1) Spiritualism qarnigii 19-aad:

- Dhaqdhaqaaqan oo ku lug lahaa la xiriirka "ruuxa" dadka dhintay

- Haweenka badan oo hormoodka u ahaa waxay ahaayeen "mediums" (dhexdhexaadiyayaal)

- Waxay aaminsanaayeen in haweenka jidhkoodu uu yahay mid u dhaw xiriirka ruuxa

2) Dhaqdhaqaaqa (Caqiidada caabudida Haweenka):

- Haweenka qaar waxay caabudi jireen ilaahyo haween ah

- Waxay aaminsanaayeen oo ay ku andacoonaayaa in ilaahadda haweenka ahayd mid la xiriirta dagaalka,galmada, iyo awoodda

- Tani waxay si toos ah u saamaysay fikirka feminismka

3) Sixirka :

- Wilson waxay sheegaysaa in sixirku yahay diinta ugu korraysa ee feminismka (feminism is the political arm of witchcraft)

- Zusana Budapest, oo aasaastay "Dianic Wicca" 1971, waxay ahayd haweeney hormood u ah feminismka iyo sixirkaba

- Budapest waxay tidhi: "I saw religion as the highest of politics"

Al-Khalifi wuxuu sidoo kale xusay xiriirkan, isagoo ka hadlaya "Rachel Wilson" iyo buuggeeda, wuxuu yidhi:

"تقول راشيل باختصار إن الكلام المعروف بين أوساط الناس أن 'الموجة الثانية والثالثة للنسوية قد تكون سيئة، لكن الموجة الأولى جيدة' كلام فارغ، بل أسوأ الموجات هي الموجة الأولى. أغلب المنتسبات للموجة الأولى كن ضمن الحركاتالروحانية".

"Rachel waxay si kooban u leedahay: hadalka dadka dhexdiisa ku faafay ee oranaya, 'mowjaddii labaad iyo tii saddexaad ee feminism-ku way xumaan karaan, laakiin mowjaddii koowaad way fiicnayd,' waa hadal aan sal lahayn. Sida ay qabto, mowjadda ugu dhibka badan ama ugu xun waxay ahayd tii koowaad. Inta badan haweenkii ku biiray mowjaddaas koowaad waxay ka tirsanaayeen dhaqdhaqaaqyo ruuxaani ah ama kooxo ku salaysnaa fikrado ruuxeed".

Waxa layaabka leh ayaa ah in bilawga mowjadaan ay dumarka laftooda ay ka soo horjeedeen .

1.3 MOWJADDA LABAAD (1960s-1980s)

1.3.1 Hordhac

Mowjaddii labaad waxay ahayd mid ka ballaadhan mowjaddii koowaad. Kana saamyn badan maadama ay asaalibta ay haysteen ka fiicnaayeen tii hore

1.3.2 Asalka Mowjadda Labaad

Sannadkii 1949, Simone de Beauvoir waxay qortay buuggeedii "الجنس الثاني" (The Second Sex). Buuggani wuxuu noqday tixraaca ee feminismka. Beauvoir waxay ku doodday in (one is not born a woman, but becomes one)

Yacni qofna kuma dhasho dumarnimo ee wuu noqdaa , ay kala jeedo in mujtamaca yahay kan soo saara dumarnimo ee aysan ku dhalan

Fikraddan ayaa noqotay rukunka koowaad ee feminismka: kala soocidda jinsiga (sex) iyo nooca (gender). Beauvoir waxay sheegaysaa haddii noocu yahay mid bulshada sameysay, waa la beddeli karaa.

Sannadkii 1963, Betty Friedan waxay qortay "اللغز الأنثوي" (The Feminine Mystique), oo ay ku naqdisay fikradda ah in haweeneydu ay tahay oo kaliya hooyo iyo guri-joog.

Sanadkii 1968, dhaqdhaqaaqa (Women's Liberation) ayaa ka qarxay Faransiiska iyo Maraykanka, isagoo dalbanaya:

- Sinnaan dhammaystiran

- Xorriyadda galmada

- Xakamaynta dhalmada (birth control)

- dilka ilmaha (yacnii inay iska soo ridaan uurka taa oo wax dhaamin dil)

Al-Marrakshi Wuxuu sidoo kale sheegay in ay mowjaddaydan la xiriirto " تأنيث المجتمع"(feminization of society) iyo shaydaamaynta ragga

Fikradaha Ugu Muhiimsan ee Mowjadda Labaad:

1) Kala Soocidda Jinsiga iyo Nooca :

Beauvoir waxay ku doodday in kala duwanaanta ragga iyo haweenka aysan ahayn mid dabiici ah, balse mid bulshada sameysay. Tani waxay ka soo horjeeddaa cilmiga bayoolajiga, cilmiga maskaxda, iyo cilmiga hidaha. Xitta qof leh caqli lamid ah kan xayawaanka uu garankaro baadilnimada fikradaan , saas ay tahay dad sheegta inay haystaan shahaadooyin jaamacadeed ay aaminsan yihiin. Markaad hawadaaada u hogaansanto , xaywaanka waad ka hoos maraysaa

2) Patriarchy

Fikradda ah in bulshada oo dhami ay ku dhisan tahay nidaam raggeed oo dulmiya haweenka. Ninku waa dulmiyaha, haweeneyduna waa dhibanaha.

3) الشخصي سياسي" (The Personal is Political)

Fikradda ah in arrimaha gaarka ah (sida guurka, hooyonimada, galmada) ay yihiin arrimo siyaasadeed oo lagu xallin karo oo kaliya beddelka bulshada.

4) **burburinta Qoyska**

Qoyska waxay u arkaan inuu yahay mu’asaso dulmisa haweenka. Hooyonimada

Waxay u arkaan inay tahay "shaqo qasab ah."

1.3.3 Dhibaatada Falsafada

Louise Antony waxay tidhi:

"تسعى نظرية المعرفة النسوية إلى نقد فكرة أن جميع العارفين متشابهون، ولكن إذا اعتمدت على هذا الافتراض نفسه (التبادلية) فإنها تُضعف أساسها. أي لو طبقنا معيارهم على نظريتهم لبطلت كذلك كونها لا تأخذ بجميع الآراء بل فقطرأيهم".

"Feminist Epistemology waxay dhaliilaysaa fikradda ah in dhammaan dadka wax garanayaa ay isku mid yihiin marka ay aqoon soo saarayaan ama qiimeynayaan. Hase yeeshee, haddii ay iyadu ku tiirsanaato isla mabda'aas ay dhaliilayso (oo ah in aragti kasta lagu qiimeeyo qofka ama kooxda soo bandhigtay), waxay dhaawacaysaa saldhiggeeda. Si kale haddii loo dhigo, haddii aan halbeeggooda ku dabaqno aragtidooda, iyaduna way buraysaa; sababtoo ah ma aqbasho dhammaan aragtiyaha iyo ra'yiyada kala duwan, balse waxay mudnaan siinaysaa aragtida ay iyagu qabaan."

Tani waa iskhilaaf weyn oo ku jira aragtida feminismka:

- Feminismku wuxuu dhaleeceeyaa cilmiga "ragga" inuu yahay mid aan dhammaystirnayn

- Laakiin feminismku isaguna wuxuu soo saarayaa aragti "haweenka" oo keli ah

- Haddaba, haddii cilmigu yahay mid qofku ku xiran yahay, maxaa ka dhigaya aragtida feminismka mid sax ah?

Haddii aragtida feminismka ay ku xiran tahay qofka (feminist standpoint theory),

maxaa ka dhigaya mid sax ah marka loo eego cilmiga guud? Yacnii hadii ay dhahaan diimaha waa baadil , cilmiga waa baadil oo rag baa gacanta ku haayo , oo marka tooda maxaa sax ka dhigaayo maadam ay haween gacan ugu jirto(waa hadaan iska indho tirno cidda daaha gadaashiisa ka riixaysa koxdaan)

1.4 MOWJADDA SADDEXAAD: (1990s-ila hadda)

1.4.1 Hordhac

Mowjaddii saddexaad waa midda ugu qallafsan. Waxay soo bilowday 1990-meeyadii, waxayna weli socotaa ilaa maanta, inkastoo dhaqaaq kale “ME TOO” uu soo shaac baxay.

1.4.2 Asalka Mowjadda Saddexaad

Sannadkii 1990, Judith Butler waxay qortay buuggeedii "مشكلة النوع" (GenderTrouble). Butler waxay awoodday inay aragtida Beauvoir u qaado heer cusub. Haddii Beauvoir ay kala soocday jinsiga iyo nooca, Butler waxay sheegtay in xitaa jinsiga laftiisu yahay mid bulshada sameysay (sex is also a social construct).

Sannadkii 1992, Rebecca Walker (gabadhii Alice Walker, qoraaga "The Color Purple") waxay qortay maqaal cinwaankiisu ahaa "Becoming the Third Wave"(Noqoshada Mowjadda Saddexaad). Maqaalkan ayaa ahaa midka ugu horreeya ee isticmaala ereyga "mowjadda saddexaad."

1.4.3 Fikradaha Ugu Muhiimsan ee Mowjadda Saddexaad

1) Diidmada Aqoonsiga (Rejection of Identity):

Mowjaddii labaad waxay qaadatay in haweenka ay leeyihiin aqoonsi guud (waxay dhibanayaal yihiin nidaamka ragga). Mowjaddii saddexaad waxay diiddaa fikraddan. Butler waxay sheegaysaa in aqoonsigu yahay mid beddelmi kara oo aan joogto ahayn.

2) Aragtida "Intersectionality":

Fikradda ah in dulmiga haweenka uu isku xiran yahay arrimo kale: midabka, dabaqadda, iyo galmada. Tusaale: haweeney madow oo faqiir ah waxay la dulmiyey saddex nooc oo dulmi ah (midab, dabaqad, iyo jinsi).

3) LGBT:

Mowjaddii saddexaad waxay u dooday dhaqdhaqaaqyada LGBT. Butler waxay ku doodaysaa in aqoonsiga galmadu yahay "performance" - waxaan sameyno, ma aha waxa nahay.

Maantana ma arkeysid urur feminism oo aan u doodin khaniisnimada

4) Diidmada Bayoolojiga:

Mowjaddii saddexaad waxay diiddaa xitaa jiritaanka laba jinsi (male/female). Waxay ku doodaysaa in jinsigu yahay mid kala duwan.

Al-Marrakshi wuxuu buuggiisa "جدل النسوية والذكورية" si faahfaahsan uga hadlayaa inxiraafka mowjaddan. Wuxuu yidhi:

"النسوية الحديثة أصبحت لا تناضل من أجل تحسين الحياة اليومية للنساء، بل إنها أصبحت تسعى من أجل التفكيك المخطط للهوية الجنسية، ولم تعد الغاية رفع المرأة إلى مقام الرجل في الحقوق السياسية والاقتصادية بل جعل الرجل والمرأة شيئا واحدا".

“feminism-ka maanta uma dagaallamayso hagaajinta nolosha maalinlaha ah ee haweenka, balse waxay noqotay mid ujeedadeedu tahay kala-diridda ama burburinta aqoonsiga jinsiga ee ragga iyo dumarka. Hadafkeeduna ma aha oo keliya in haweenka la siiyo xuquuq siyaasadeed iyo dhaqaale oo la mid ah kuwa ragga, balse waa in la tirtiro kala duwanaanshaha u dhexeeya ragga iyo dumarka, lagana dhigo sidii inay yihiin hal shay ama hal aqoonsi oo isku mid ah”.

Wuxuu u qaybiyay inxiraafka mowjaddan:

- تأنيث المجتمع (Feminization of Society):

- Joogitaanka haweenka ee dhammaan meelaha bulshada

- dumareynta ragga , in caruurta wiilasha ah laga ilaaliyo dhaqamada ragga

- Natiijada: ragga oo luminaya doorkooda, haweenkuna ay ku dhibtoonayaan

نظرية النوع/الجندر (Gender Theory):

- Kala furidda jinsiga iyo nooca

- Natiijooyin xun xun oo dhalatay ilaa laga arkay dad xaywaanimo doorta

- التحالف الشاذ (Deviant Alliance):

- feminismka iyo LGBT (khaniisnimada)

- المعارك الوهمية (Imaginary Battles):

- Dagaalada beenta ah ee feminismku ku dagaallamo

- Tusaale dagaalka "الصور النمطية" (stereotypes) iyo "التمييز الجنسوي"

Inkastoo dhibaatooyinka laga dhaxlay mowjadaan ay badnaayeen waxaa ugu xumaa 3

Tan 1aad waa gaalnimada iyo ilxaadka

Tan labaad dilka caruuta , sanadkii haweenka feminsts waxay laayaan malaayiin caruur

Tan 3aad yaraynta dhalmada taa oo wadamo badan ku kalliftay dhibaato Dimugaraafig ah

Al-Khalifi wuxuu yidhi

"الثورة الصناعية مع خروج النساء إلى سوق العمل مع انتشار الأفكار النسوية يؤدي إلى نقص حاد في المواليد. ويجد المجتمع نفسه بعد مدة دخل فيما يسمى بـ شيخوخة الفرد".

“Kacaankii Warshadaha, oo ay weheliso gelitaanka haweenka suuqa shaqada iyo faafitaanka fikradaha feminism-ka, ayaa horseeda hoos-u-dhac weyn oo ku yimaadda tirada dhalashada carruurta. Muddo ka dibna bulshada waxay isku aragtaa inay gashay xaalad loo yaqaan gabowga bulshada, taas oo ah marka dadka waayeelka ahi bataan halka dhalinyarada iyo carruurtu yaraadaan”.

Wuxuu tusaale u soo qaadanayaa:

- Japan iyo Koonfur Kuuriya: dhalasho yaraansho daran ka jirta in waayeelada ay ka badan yihiin dhalinyart

- Yurub: dhalasho yaraansho, lagu xallinayo qaxootiga

1.4.4 Rachel Wilson: Sixirka iyo Mowjadda Saddexaad

Rachel Wilson waxay muujinaysaa in mowjaddii saddexaad ay la xiriirto sixirka iyo caqiidooyinka qadiimiga ah. Waxay tusaale u soo qaadanaysaa:

WAP - Cardi B iyo Megan Thee Stallion:

Heesahan oo caanka ah waxaa ku jira calaamado sixir ah:

- Calaamadda "Kali" (sanab dhedig Hinduu ah)

- Carrabka soo baxa (tongue out) oo ah calaamadda Kali

- Calaamadda "Janus" (sanab dhedig Roomaan ah) oo ah laba weji

- Muraayadaha sixirka (magic mirrors)

Wilson waxay tidhi:

"No matter where you look in the places where feminists or witches gather,one is never divorced from the other."

“Meel kasta oo aad eegto goobaha ay isugu yimaadaan feminists ama sixiroolayaashu , marna midkood kama go’na kan kale”.

Waxay sidoo kale sheegaysaa in "Dianic Wicca" ay aasaasaty Zusana Budapest 1971, kaas oo ah "the first female-only witch's coven in modern America."

Arintaan oo faahfaahsan waan u tagi oonaa

Haddii mowjaddii saddexaad ay diiddo xitaa jiritaanka laba jinsi (male/female),

maxay tahay hadafka ay ugu hiilineyso haween? Ayna u shaydaameyneso ragga oo waaba hal ee??

Inta aan ka bixin cutubkaan waxaa wanaagsan ka hadlida shay feminism ka baaxsan laakin saamayn wayn ku leh

Dhaqaalaha:

Feminismku waxaa garab siiya nidaamka ra'sumaaliyadda . Shirkadaha waaweyn waxay u baahdeen haweenka shaqo si ay u yareeyaan kharashka. Feminismku wuxuu u adeegay barnaamijkan

Halkaan su'aal kale baa ka dhalanayso , hadii feminism u aragtay nidaamka hooyanimo mid dulmi ah , kan shirkadaha oo ka shaqo adag hooyanimada siday ku aqbaleen??

CUTUBKA 2

FEMINISMKA IYO SIXIRKA: XIDIDDADA QARSOON

2.0 HORDHAC CUTUBKA

Cutubkani waxaan ku lafa gurri doonaa xiriirka dheer ee ka dhexeeya feminismka iyo sixirka . In kasta oo dadbadani aysan ka warqabin xiriirkan, cilmi-baarayaal badan oo darsay ayaa muujiyay in feminismku uu ka soo jeedo asal diimeed oo qarsoon

Waxaan badnaa ka hadli doonaa buuga Rachel Wilson oo ah haweeney nasraani ah, laakiin waxa hadda na khuseeyo waa cadaymaha ay ku soo bandhigtay buugaas.

2.1 RACHEL WILSON: DAADA KA QAADISTA FEMINISMKA QARSOON

2.1.1 Yay Tahay Rachel Wilson?

Rachel Wilson waa haweeney Maraykan ah oo qoraa ah. Waxay qortay buugga "Occult Feminism: The Secret History of the Women's Liberation Movement" kaas oo ay ku daaha ka qaadayso xiriirka qarsoon ee ka dhexeeya feminismka iyo dhaqdhaqaaqyada baadhiniga ah

Wilson ma aha Muslim (waa nasraani), laakiin xujadeeda cilmiyeed waa mid waadix ah. Sida waxay u sheegtay, waxay bilowday cilmi-baaristan iyada oo taageere u ah feminismka, laakiin markay fahamtay xididka qarsoon, waxay ka noqotay taageeraddii.

Wilson waxay sheegaysaa:

"When I began researching, I believed feminism was good. I believed it was necessary. I had no idea I would end up writing a book that exposed all of the things I ended up exposing."

“Markii aan mawduucan baaritaankiisa bilaabay, waxaan qabay aragti wanaagsan oo ku saabsan feminism-ka, waxaana u arkayay dhaqdhaqaaq loo baahan yahay. Laakiin intii aan sii dhex galayay cilmi-baarista, waxaan la kulmay xog iyo xaqiiqooyin aanan hore uga warqabin, taasoo ugu dambayn igu kalliftay inaan qoro buug aan ku soo bandhigay waxyaabihii aan ogaaday”.

Waxay kaloo tidhi:

"Most people think of feminism as primarily a political movement. I never would have guessed just how much feminism was truly a religious movement and how deeply the beliefs of early feminists motivated the cause of women's liberation."

“Dadka intooda badan waxay u haystaan in feminism-ku tahay dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo. Anigu se ma aanan filayn in feminism ay heer intaas le’eg la xiriirto aragtiyo iyo caqiidooyin diimeed, iyo in rumaysnaantii feminists hore ay door aad u weyn uga qaadatay dhiirrigelinta iyo hagidda ololihii loogu magac daray xoraynta haweenka”.

Wilson waxay sameysay 10 isbarbardhig oo u dhexeeya feminismka iyo sixirka:

1. Diidmada Diinta: Feminismku wuxuu diiddaa diinta "ragga" wuxuuna soo dhawaanayaa diinta "haweenka"

2. Xorriyadda Galmada: Labaduba waxay ku doodaan xorriyadda galmada oo aan xad lahayn

3. Suuq-geynta Jidhka: Labaduba waxay ku lug leeyihiin suuq-geynta jidhka haweeneyda

4. Fikradda Dhibanaha: Labaduba waxay ku dhisan yihiin fikradda dhibanaha

5. Kacdoonka Awoodda: Labaduba waxay diiddan yihiin awoodda "patriarchal"

6. Tirooyinka Sixirka: Labaduba waxay adeegsadaan tirooyin gaar ah (sida 9, 13)

7. Xafladaha iyo dhuquus: Labaduba waxay leeyihiin xaflado iyo dhuquus

8. Asalka Qarsoon: Labaduba waxay leeyihiin taariikh qarsoon oo la qariyay

9. LGBT: Labaduba waxay hirgaliyaan LGBT

10. Ujeeddooyinka: Labaduba waxay ujeeddo ka leeyihiin inay beddelaan bulshada oo dhan

2.2 ASALKA SIXIRKA: RUUXIYADDII (SPIRITUALISM) QARNIGII 19-AAD

2.2.1 Waa Maxay Ruuxiyadda?

Ruuxiyaddu waa dhaqdhaqaaq diin-qarsoodi ah oo ka soo bilaabay Maraykanka 1848. Waxay ku lug lahayd la xiriirka "ruuxa" dadka dhintay iyada oo loo marayo "mediums" (dhexdhexaadiyayaal). Dadbadani waxay aaminsanaayeen in ruuxa dadka dhintay ay la hadli karaan kuwa nool.

Sannadkii 1848, gabdhaha Fox (Fox sisters) oo degganaayeen New York, ayaa sheegay in ay la xiriiri karaan ruuxa nin la dilay. Tani waxay noqotay bilowgii dhaqdhaqaaqa ruuxiyadda oo dhan.

2.2.2 Xiriirka Ruuxiyadda iyo Feminismka

Wilson waxay muujinaysaa in ruuxiyaddu ay si weyn u saamaysay feminismka qarnigii 19-aad. Sababaha:

Kowaad: Ruuxiyaddu waxay siisay haweenka fursad ay ku noqdaan "mediums" (dadka u dhexeeya ruuxa iyo dadka). Tani waxay siisay haweenkaawood ay ku hadlaan oo ay ku dhexjiraan bulshada

Labaad: Dhaqdhaqaaqa ruuxiyadda wuxuu ahaa mid "xor ah" oo u dooda sinnaanta ragga iyo haweenka.

Saddexaad: Haweenka hormoodka u ahaa feminismka qarnigii 19-aad, qaar badan oo ka mid ah waxay ahaayeen "mediums" ama kuwo xiriir la leh ruuxiyadda.

Wilson waxay tidhi:

"Every major figure of the first wave of feminism was involved in spiritualism to some degree. Not all were mediums, but almost all attended séances and believed in the spirit world."

“inta badan hoggaamiyeyaashii iyo shakhsiyaadkii ugu caansanaa mowjaddii koowaad ee feminism-ka ay si uun ugu lug lahaayeen dhaqdhaqaaqyada ruuxaaniga ah. Inkastoo dhammaantood aysan ahayn dad sheegta inay la xiriiraan ruuxyada, haddana badankoodu waxay ka qayb geli jireen kulamo lagu sheegay in ruuxyo lagula xiriiro, waxayna rumaysnaayeen jiritaanka adduun ama awoodo ruuxi ah oo ka baxsan dunida muuqata.”

2.2.3 Tusaalooyin Taariikheed

Elizabeth Cady Stanton (1815-1902):

Hormoodka feminismka Maraykanka. Waxay aasaastay shirkii Seneca Falls 1848. Stanton waxay aaminsanayd in ay la xiriiri karto ruuxa dadka dhintay. Waxay ku qortay qoraal in ay la hadashay ruuxa "Isaiah" .

Susan B. Anthony (1820-1906):

Saaxiibka Stanton, oo aasaasay "National Woman Suffrage Association". Anthony waxay sidoo kale aaminsanayd ruuxiyadda. Wilson waxay sheegaysaa in Anthony ay ka soo qayb-gashay "séances" badan.

Victoria Woodhull (1838-1927):

Haweeneydii ugu horreysay ee u tartantay xilka madaxweynenimada Maraykanka (1872). Woodhull waxay ahayd "medium" caan ah, waxayna sheegtay in ay la xiriirto ruuxa "Demosthenes" (qoraa Giriig ah).

Margaret Sanger (1879-1966):

Aasaashay "Planned Parenthood" (Qorshaynta Qoyska). Sanger waxay aaminsanayd eugenics (falanqaynta hiddaha) iyo ruuxiyadda. Waxay ku andacootay “beenteeda” in ay la xiriirtay ruuxa "Jesus" (Ciise cs).

Wilson waxay soo koobaysaa:

"Many of the early suffragists were spiritualists... They held séances in their own homes... Woodhull was actually a medium and a magnetic healer...They believed that in the spiritual realm, there was total equality between men and women, and that this should be reflected on earth."

“Qaar badan oo ka mid ahaa haweenkii hore ee u ololeyn jiray in dumarku helaan xaqa codbixinta waxay ahaayeen dad aaminsan ruuxaaniyadda. Waxay guryahooda ku qaban jireen kulamo ay ku andacoonayeen in ruuxyo lala xiriiro. Woodhull-na waxay ahayd qof sheegan jirtay inay ruuxyada la xiriiri karto, sidoo kalena dadka ku daweyn karto waxa loo yaqaan daawaynta tamarta. Waxay rumaysnaayeen in dunida ruuxiga ah ay ragga iyo dumarku si buuxda ugu siman yihiin, ayna sinnaantaas tahay mid ay tahay in sidoo kale laga hirgeliyo dunida”.

2.3 sanabyada HAWEENKA:

2.3.1 Hordhac

Waxay ku andacoodaan jiritaanka caqiido (la caabudaayo dheddig) qadiimi ah oo soo noqotay qarnigii 20-aad, waxayna si qoto dheer u saamaysay feminismka, gaar ahaan mowjaddii labaad.

Aragtidan waxay ku andacoonaayaa fikradda ah in kahor Islaamka iyo nasraaniyadda, bini'aadamku uu caabudi jiray sanabyo haween ah. Marija Gimbutas waxay ku anadacoonee in ay jirtay dhaqan "matriarchal"ka hor Yurub, kaas oo la burburiyay.

2.3.2 Marija Gimbutas: Fikradda

Marija Gimbutas (1921-1994) waxay ahayd archaeologist oo ka timid Lithuania. Waxay soo jeedisay aragti ah in Yurub qadiimi ahay ahayd dhaqan "gynocentric" ah oo nabadeed.

Gimbutas waxay ku doodday in dhaqankan uu jiraa qarniyadii 6500-3500 BC,ka dibna waxaa burburiyay qabiilo "patriarchal" ah oo ka yimid Bari. Aragtidadi waxaa si weyn u soo dhawaanayay feminismka inkastoo caddeymo aysan u haynin ee qof hawo caabud ah uma baahno caddeyn cilmiyeed.

Wilson waxay tidhi:

Gimbutas' theories have been largely debunked by mainstream archaeology, but they live on in feminist spirituality circles.

“ Aragtiyihii Gimbutas waxaa si weyn u diiday ama u buriyay cilmi-baarayaasha mainstream archaeology,. Si kastaba ha ahaatee, fikradahaas weli waxay saamayn iyo taageero ku leeyihiin qaar ka mid ah kooxaha ruuxaaniga ah ee la xiriira feminism”.

2.3.3 Feminist Spirituality:

Feminist spirituality waxay soo ifbaxday 1970-meeyadii. Dhaqdhaqaaqan waxaa ka mid ahaa:

Starhawk (Miriam Simos, 1951-):

Qoraaga buugga "The Spiral Dance" (1979). Starhawk waxay ahayd hormoodka dhaqdhaqaaqa "ecofeminism" Waxay soo rogtay caqiidada "caabudida dheddig" oo ay ku dhex-dhexlayso sixirka

Starhawk waxay ku doodday in feminismku uu u baahan yahay diin cusub:

Sixirka sida ay Starhawk u aragto, waa diinta Ilaahadda ay ku andacoodaan . Ilaahadduna agtooda waxay astaan u tahay joogitaanka iyo muujinta awoodda nolosha ee ku dhex jirta dabeecadda, haweenka, iyo wareegyada nolosha ee dhalashada, koritaanka, iyo dhimashada.

Carol P. Christ (1940-2019):

Qoraaga "Why Women Need the " (1978). Christ waxay ku doodday in oo ku andacooneysaa in ilaahada ay muhiim u tahay feminismka sababtoo ah:

1. waxay xaqiijisaysaa jidhka haweeneyda

2. waxay taageertaa doorka haweenka nolosha

3. waxay siisaa haweenka awood

4. waxay xaqiijisaysaa xiriirka dumarka

Z. Budapest (Zusana Budapest, 1940-)

"Susan B. Anthony Coven" (1971). Budapest waxay ahayd haweeney hormood u ah "Dianic Wicca" (sixirka haweenka). Waxay sheegtay:

"You see, the occult is the political arm of the revolution. We are spiritual guerrillas. No longer will we be satisfied to be the backbone of the movement. We are the movement."

"dhaqamada qarsoon waa cududda siyaasadeed ee kacaanka. Waxaan nahay halgamayaal ruuxi ah. Mar dambe kuma ekaan doonno inaan taageerayaal ama laf-dhabar uun u noqono dhaqdhaqaaqa; annaga qudheenna ayaa ah dhaqdhaqaaqa"

2.3.4 Fikradda caabudid dheddiga ee Feminismka

Feminismka waxay u arkayaan caabudida dheddiga siyaalo kala duwan:

Dhinaca Sare (Transcendent):

waxay ku andacoodaan ilaahada mid ka sarreysaa dabeecadda, waa mid jira oo dhammaan leh awood Laakiin tani waa mid aan ahayn mid caan ah.

Dhinaca Ku Jira (Immanent):

Waxay ku andacoodaan iIlaahaddu waxay ku jirtaa dhammaan waxa nool. Midkiiba waa qayb ka mid ah Ilaahadda say ku anadcoodaan. Tani waa aragtida ugu caansan.

Dhinaca Dhalmada (Generative):

Waxay ku andacoodaan Ilaahaddu waa dhalmaha, tan abuurta. Waxay la xiriirtaa dhulka, dabeecadda, iyo dhalmada haweenka.

Waxaa nasiib darro ah fikrad shirkigaan ka buuxo in dad islaam sheegto ku andacoodaan inay haystaan , ayna si doqonimo ah kuula soo istaagaan feminism waa u doodida xuquuqda haweenka.

2.4 DIANIC WICCA: DIINTA FEMINISMKA

2.4.1 Waa Maxay Wicca?

Wicca waa diin sixir ah oo soo ifbaxday qarnigii 20-aad. Waxay ku salaysan tahay caqiidada qadiimiga ah ee sixirka, laakiin waxaa dib u soo rogay Gerald Gardner 1954.

Wicca waxay leedahay:

- Ilaah iyo Ilaahadd ay ku andacoodaan

- Xaflado dhuquus ah

- Sannadka "Wheel of the Year" (8 xafladood)

- Sixir

- Xorriyadda galmada

2.4.2 Dianic Wicca: Wicca Haweenka

Dianic Wicca waa laanta Wicca ee u gaarka ah haweenka. Waxaa aasaasay Zusana Budapest 1971. Dianic Wicca waxay ku salaysan tahay:

1. Ilaahadda haweenka say ku andacoodaan

2. Haweenka oo kaliya

3. Sixirka haweenka

4. Feminismka

Wilson waxay sheegaysaa:

"Dianic Wicca is the original feminist religion. It was created by women, for women, and it explicitly ties feminism to witchcraft."

“Dianic Wicca waa diin feminism ku dhisan oo ka mid ah kuwii ugu horreeyey. Haween ayaa sameeyey, haween ayaana loogu talagalay, waxaana si cad loogu xidhaa fikradda feminism iyo dhaqamada sixirka”

2.4.3 Zusana Budapest: Aasaashii

Zusana Budapest waxay u dhalatay Hungary 1940. Hooyadeed waxay ahayd medium- ta sixirka Budapest waxay ku soo tallaabatay Maraykanka 1960, waxayna aasaastay "Susan B. Anthony Coven" 1971 - kani wuxuu ahaa kuwii ugu horreeyay ee haweenka oo keliya ee sixirka.

Budapest waxay tiri:

"Feminism is the political arm of witchcraft."

“ feminism-ku waa cududda siyaasadeed ee dhaqamada sixirka”

Budapest waxay sidoo kale qortay buug ku saabsan sixirka haweenka:

"Grandmother of Time" iyo "The Holy Book of Women's Mysteries."

2.4.4 Xafladaha iyo dhuquusta

Dianic Wicca waxay leedahay xaflado iyo dhuquus kala duwan:

Xafladaha Sannadka (Wheel of the Year):

- Samhain (Oktoobar 31) - sannadka cusub

- Yule (Diseembar 21) - qorraxda soo noqoshadeeda

- Imbolc (Febraayo 1) - nadiifinta

- Ostara (Maraas 21) - gu'ga

- Beltane (May 1) - dhalmada

- Litha (Juun 21) - xagaaga

- Lammas (Ogost 1) - goosashada

- Mabon (Sebtembar 21) - dayrta

Xafladaha Haweenka (Women's Mysteries):

- Xafladda dhalmada

- Xafladda caadada

- Xafladda guurka

- Xafladda geerida

2.4.5 Saamaynta Dianic Wicca ee Feminismka

Dianic Wicca waxay si weyn u saamaysay feminismka, gaar ahaan: Tan Kowaad - Fikradda "Sacred Female"

Fikradda ah in jidhka haweeneydu yahay mid xumaan ka madhan say ku andacoodaan, oo leh awood sixir. Arinta qosolka leh waa ayagoo intaas ku doodaayaa hadana si dhab ah waxay u arkaan jirka ragga inuu ka wanaagsan yahay oo way ku daydaan

Tan Labaad - Fikradda "Female-Only Spaces"

Dianic Wicca waxay dhiirigelisay fikradda ah in haweenku u baahan yihiin meelo ay ku xaroobaan ragga. Tani waxay saamaysay:

- Bannaanka haweenka

- Jaamacadaha haweenka

- Guryaha haweenka

- Kooxaha haweenka

Tan Saddexaad - Fikradda "Sisterhood":

Fikradda ah in haweenka oo dhami ay yihiin "walaalo" kuwaas oo u dagaallama hal ujeeddo. Xaq iyo baadil halkaa iska dhig , mar walba gabdha waa inay taagyeertaa gabdhaha kale , waa waxa maanta aan ku aragno baraha bulshada .

Al-Khalifi yidhi

أصل النسوية يعود إلى عبادة الشيطان والهرطقة الدينية... ما يسمى بموجات"

النسوية هي في الحقيقة موجة شيطانية واحدة

“Asalka feminism-ku wuxuu dib ugu laabanayaa cibaadada Shaydaanka iyo bidcooyinka diimeed... waxa loogu yeedho mowjadaha feminism-ka dhab ahaantii waa hal mowjad oo Shaydaani ah”

Wuxuu kaloo yidhi:

فكرة أن المرأة هي الإله أو أن هناك إلاهة أنثى تتعبد لها النساء هو عين"

.الشرك بالله. هذا هو أساس النسوية الروحانية

“Fikrada ah in haweeneydu ilaah tahay ama ay jirto ilaahad dhedig ah oo haweenku u cibaadaystaan waa shirk Alle lala wadaajiyo. Taas ayaana ah aasaaska feminism-ka ruuxiga ah”

Laakin inta badan waxaan ka hadalnay waa asalka feminism , qofktasta oo feminist ah miyaa qabaa arimahan

Jawaabta waa maya , bal qaar kamid ah islaamka ayey u nisba sheegtaan , qaarna ma garanaayaan xaqiiqda feminism laakin saamaynteeda badanka feminism way gaartay .

Waxay tiri “***Wax kasta oo aan ahayn caabudidda haweeneyda, waxay maanta ugu yeeraan dulmi!"***

Caabudiddan ay sheegayso maaha sujuud iyo rukuuc , balse waa u hoggaansanaanta rabitaannada xad-dhaafka ah ee haweeneyda, in la siiyo mudnaan aan xaq ahayn , iyo dareenka ay qabaan inay wax walba xaq u leeyihiin , arintaan hadaad u fiirasato waad ka dhax arkaysaa haweenka ku andacooda xuquuqda haweenka. ilaa heer ay gaareen in yiraahdahdaan shareecada islaamka , culimada muslimiinta waxay dulmiyeen haweenka. hadalkaa wuxuu ka soo baxaayaa kuwa islaanimo nala sheegto, wax kasta oo khilaafay hawadooda waxay ugu yeereen dulmi

CUTUBKA 3

ASAASKA FALSAFADA EE FEMINISMKA

3.1 SIMONE DE BEAUVOIR IYO "JINSIGA LABAAD"

3.1.1 Yay Tahay Simone de Beauvoir?

Simone de Beauvoir (1908-1986) waxay ahayd haweeney Faransiis ah, qoraa, iyo hormoodka mowjaddii labaad ee feminismka.

3.1.2 Buugga "Jinsiga Labaad" (The Second Sex)

Sannadkii 1949, Beauvoir waxay qortay buugga "Le Deuxième Sexe" (Jinsiga Labaad).

Beauvoir waxay ku bilowdaa buuggeeda iyadoo weydiinaysa: "Waa maxay haweeney?" Waxay ku doodaysaa in taariikhda oo dhan, haweeneydu waxay ahayd "الآخر" (The Other) - tan labaad, tan aan muhiimka ahayn (inkastoo waxa ay diidi jirtay ay samayn jirtya sida aan u imaan doono)

Beauvoir waxay tiri: "لا تولد المرأة امرأة، بل تصبح كذلك." (One is not born a woman, but becomes one.)

markay simone leedahay qofku dumrnimo kuma dhasho waxay kala jeedaa biology ahaan , simone waxay diidan tahay dumarnimada lafteeda , waxay dhib ku qabtaa jirka laftiisa kaas oo ay u aragto mid ka hooseeya kan ragga

waxay tiri:

Haweeneydu haweeney ahaan kuma dhalato, balse sidaas ayay ku noqotaa. Ma jiro qaddar bayoolojiyeed, nafsiyeed ama dhaqaale oo go'aamiya qaabka ay dheddigta bani'aadamku uga dhex muuqato bulshada, taa beddelkeeda, ilbaxnimada iyo dhaqanka bulshada guud ahaan ayaa soo saara makhluuqan dhexdhexaadka ah ee u dhexeeya labka iyo qofka aan lahayn astaamaha ragannimada “khasiiska ayey kala jeedaa”.




34 *Simone de Beauvoir on Woman*

Simone de Beauvoir's main thesis is that in spite of her biological predicament, woman need not be doomed to immanence, for it is man who has created artificial distinctions between masculine and feminine functions, and thus kept woman in a false, passive role. All the so-called feminine virtues are man-made and by admiring these, man keeps woman from seeking to cultivate the real virtues which he has reserved for himself—action, transcendence, creativity, work (masculine work which has status). Many women would find it hard to regard themselves as having less "existence" than men, but for Simone de Beauvoir woman is always "the other." In accepting the traditional masculine values as the true ones, Simone de Beauvoir paints the female condition as absolutely inferior in itself rather than relatively difficult or one which might have its own compensations and virtues.

Volume II considers woman today and the "situation" which is the key to her deliverance. The most radical part of Simone de Beauvoir's theory is her insistence that there is no innate feminine psychology properly speaking, no intrinsically "feminine" characteristics except for the physiological sexual function. All of woman's attitudes are a result of her "situation." Here is the theory:

"One is not born, but rather becomes, a woman. No biological, psychological, or economic fate determines the figure that the human female presents in society; it is civilization as a whole that produces this creature, intermediate between the male and eunuch, which is described as feminine." (TSS, II, p. 249)

To show this process, Simone de Beauvoir describes the typical childhood of young girls, their unhappy acceptance of the subsidiary role society imposes upon them.

ssimone waxay kaloo leedahay markay sifeynayso jirka gabdha:

Shaki kuma jiro in qaan-gaarnimadu beddesho jidhka gabadha yar...naasuhu waa culeys... xoogga murqaha iyo adkaysiga iyo dhagaha waxay ka yar yihiin kuwa ragga... dareeraha hormoonku waxay abuuraan xaalad nafsi oo aan dheellitirnayn

تقول في نص عجيب في الجزء الثاني من هذا الكتاب، والذي جعلت له عنوانًا فرعيًّا (التجربة المعاشة): «لا شك أن المراهَقة تُغيِّرُ جسد البنت الصغيرة. يصبح الجسد أضعف من ذي قبل؛ الأعضاء المؤنثة هشة، وعملها صعب؛ يصبح الثديان – لأنهما مزعجان وغير مألوفين – عبئًا على المرأة؛ يُذكِّران بوجودهما في الرياضات العنيفة، يتحركان ويؤلمان. تصبح القوة العضلية والقدرة على التحمل والسرعة أقل منها عند الرجل. تخلق الإفرازات الهرمونية حالة من عدم التوازن العصبي والحركي. دورة الحيض مؤلمة..»[1]. وتستمر الكاتبة هكذا في سرد مظاهر

caqliyada dhabta ah ee simone ayaa ah in dumarka xaqiiqdi ka liitaan ragga biology ahaan inkastoo simone ku andacooneysay xornimada hadana xaqiiqda nolosheeda intaas waa ka fogaayeen

inyar aan ka yiraahdo midaa.

3.1.3 Falanqaynta Taariikhda simone

simone inbadna ayaa lagu eedeeyey inay kufsatay ardeydeeda , intaa un ma ahayn waxay u diri jirtay saaxibkeeda si uu isagana u kufsado. dabcan haweeneyda ku andacoon jirtay u olaleynta haweenka ayaa haweenka u gacan gilin jirtay nin si uu u kufsado.

Bianca "oo ah dhibanayaashi" ayaa sheegtay: "*Waxay ii ahayd in la i xureeyey. Waxay i tustay in xornimadu tahay inaan la seexdo dadka iga weyn ee i xakameynaya. Anigu waxaan uun ahaa tijaabo ayku tijaabinayeen falsafaddooda."* -Bianca Lamblin, "A Disgraceful Affair")

Natalie Sorokine ayaa ahayd mid ka mid ah dhibanayaashii Beauvoir ee ugu caansanaa. Hooyadeed ayaa Beauvoir dacwaynaysay 1943, iyadoo ku eedaysay inay ku kufsatay gabadheeda 17 jirka ah. Beauvoir ayaa markaas laga buriyey shaqadii macalinnimada

Beauvoir iyo Sartre waxay kala hadleen "gabadhaan bikra jabinta" sida Beauvoir qortay. Warqadahooda waxay ka hadlayaan gabdhahan yaryar sidii conquests oo kale, iyagoo ku tilmaamaya ereyo aan naxariis lahayn. Markay "dhammaystaan" gabadha, way iska tuuraan.

- Hazel Rowley, "Tête-à-Tête: Simone de Beauvoir and Jean-Paul Sartre", iyo warqadaha Beauvoir iyo Sartre, oo dambe la daabacay)

intaas miyey ku ekeyd ? maya. simone waxa ay dadka ugu yeeri jirtay wax ka duwan ayey ku dhaqmi jirtay. haweenka inay ragga iyo guurka ka xuroobaan ayey ugu yeeri jirtay , halka nolosheeda dhabta ah ay isu dulleyn jirtay saaxibadeeda .

mar ay ka hadlaysay mid kamid ah saaxibadeeda waxay tiri:

تحت الإغراء والافتتان. سارتر لا يتوقف عن التفكير: «حين أقارن نفسي به، أشعر بأن الحمّى لديّ دافئة ! كنت أظن نفسي استثنائية لأنني لا أتصور أن أعيش دون أن أكتب؛ لم يكن يعيش إلا ليكتب».

لقد وجدتْ سيدها، ملكها. وجدت رَجلها: «كانت هذه المرة الأولى في حياتي التي أشعر فيها بأنني مسيطَر عليّ من الناحية العقلية .. كل يوم، وطيلة اليوم، كنت أقارن نفسي به، ولم أكن أستطيع منافسته. كنت أحيانا أحاول أن أناقش؛ أبذل جهدي، أصرّ ..ولكن كان سارتر ينتصر دائما. لم يكن بالإمكان أن نعاتبه: كان يعطي كل ما لديه ليمكننا الاستفادة من علمه».

في المراسلات بينهما، يلقبها سارتر «زوجتي «المرجانية» العزيزة»، كما لو كان يريد التأكيد على تفوقه الملَكي. إنه صاحب لطيف؛ يغني، يرقص أحيانا؛ وله موهبة كوميدية حقيقية. ينتهي

المطاف بأن تُنسى دمامتُه. ولكنه عاشق سيء جدا. تتحدث المؤرخة جيلبرت (Gilbert

Tani waxay ahayd markii iigu horreysay nolosha oo aan dareemay inqof i xukumayo caqli ahaan. Maalin kasta oo dhan waxaan is barbardhigi jiray, mana awoodin inaan la tartamoWarqadihii simone markay dhimatay waxay muujinayaan in Beauvoir ay ahayd mid Sartre ka hooseeya. Waxay u adeegi jirtay Sartre sidii addoon . Sartre ayaa ugu yeeri jiray "my dear little wife", "my coral wife.

Waxaa intaa sii dheer in Beauvoir ay ku qortay warqad u dirtay gacaliyaheedii saddexaad Nelson Algren: "*Waxaan diyaar u ahay inaan guriga kuu nadiifiyo,weelasha ku maydho. Waxaan kuu noqon doonaa naag Carbeed ooku addeecsan*."



Day (1948), a fictional one in *Les Mandarins* (1954), and an autobiographical one in *La force des choses/Force of Circumstance* (1963). But the posthumous publication of hundreds of letters to Algren, composed over twenty-seven years, paint a very different picture of their relationship. Beauvoir emerges as completely at odds with the principles she defended in *The Second* Sex: "I'll come to you," she writes, "and you'll see, honey, next time I'll be really nice and quiet and obedient as an Arabian wife (but they talk too much, you know)."[8] It is probably a vain enterprise to decide which written version corresponds to the "real" Simone, for the roots of expression and representation are quite inextricable. The Sartre-Beauvoir correspondence only multiplies our views of those years and of the relationship of the celebrated philosopher couple. Many hypotheses are possible,[9] and all

7. Michel Foucault, *Le courage de la vérité* (Paris: EHESS/Gallimard/Seuil, 2009); see also Foucault, *Fearless Speech*, ed. Joseph Pearson (Los Angeles: Semiotexte, 2001).
8. Beauvoir, *A Transatlantic Love Affair: Letters to Nelson Algren* (New York: The New Press, 1998), 226.
9. I proposed several in my *Le génie du mensonge* (Chevilly-Larue: Max Milo, 2015).

dadka hortooda xorriyad ku andacoon jirtay si hoosane saxiikeed isu dulleyn jirtay arintaan ayada kaligeed kuma eka , bal badinka haweenkaan feminist waa sidaa

3.1.4 Beauvoir iyo Qoyska

Beauvoir waxay aragti xun ka qabtay qoyska. Waxay ku doodday in qoysku uu yahay "meesha haweeneyda lagu dulmiyo".

Waxay tiri: (Marriage is the traditional destiny that society imposes on women.)

Beauvoir waxay u aragtay hooyanimada inay tahay "caqabad" (obstacle) ku timid horumarka haweeneyda. Waxay ku doodday in haweeneydu aysan ku qasbanayn inay noqoto hooyo.

Agtooda hooyanimada waa shay liita maadaama ay khuseyso dumarka , wax dumarka u gaar ah way la liitaan maadama rag uusan samaynin

3.1.5 Naqdiinta Beauvoir: Duminta afkaarteed si cilmiyeysan

Cilmiga kobaca bini'aadamka casriga ahi wuxuu si cad u muujiyay in kala duwanaanta jinsiga ay billowdo isla marka shahwada ninku ku milanto ukunta haweeneyda . Haddii shahwadu sidato koromosoomyada Y (XY), waxaa soo baxa cunug lab ah oo leh genes kala duwan kan dumar.

Qiyaastii 6-8 toddobaad oo uur ah, hiddaha SRY (Sex-determining Region Y) ee koromosoomyada Y wuxuu kiciyaa horumarinta testes, kuwaas oo bilaaba soo saarista testosterone. Testosteronkani wuxuu abaabulaa maskaxda, jidhka, iyo dabeecadda ninka hab aan laga noqon Karin . Tani waa xaqiiqo waxa sameeya waa malag Alle u wakiilay

Carruurta lab iyo dheddig ayaa muujiya kala duwanaansho dabeecadeed xitaa bilaha ugu horreeya nolosha, kahor inta bulshada aysan bilaabin tababarka. Cilmi-baaris caalami ah (Connellan et al., 2000 - Infant Behavior and Development) ayaa muujisay in:

- Cunugta dheddig (XX) ah oo 1 maalin jira uu aad u fiiriso wejiga bini'aadamka marka loo eego cunug lab (XY) ah

- Cunug lab (XY) ah oo 1 maalin jira uu aad u fiirsho shay (mechanical object) marka loo eego cunugt dheddig (XX) ah

- Kala duwanaantani waxay muujinaysaa in dabeecadaha qaarkood ay yihiin kuwo dabiici ah , ma aha kuwo la baray

Haddii Beauvoir ay ku doodeyso in bulshada haweeneydu "ka dhigto" haweeney, maxaa keena in cunug dheddig (XX) iyo cunug lab (XY) ay uga jawaabaan tababarka bulshada si kala duwan inta tababka kahor? Jawaabtu waxay tahay: maskaxdooda ayaa ku kala duwan tahay asal ahaan

Cilmiga maskaxda casriga ahi wuxuu muujiyay in maskaxda ragga iyo haweenka ay leeyihiin kala duwanaansho qaab-dhismeed iyo shaqo oo la taaban karo oo laga helay dhammaan dhaqamada:

Qaybta hypothalamus-ka waxay ka weyn tahay ragga 2.5 jeer marka loo eego haweenka (Swaab & Fliers, 1985 - Brain Research). Tani waa kala duwanaansho dabiici ah oo hormoonada ku xiran.

INAH3 (Intermediate Nucleus of the Anterior Hypothalamus):

Qaybtani waxay ka weyn tahay ragga marka loo eego haweenka (LeVay, 1991 - Science). Kala duwanaantani waxay la xiriirtaa dabeecadda galmada.

Corpus Callosum:

Xidhiidhka u dhexeeya labada hemisfer ee maskaxda wuxuu ka ballaadhan yahay haweenka (Driesen & Raz, 1995 - Neuroscience & Biobehavioral Reviews), taas oo muujinaysa isku-xidhnaan badan

Shaqada Amygdala:

Qaybta maskaxda ee xakamaysa carada, cabsida, iyo dareenka (amygdala) waxay u shaqaysaa si kala duwan ragga iyo haweenka (Hamann et al., 2004 - NeuroImage). Raggi waxay isticmaalaan amygdala-ka dhinaca midig, haweenku waxay isticmaalaan dhinaca bidix.

Connectome-ka Maskaxda (Brain Connectivity):

Cilmi-baaris weyn oo ka timid University of Pennsylvania (Ingalhalikaret al., 2014 - PNAS) oo daraaseeysay 1,000 oo maskax ayaa muujisay:

- Maskaxda ragga waxay leedahay isku-xidhnaan badan gudaha hemisfer kasta (intra-hemispheric)

- Maskaxda haweenka waxay leedahay isku-xidhnaan badan u dhexeeya labada hemisfer

- Tani waxay sharraxaysaa sababta raggu ugu fiican yahay howlaha "systemizing" (fahamka nidaamyada), haweenkuna ugu fiican yihiin howlaha "empathizing" (fahamka dareenka dadka).

Haddii Beauvoir ay ku doodeyso in haweeneyda tahay "mid bulshada sameysay," su'aashu waxay tahay: sidee bay bulshadu u beddeshay qaabka maskaxda ? dadka miyey awoodaan inay dib u furaan maskaxda haweeneyda oo dib u hagaagiyaan?

qaabka maskaxda heerkan Kala duwanaanshaha qaabka maskaxda waa mid dabiici ah Alle abuuray ma ahan shay bulsho saamayso

Psychology & Behavioral Genetics

Cilmibaarista dabeecadda bini'aadamka waxay muujisay kala duwanaansho joogto ah oo u dhexeeya ragga iyo haweenka:

Kala Duwanaanshaha Dabeecadda

- Dabeecadda gardarada : Raggi waxay muujiyaan heerar sare oo adadayg jidh ahaaneed ah dhammaan dhaqamada (Archer, 2004 - Review of General Psychology). Saamaynta waa mid weyn (d = 0.85).

- samaynta khatarta : Raggi waxay si weyn uga khatar badan yihiin haweenka (Byrnes et al., 1999 - Psychological Bulletin).

- Dareenka : Haweenku waxay muujiyaan heerar sare oo empathynimo ah marka loo eego ragga (Baron-Cohen, 2003 - "The Essential Difference").

- Xiisaha : Raggi waxay aad u xiiseeyaan shayga , haweenkuna waxay aad u xiiseeyaan dadka . Kala duwanaantani waxay muuqanaysaa caruurnimada (Connellan et al., 2000).

Behavioral Genetics

- Cilmi-baaris ku saabsan mataanaha ayaa muujisay in kala duwanaanta dabeecadu ay tahay mid hidaha ku xiran

- Kala duwanaanta ragga iyo haweenka ee xiisaha "people vs. things" waxay leedahay heritability sare (Lippa, 2006 - Journal of Personality).

Cilmiga Kobaca Carruurta

- Carruur lab iyo dheddig ah ayaa doorbida qalab ka duwan xitaa kahor inta aysan garan qaangaarka (Eisenberg, 1987 - Child Development).

- Carruurta labka ayaa aad u jeclaada gaadhiga, dhismaha, iyo qalabka dagaalka.

- Carruurta dheddig ah ayaa aad u jeclaada, daryeelka, iyo qurxinta

Tani waxay muujinaysaa in kala duwanaanta dabeecaddu tahay mid dabiici ah oo Alle ku abuuray oo shaqo ku lahayn bulshada

Cilmiga Dhaqanka

Cilmi-baarista dhaqanka bini'aadamka waxay muujinaysaa in kala qaybsanaanta shaqada ee ku salaysan jinsigu ay tahay mid caalami ah

- George Peter Murdock (1937) wuxuu daraaseeyay 1,000+ oo dhaqamood wuxuuna helay in dhammaan dhaqamadu ay leeyihiin kala qaybsanaan shaqo oo ku salaysan jinsi.

- Dhaqan kuma jiro oo haweenku ugaarsadaan oo raggu carruurta daryeelaan.

- Kala qaybsanaantu waxay ahayd mid joogto ah xitaa dhaqamada ugu horeeya

- Dhaqamada asalka ah- raggu waxay ugaarsadaan xayawaanka ,haweenkuna waxay ururiyaan dhirta iyo daryeelaan carruurta

Donald Brown (1991) wuxuu buuggiisa "Human Universals" ku muujiyay in kala qaybsanaanta shaqada ee ku salaysan jinsigu ay tahay mid ka mid ah dhaqamada caalamiga ah Tani waxay soo jeedinaysaa asal fidhri ah , ma aha mid dhaqameed. Haddii ay tahay mid dhaqameed oo keliya, waxaan filan karnaa dhaqamo leh kala qaybsanaan rogan laakiin kuma jiraan.

Fikradda Beauvoir waxay leedahay tanaaqud falsafadeed oo aan laga baxsan karin:

Beauvoir waxay sheegtaa: "Haweeneydu kuma dhalato(dumarnimo), balse waxay noqotaa." Tani waxay u baahan tahay inay jirto shay (x) oo "noqda" haweeney. Haddaba, maxaa go'aamiya in x yahay kan "noqonaya haweeney" oo aan ahayn kan kale? Jawaabta kaliya ee suurtogalka ah waa: jinsiga bayooloji ee x. Haddii ay tahay jinsiga bayooloji ayaa go'aamiya, marka Beauvoir waxay qiraysaa jiritaanka jinsi dabiici ah taas oo ah waxa ay isku daydo inay diiddo.

Fikradda Beauvoir waxay u baahan tahay in bini'aadamku yahay "saxan cad" marka uu dhasho maskax aan lahayn wax dabiici ah si ay bulshada u saamayso. Laakiin cilmiga psychology-ga iyo neuroscience-ka casriga ahi wuxuu muujiyay in qofka uu la dhasho dabeecado fidhri ah

3.2 JUDITH BUTLER IYO ARAGTIDA JINSIGA

3.2.1 Yay Tahay Judith Butler?

Judith Butler (1956-) waa haweeney Maraykan ah oo hormood u ah aragtida jinsiga iyo mowjaddii saddexaad ee feminismka.

Butler waxay dhammaysay PhD-keeda 1984, waxayna qortay buuggeeda ugu caansan "Gender Trouble" (1990 (مشكلة النوع.

3.2.2 Buugga "Gender Trouble" (1990)

Butler tallaabo ka dheer tii Beauvoir ayey qaaday: Haddii Beauvoir ay kala soocday jinsiga (sex) iyo nooca (gender),

Butler waxay sheegaysaa: (Perhaps sex itself is like gender - a cultural construct.)

Butler waxay ku doodaysaa in kala soocidda jinsiga iyo nooca aysan ahayn mid fudud sida loo maleeyo. Haddii noocu yahay mid bulshada sameysay, marka jinsiguna waa mid bulshada sameysay, sababtoo ah kala soocidda jinsiga laftiisu waa mid dhaqameed.

3.2.3 Aqoonsigu Waa "Performance"

Butler waxay soo jeedisaa fikradda ah in aqoonsigu yahay "bandhig" . Ma aha wax aan nahay, balse waa waxa aan sameyno.

Waxay sheegaysaa: (Gender is not a stable identity, but a temporary one constructed over time through repeated acts.)

Butler waxay tusaale u soo qaadanaysaa

- Haweeneydu ma aha mid dabiici ah oo noqota haweeney, balse waxay sameynaysaa dhaqamada "haweenaynka"

- Ninkuna ma aha mid dabiici ah oo noqda nin, balse wuxuu sameynayaa dhaqamada "raggnimada" .

- Tani waxay la macno tahay in ninka sameeya wax dumarka sameeyo uu dumar yahay sidoo kale caksiga (way adagtahay fikrad noocan in xitta insaan kan ugu caqli liita uusan waxaan aqbalaynin)

3.2.4 Butler iyo LGBT

Waxay ku doodaysaa in aqoonsiga galmadu uu sidoo kale yahay mid "bandhig" ah.

Waxay sheegaysaa: There is no gender identity behind expressions of gender... identity is performatively constituted by the very expressions that are said to be its results.)

Maantana ma jirto mu’asaso , hay’ad , ururo feminism ah illaa uu yahay LGBT , waad daalacan kartaa dhamaan bogoga ay internet ka maamulaam , kama madhna khaniisnimo , marka hadii ay gabar tiraahdo aniga feminism ayaan ahay laakin waan ka soo horjeedaa khaniisnimo waa labo midkood un . imaa inaysan garaneynin feminism waana mida ay u badan yihiin , imaa inay qarsanaayaan haka ahaato fulaynimo ama munaafaqnimo.

Mid kamid ah feminist waxay tiri hadii feminism ay tahay aragti , khaniisnimada waa ku dhaqan keeda

Sidaa darteed lawadaan ma kala go’aan , feminism waa khaniisnimo

Butler waxay taageertaa dhaqdhaqaaqa "drag" (ragga oo labista haweenka gashan) iyo "queer" (galmada qallafsan), sababtoo ah waxay muujinayaan in aqoonsigu yahay bandhig.

3.2.5 Butler iyo Diinta

Butler waxay diin kasta u aragtaa inay tahay "patriarchal" (nidaam rageed(aabeed)). Waxay ku doodaysaa in diintu tahay nidaam "compulsory heterosexuality"

Waxay sheegaysaa in diintu ay tahay nidaam:

1. Xakameeya galmada

2. Kala sooca ragga iyo haweenka

3. Xoojiya doorka dhaqameed ee haweenka

4. Diiddo khaniisnimada

Butler waxay ku doodaysaa in feminismku uu diidan yahay diimaha oo dhan, sababtoo ah diimaha oo dhammi waxay leeyihiin nidaam "binary" (laba ah: nin iyo naag) oo ka soo horjeeda aragtida jinsiga.

Doqonimada iyo caqliyarida qomkaan waa in ayagoo intaas leh inay ku doodaan dumarka waa dulman yihiin , oo hadii la yiraahdo bal noo qeexa waa maxay dumar? , in la dulmiyey waxay ku tusinee inuu jiro jinsi dumar ah , adinka waa diidan tihiin jiritaanka jinsigaas , sidey isku qaadanee

Baraha bulshada waxaa ka buuxo su'aashaan (what is a woman) oo la waydiinaayo , mana arkeysid mid jawaab bixin karta

3.3 POSTMODERNISM-KA IYO FEMINISMKA

3.3.1 Waa Maxay Postmodernism?

Postmodernismku waa dhaqdhaqaaq falsafadeed oo ka soo bilaabay qarnigii 20-aad. Wuxuu diiddaa fikradda "الحقيقة المطلقة" iyo (objective knowledge).

Fikradaha ugu muhiimsan ee postmodernism-ka:

1. Xaqiiqadu waa mid la sameeyey

2. Cilmigu waa mid qofka ku xiran

3. Qoraalku waa mid u furan ta'wiil

4. Awooddu waxay ka jirtaa luuqadda

5. Aqoonsigu waa mid kala duwan

fikradaan waa mid ayada is burineyso hadii aysan jirin xaqiiq mudhlaq ah oo ay tahay mid la sameeyey , isla hadalkaan aad oraneysaan soo isla asiga ma yahay mid la sameeyey mise asiga xaqiiq mudhlaq ah waye , lawo jawaab kaliya ay bixin karaan , lawadaba mad-habkooda ayey burinee

3.3.2 Xiriirka Postmodernism-ka iyo Feminismka

Feminismka mowjaddii saddexaad wuxuu ka soo jeedaa postmodernism-ka.

1. Diidmada "Grand Narratives":

Postmodernism-ku wuxuu diiddaa sheekooyinka waaweyn (grand narratives) sida cilmiga, diinta, iyo taariikhda. Feminismku wuxuu diiddaa isla intaas laakin farqiga ayaa ah in feminism ay u diido maadama ay ku doodeyso inay yihiin shay rag sameeyey

2. "Deconstruction":

Fikradda ah in wax kasta la kala furo . Feminismku wuxuu kala furayaa aqoonsiga, jinsiga, iyo qoyska.

3. "Power/Knowledge":

Fikradda Foucault ee ah in awooddu iyo cilmigu ay isku xiran yihiin. Feminismku wuxuu ku doodaa in cilmiga "ragga" uu yahay awood.

4. "Otherness":

Fikradda ah in dadka "kale" (Other) la dulmiyo. Feminismku wuxuu u arkaa haweenka inay yihiin "Other" ee ragga.

3.3.3 Derrida iyo Feminismka

Jacques Derrida (1930-2004) waa faylasuuf Faransiis ah oo hormood u ah postmodernism-ka. Wuxuu sameeyay fikradda "deconstruction" (kala furidda).

Derrida wuxuu ku dooddy in luuqaddu aysan ahayn mid ku xidhi karta xaqiiqada. Erey kastaa wuxuu leeyahay macneyaal badan, oo macnihiisu isbadalaa.

Feminismku wuxuu adeegsaday fikraddan si uu ugu doodo in ereyada "nin,""haweeney," "rag," iyo "dumar" aysan lahayn macne go'an.

3.3.4 Naqdiinta Postmodernism-ka

Postmodernism-ku waa dhismaha falsafadeed ee feminismka mowjaddii saddexaad. Balse waa falsafad si buuxda iskhilaafsan oo aan cilmiga lajaan qaadi karin.

isburinta

Postmodernism-ku wuxuu diiddaa "xaqiiqada dhammaystiran" iyo "cilmiga objective." Laakiin isla fikraddani waxay leedahay isburin

1.1 Self-Refutation:

Haddii "xaqiiqaddu tahay mid qofka ku xiran " ay tahay mid sax ah,

marka:

- Haddii ay tahay mid qofka ku xiran, waxay khuseysaa qofka hadlaya oo keliya

- Haddii ay tahay mid dhammaystiran , marka postmodernism-ku wuu khilaafayaa laftiisa

Sidoo kale, haddii "xaqiiq ma jirto" ay tahay mid run ah, marka xaqiiq ayaa jirta (waxay tahay xaqiiqda jirta waa in xaqiiq aysan jirin). Tani waa isburin aysan ka baxsan Karin , yacnii mad-habkooda oo odhanaayo xaqiiq dhamaystiran ma jirto si uu run u noqdo waa inay jirto xaqiiq dhamaystiran

1.2 Isticmaalka Cilmiga:

Postmodernism-ku wuxuu isticmaalaa cilmiga (dhaqanka, taariikhda, luuqadda) si uu u buriyo cilmiga. Tani waa iskhilaaf: waxay ku dooddaan in cilmigu yahay "shay dhaqameed" iyagoo adeegsanaya cilmiga laftiisa.

Falsafadaan waxay ayey dumisaa laakin wax ma dhisto

Postmodernism-ku wuxuu isku dayaa duminta nidaam kasta qoyska, dhaqanka, xitaa cilmiga. Laakiin ma dhiso wax cusub oo beddel ahah.

- Haddii aad dumiso qoyska, maxaa beddel ah?

- Haddii aad diido diinta , maxaa beddel ah?

- Haddii aad dumiso dhaqanka, maxaa beddel ah?

3.4 isburinta KU jirta feminsim

3.4.1 Waa Maxay isburinta Aasaasiga ah?

Fikradda ah in cilmiga dhaqameed uu yahay mid "ragga" ah , oo aan u adeegin haweenka. Feminismku wuxuu sheegaa inay u baahan yihiin "cilmi haween" oo gaar ah oo ka duwan cilmiga "ragga."

1. Feminismku wuxuu sheegaa: "Dhammaan cilmigu waa mid qofka ku xiran oo uu saameeyay jinsiga qofka."

2. Haddaba, cilmiga "ragga" waa qaldan yahay sababtoo ah wuxuu kayimid aragtida ragga.

3. Laakiin cilmiga "haweenka"sidoo kale waa mid qofka ku xiran, sababtoo ah wuxuu ka yimid aragtida haweenka.

4. Haddaba, maxaa ka dhigaya cilmiga haweenka mid sax ah marka cilmiga ragga uu qaldan yahay?

Louise Antony waxay falanqeysay isburintaan, iyadoo muujinaysa in feminist epistemology aysan kar Karin, waxay tiri

"تسعى نظرية المعرفة النسوية إلى نقد فكرة أن جميع العارفين متشابهون، وأن هذه الفكرة (التبادلية) نابعة من المنظور الذكوري. ولكن إذا اعتمد نقدها على هذا الافتراض نفسه (التبادلية) فإنها تُضعف أساسها".

- Louise Antony, "Quine as Feminist: The Radical Import of Naturalized Epistemology" - 1994)

- Feminismku wuxuu sheegaa: "Cilmigu waa mid qofka ku xiran, xaqiiqad objective ma jirto."

- Laakiin fikraddan lafteedu: ma tahay mid objective ah mise mid qofka ku xiran?

- Haddii ay tahay mid objective ah: feminismku waa khaldan yahay (waxay qiran objective truth markay diiddan yihiin)

- Haddii ay tahay mid qofka ku xiran: ciduna uma baahna inay aaminto fikradda (waxay khuseysaa feminismka oo keliya)

3.4.2 Dhibaatooyinka "Standpoint Theory"

Standpoint theory (aragtida ah in cilmiga haweenka ka fiican yahay cilmiga ragga) waxay leedahay dhibaatooyin:

Dhibaatada 1: "Epistemic Privilege"

- Feminismku wuxuu sheegaa in haweenku leeyihiin "epistemic privilege" (cilmi gaar ah) sababtoo ah waa "la dulmiyay" .

- Haddii ay sax tahay, marka dhammaan dadka la dulmiyay (saboolka, jinsiyadda, xitaa ragga qaarkood) sidoo kale waxay leeyihiin epistemic privilege.

- Haddii dhammaantood leeyihiin epistemic privilege, maxaa gaar u ah haweenka?

Dhibaatada 2: Kala Qaybsanaanta Haweenka:

- Feminismku wuxuu qiraa in haweenku ay kala duwan yihiin (midab, dhaqan, diin, dabaqad).

- Haddii ay kala duwan yihiin, marka qof haweeney ah oo dabaqad sare ah ma laha isla "standpoint" iyo qof haweeney ah oo dabaqad hoose ah.

- Tani waxay u kala qaybisaa "female standpoint" qaybo yaryar, ilaa ugu dambeyn qof kasta oo gaar ah (individual standpoint).

- Haddii qof kasta leeyahay standpoint , ma jiro "feminist standpoint" oo guud.

Dhibaatada 3: Dhibaatada "Gatekeeping":

- Yaa go'aamiya cidda leh "sax" feminist standpoint?

- Haddii aad tahay haweeney laakiin aad diiddo feminismka, ma leedahay "false consciousness"?

- Yaa go'aamiya cidda "dhabta ah" ee haweeney ah?

3.4.3 Naqdiinta Habka Cilmi-baarista

Feminismku wuxuu ku andacooda inuu leeyahay "hab cilmiyeed oo gaar ah" Balse:

1. Feminist Methodology waa mid aan kala sooci karin (non-falsifiable)

- Cilmi-baaris feminismka waxay inta badan ku salaysan tahay "qualitative" (tayo) ma aha "quantitative" (tiro).

- feminismka waxay diiddaan tirakoobka marka uu kasoo horjeedo fikradahooda.

- Laakiin tirakoobka iyo cilmiga tirooyinka ayaa ah habka ugu hufsan ee cilmiga .

2. "Cherry-picking" :

- Feminismku wuxuu doortaa xogta-taageeraysa fikradaha, wuxuuna diiddaa xogta ka soo horjeedda.

- Tusaale:xog tira koob ah oo muujieyso kala duwanaanta rag iyo dumar waydiidaan laakin tiro koob muujinaayo dulmi loo geystey su’aal la’aan ayey qaataan.

3. "Ad Hoc" Difaac:

- Marka cilmigu muujiyo wax ka soo horjeeda feminismka, jawaabtu waa:

"cilmigan waa patriarchal" ama "cilmigan waa sexist."

- Tani waa "ad hoc" difaac - difaac loo sameeyay si loo ilaaliyo bulsho rageedka, ma aha cilmi.

3.4.4 Tusaalooyin Cilmiyeed oo Feminismku Diiday

Tusaale 1 - Kala Duwanaanta Maskaxda “Neuroscience”

- Cilmi-baaris (Ingalhalikar et al., 2014 - PNAS) oo daraaseeysay 1,000 oo maskax ayaa muujisay kala duwanaansho qaab-dhismeed oo u dhexeeya ragga iyo haweenka.

- Feminismku wuxuu diiday cilmi-baaristan, isagoo sheegay inay tahay "patriarchal science" iyo "gender stereotyping."

- Laakiin cilmi-baaristan waxay ahayd mid madax bannaan

Tusaale 2 - Kala Duwanaanta Xiisaha

- Cilmi-baaris (Su, Rounds, & Armstrong, 2009 - Psychological Bulletin) oo ah meta-analysis ah 500,000 oo qof ayaa muujisay in ragga iyo haweenka ay leeyihiin xiiso kala duwan.

- Raggi waxay aad u xiiseeyaan shayga iyo nidaamyada .

- Haweenku waxay aad u xiiseeyaan dadka iyo daryeelka .

- Feminismku wuxuu diiday natiijadan, isagoo sheegay inay tahay "social construction."

- Laakiin kala duwanaantani waxay tahay mid laga helay 500,000 oo qof oo ka kala yimid 50 dhaqan oo kala duwan.

Tusaale 3 - Doorbida Carruurta

- Connellan et al. (2000) waxay muujisay in carruur 1 maalin jira ay muujiyaan kala duwanaansho xiiso.

- Carruurta lab-ka: aad ayey u fiiriyaan mechanical object.

- Carruurta dheddig: aad ayey u eegaan wejiga .

- Feminismku wuxuu diiday natiijadan, laakiin cilmi-baaristan waa mid la soo celiyay marar badan.

Tusaale 4 - Kala Duwanaanta Personality Big Five:

- Schmitt et al. (2017 - Journal of Personality and Social Psychology) oo daraaseeysay 55 dhaqan ayaa muujisay kala duwanaansho joogto ah oo

personality-ga.

- Haweenku waxay ku sareeyaan "neuroticism" iyo "agreeableness."

- Raggi waxay ku sareeyaan "assertiveness" iyo "openness to ideas."

- Feminismku wuxuu sheegaa in tani tahay "gender socialization."

3.4.5 isburinta "Social Construction"

Feminismku wuxuu ku dooddaa in kala duwanaanta ragga iyo haweenka ay tahay "social construction" (mid dhaqamada sameeyo). Laakiin:

Haddii "social construction" ay sax tahay:

- Marka kala duwanaanta ragga iyo haweenka waa la beddeli karaa.

- Laakiin intaas sano oo feminism ah ka dib, kala duwanaanta ragga iyo haweenka weli way jirtaa - dhammaan dhaqamada.

- Haddii "social construction" ay sax tahay, maxaa keena in kala duwanaanta ay weli jirto 6 decades of feminist intervention?

Tusaalaha Scandinavia:

- Dalka Sweden, Norway, iyo Denmark ayaa ah kuwa ugu sinnaanta badan caalamka oo dhaqankii hore waa laga takhalusay

- Laakiin kala duwanaanta ragga iyo haweenka ee xiisaha iyo doorashada shaqada waxay ka weyn tahay Scandinavia marka loo eego dalalka aan sinnaanta lahayn waan u tagi doonaa arintaan oo aad u faahfaahsan

Haweenka culuumta sayniska barta ee wadamada carabta(oo feminism u arkaan meel haweenka lagu liido) ay aad ugu badan yihiin kuwa wadamada scandinavia

- Tani waxay muujinaysaa in marka bulshadu siiso xoriyad, ragga iyo haweenku ay doortaan waxyaabo kala duwan sababtoo ah kala duwanaanta dabiiciga ah darteed.

Hadaad haweeney feminist waydiiso su’aashaan , kuma siin doonto jawaab cad waa hadii ayba fahamto su’aasha.

Ma ogtahay in waddamada Carabta iyo Bariga Dhexe ay yihiin waddamada ugu horreeya ee tirada haweenka ee wax ka baranaya jaamacadaha takhasusyada sayniska (fiisikis, injineernimo, kiimiko, STEM) adduunka oo dhan? Jazaa'ir ayaa ah lambarka koowaad sida ku cad daraasadaha, halka waddamada Scandinavian-ka ay ku jiraan kaalmaha ugu dambeeya

Maxay tahay sirta tanaaqudkaas? Sidee ayay dalal aan la filayn inay taageeraan sinnaanta jinsiga ay uga horreeyaan dalal si buuxda u taageera sinnaanta jinsiga?!!

Xaqiiqda ifafaalahan waa la darsay, waxaana loo bixiyay magac ah 'Is burinta Scandinavian-ka'. Sababta oo kooban ayaa ah in waddamada Scandinavian-ka ah ee aaminsan xorriyadda iyo shakhsiyadda buuxda, iyo sidoo kale heerka nololeed ee aadka u sarreeya, uu qofku leeyahay xorriyad buuxda oo uu ku barto takhasus kasta oo uu doono, iyada oo aan cadaadis ka imaan qoyska, bulshada, ama cadaadiska xaaladda dhaqaale oo laga yaabo inay ku qasabto takhasusyo uu neceb yahay laakiin u xaqiijinaya heer nololeed oo la aqbali karo (sida ay tahay xaaladda waddamada Carabta).

Sidaa darteed, waddamada Scandinavian-ka ah, gabadhu waxay baran kartaa takhasus kasta oo ay doonto iyada oo aan cadaadis lahayn. Laakiin waxa la yaabka leh ayaa ah in xorriyaddan buuxda ee gabadha ay soo bandhigtay farqiga u dhexeeya haweenka iyo ragga inbadan, waxayna burburisay aragtida sinnaanta. Gabadha Scandinavian-ka ah markii ay heshay xorriyad, ma ay dooran takhasusyada cilmiga ah, balse way ka carartay gebi ahaanba, waxayna u tagtay takhasusyada bani'aadamnimada iyo bulshada, taas oo muujinaysa in haweenku dabiiciyan aysan u janjeerin cilmiga dabiiciga ah iyo tignoolajiyada inta ay u janjeeraan cilmiga bani'aadamnimada

Halka waddamada Carabta, gabadha la geliyo xaalad gaar ah oo ku qasbaysa inay doorato takhasusyada bixiya lacagta ugu badan iyo darajada bulsho ee ugu sarreysa, sidaa darteed waxay u tagtaa takhasusyada cilmiga ah. Waxa arrinta u fududeeyay ayaa ah in takhasusyada cilmiga ah ee waddamada Carabta ay ku dhisan yihiin xifdin iyo wax barid kaliya, mana ku dhisna sahamin iyo hal-abuurnimo, si ka duwan sida ay tahay nidaamka Scandinavian-ka tusaale ahaan. Sida la og yahay, haweenku waxay u janjeeraan xifdinta iyo wax baridda in ka badan ragga, waxayna ka daciifsan yihiin ragga dhinaca sahaminta iyo hal-abuurnimada. si ka duwan sida ay tahay nidaamka Scandinavian-ka tusaale ahaan. Sida la og yahay, haweenku waxay u janjeeraan xifdinta iyo wax baridda in ka badan ragga, waxayna ka daciifsan yihiin ragga dhinaca sahaminta iyo hal-abuurnimada, sidaa darteed waxay ka heleen takhasusyada cilmiga ah ee waddamada Carabta mid la jaanqaadaya dabeecadooda, si ka duwan haweenka

reer Galbeedka.

Takhasusyada cilmiga ah ee ku dhisan taxliilka, soo saarma, hal-abuurnimada, iyo sahaminta, kana fog xiriirka bulshada, ma la jaanqaadaan dabeecadda haweenka. Waxaa taas xaqiijinaya tusaalaha waddamada Scandinavian-ka ah ee siiyay haweenka xorriyad buuxda oo ay ku doortaan, iyaguna waxay doorteen inaysan u tagin takhasusyadaas."

- hadalkaan qof ayaa x(twitter) soo dhigay

cabdulahi al khalifi oo tacliiq ka bixinaayo hadalkaas wuxuu yidhi: arrintuna waxay ila tahay mid ka fog inta la sheegay.

Waddamadeenu ma aha dalal ku tiirsan sinnaanta (iyadoo ay adag tahay in si dhab ah loo hirgeliyo), laakiin waxay ku tiirsan yihiin aragtida 'kala soocida togan' , taas oo ah isku darka nidaamka xuquuqda Islaamka iyo waajibaadka libraaliyada . Tani waxay ku cadahay sharciyada xanaanada iyo masruufka ee waddamadeena, waxaana laga soo qaataa qoraallada shareecada iyo hadallada fuqahada waxa ay u arkaan inay haweenka ugu wanaagsan yihiin, wixii ka soo horjeedana waxay ku noqdaan nidaamka libraaliga ah. Sidaa darteed, weli waxaan ilaalinnaa meherka iyo masruufka, laakin , waxaa si cad ama si dadban loo diidaa guurka badan."

3.4.6 Natiijada: Feminismku waa Nidaam Xidhan

1. Cilmigu way diidaan haddii uu ka soo horjeedo feminismka:

- diinta ayaa faraysa arinkaan –wadaado dumar neceyb alifay diintaan

- Cilmi-baaris muujinaysa kala duwanaanta maskaxda "patriarchal science"

- Cilmi-baaris muujinaysa kala duwanaanta hormoonada "biological determinism"

- Cilmi-baaris muujinaysa faa'iidada qoyska "traditional propaganda"

- Cilmi-baaris muujinaysa farxadda haweenka qoyska -"false consciousness"

- Haddii aad tahay haweeney oo aad diido feminismka: "false Consciousness, pick me."

- Haddii aad tahay nin oo aad naqdidayso feminismka: "misogyny."

- Haddii aad diido LGBT: " homophobia."

- jawaab cilmiyeed ma jirto , jawaabaha oo dhan waa weerar shakhsiyeed.

Dhamaadka cutubkaan waxaan leeyahay doqonimada feminsts xittaa hadii la sameeyo sinaan dhaqaale iyo mid siyaasadeed waxay u haystaan inay horseedeyso sinaan fidhri iyo shucuureed

CUTUBKA 4

Hoos u dhaca farxadda haweenka

4.0 HORDHAC CUTUBKA

Paradox of Declining Female Happiness

Stevenson iyo Wolfers (2009) ayaa muujiyay in kasta oo nolosha haweenka ay tahay mid ka fiican tahay 35kii sano ee la soo dhaafay marka loo eego cabirrada shucuureed, farxadda haweenku hoos u dhacday, labadaba si buuxda iyo marka loo eego ragga.

Tani waa paradox: markii feminismku ku andacodeen inay haweenka u soo dhiciyeen "guul weyn" helista shaqooyinka, waxbarashada, xuquuqda farxadda haweenku way yaraatay. Su'aasha weyni waa: sababta?

4.1 XOGTA IYO CILMI-BAARISTA: MAXAA DHACAY?

4.1.1 Hordhac

Cilmi-baarayaasha Stevenson iyo Wolfers (2009) ayaa isticmaalay xog badan oo kala duwan: General Social Survey (GSS), Eurobarometer, iyo kuwa kale. Waxay baareen farxadda haweenka iyo ragga laga soo bilaabo 1970-meeyadii ilaa 2000-meeyadii.

Natiijadu waxay ahayd mid layaab leh: haweenkii 1970-meeyadii waxay ahaayeen kuwo ka faraxsan ragga, laakiin 30 sano ka dib, farxaddoodu hoos eyey u dhacday iyadoo raggu noqday kuwa ka faraxsan.

4.1.2 Natiijooyinka Guud

Xogta GSS General Social Survey:

1972:

- Haweenka: 35% ayaa sheegay inay "aad u faraxsan yihiin"

- Ragguna: 28% ayaa sheegay inay "aad u faraxsan yihiin"

- Farqiga: Haweenku waxay ahaayeen 7% kuwa ka faraxsan ragga

2006:

- Haweenka: 28% ayaa sheegay inay "aad u faraxsan yihiin"

- Ragguna: 30% ayaa sheegay inay "aad u faraxsan yihiin"

- Farqiga: Raggii ayaa noqday 2% kuwa ka faraxsan haweenka

Tani waa isbeddel weyn: 35 sano gudahood, farxadda haweenku hoos ayey u dhacday.

Stevenson iyo Wolfers waxay sheegeen:

"The lives of women in the United States have improved over the past 35 years by many objective measures, yet measures of subjective well-being indicate that women's happiness has declined both absolutely and relative to men."

"Inkasta oo xaaladaha nolosha haweenka Maraykanka ay dhinacyo badan ka soo hagaageen 35-kii sano ee u dambeeyay, daraasadaha ku saabsan farxadda iyo qanacsanaanta nolosha ayaa muujinaya in haweenku maanta ka farxad yar yihiin sidii hore, sidoo kalena ay ka farxad yar yihiin marka loo eego ragga"

4.1.3 Xogta Caalamiga

Ifafaalahani kuma koobna Maraykanka oo keliya. Stevenson iyo Wolfers waxay heleen isla natiijada dalalka Yurub iyo kuwa warshadaha horumaray:

Europe (Eurobarometer)

- Farxadda haweenku hoo ayey u dhacday marka la eego ragga

- Isbeddelkaani wuxuu ka dhacay dhammaan da'da, heerka waxbarashada, iyo heerka dakhliga

Waddamada kale ee horumaray:

- Kanada, Australia, Japan: isla natiijooyin la mid ah

- Haweenku waxay noqdeen kuwo aan faraxsanayn marka la eego ragga

Xogtu been ma sheegto. Marka feminism-ku yiraahdo wuxuu xoreeyay haweenka, waxaad waydiisaa: haweeneyda maanta ma ka farxad badan tahay sidii ay ahayd konton sano ka hor? Jawaabtu waa maya

Xaqiiqda jirta ayaa ah in sida ay u kordhaan xuquuqda haweenka sida feminism-ku u qeexo, ay hoos u sii dhacdo farxaddoodu. Arrintani ma aha mid si kadis ah u dhacday , waayo feminism lid ayuu ku yahay dumarnimo

4.2 SABABAHA HOOS U DHACA FARXADDA

4.2.1 Hordhac

Maxaa sababay hoos u dhaca farxadda haweenka? Stevenson iyo Wolfers waxay bixiyaan dhowr sababood . Laakiin fahamka dheer wuxuu u baahan yahay in la eego saamaynta feminismka.

4.2.2 Sababaha Cilmiyeed

Stevenson iyo Wolfers waxay soo jeediyeen dhowr sababood:

Reference Group Shift:

Haweenku waxay hore u isbarbardhigi jireen haweenka kale. Laakiin hadda, waxay isbarbardhigaan ragga. Tani waxay ka dhigeysaa inay dareemaan in noloshoodu "ka yar tahay".

Increased Pressure

Haweenka hadda waxay isku dayaan inay "wax walba helaan" : shaqo, qoys, hooyonimo, qurux, iyo xorriyad. Tani waa culeys weyn.

Complexity of Life

Noloshu way kakantahay. Haweenku waxay leeyihiin doorar badan oo ay doortaan, taas oo keenta walaac iyo shaki.

Sida ay u badanayaan fursadaha iyo doorashooyinka haweeneydu haysato, ayay u sii kordhaysaa culayskeeda nafsiyeed. Xorriyadda buuxda ma keento farxad, balse waxay keentaa wareer iyo hubanti la'aan.

Dumarka waxaa dabeecad ahaan loogu talagalay doorka hooyonimo iyo xaasnimo. Haddii haweeneydu isku daydo inay la mid noqoto ragga, waxay ka leexanaysaa fitradeeda, taas oo sabab u noqota cuduro nafsi ah iyo qanacsanaan la'aan.

Bal u fiirso , xilliyadii hore nolosha way ka adkeyd hadda , sidaa ay tahay dumarkii xilligaa noolaa way ka farxad badan yihiin kuwa hadda nool , halka ragga hadda nool ay ka farxad badan yihiin kuwii hore . jawaabta arintaan waxay u cadahay sida qoraxda

4.3 FEMINISMKA IYO SAAMAYNTA FARXADDA

4.3.1 Hordhac

Feminismku wuxuu sheeganayaa inuu xoreeyay haweenka. Laakiin xogtu waxay muujinaysaa in farxaddoodu hoos u dhacday. Maxay tahay xidhiidhka u dhexeeya feminismka iyo hoos u dhaca farxadda?

4.3.2 "Wax Walba Hel"

Mid ka mid ah fikradaha ugu weyn ee feminismka casriga ahi waa in haweeneydu waxay yeelan karto "wax walba" shaqo, qoys, carruur, iyo xorriyad Laakiin tani way adagtahay. Waa markaan ka hadalno feminism-ka bariga waayo tan galbeedka qaar kamid ah caruur iyo qoys qorshaha ugu ma jiro

Fikradaan wax walba hel ayaa aad u saamaysa gabadha , waayo ma awoodo inay waxaan oo dhan kulmiso, hadii ay xooga saarto wax barasho , dhalinyarnimadeeda ku bixiso wax barasho waxaa meesha ka baxaayo fursadah ay qoys iyo caruur fiican ku dhisato , hadii ay shaqeyso waxaa yar fursadaha ay caruurta ayada ku koriso , hadii ay hooyo noqoto waxaa yar fursadaha ay shaqo iyo wax barasho ku qaadato.

Intaa waa un inay mid u go'do , haday taa dhicin ay aad ugu jahwareeto

Hadii qof yiraahdo , maxaa khasab ka dhigaayo inay mid qaadato kuwa kale ka tagto , waxaan leenahay markaan leenahay wax barasho iyo shaqo waxaan kala jeedaa sida ay u qeexaan ayaga , waayo nidaamka wax barasho ee caalamka hadda jira waa mid adag in lagu lamaano hooyanimo iyo shaqo, nidaamyadii ka horeeyey ee islamiga aha haweeneyda waxbarasho kama horistaagi jirin hooyanimo , laakin nidaamkaan waa mid aad u adag

Saamaynta fikraddan:

Haweenku waxay isku dayaan inay ku guuleystaan dhammaan meelaha. Tani waa culeys weyn oo maskaxeed Marka aysan ku guuleysan dhammaan meelaha, waxay dareemaan niyad jab. Cadaadiska joogtada ahi wuxuu keenaa walaac.

4.3.3 xaqirida Doorka Hooyada

Feminismku wuxuu xaqiray doorka hooyada. Haweenka waxaa loo sheegay in hooyonimadu tahay shaqo aan muhiim ahayn, oo ay tahay inay raadsadaan shaqo "dhab ah". (wixii dumar u gaar ah way xaqiraan)

Dambiga ugu weyn ee feminism-ku ka galay haweenka waa inuu ka dhigay inay xaqiraan doorkooda ugu weyn: hooyonimada. Hooyonimadu addoonsi ma aha; waa sharaf iyo karaamo."

Haweenka hooyooyinka ah waxaa loo sheegay in doorkoodu yahay mid liita. Tani waxay ka dhigeysaa kuwo aan ku faraxsanayn doorkooda.

Haweenku waxay carruurtooda u dhiibaan xannaano. Carruurtan waxay ku koraan iyagoo aan la lahayn xidhiidh adag hooyadood.

Marka hooyadu ay ka maqan tahay guriga, qoysku wuu kala furmaa. Tani waxay saameysaa haweenka iyo carruurta.

Marka haweeneyda lagu barbaariyo inay tahay dhibbane, waxay barataa tabardarro waxayna lumisaa farxadda. Qofka isu arka dhibbane ma noqon karo mid faraxsan, sababtoo ah wuxuu isu arkaa mid aan awood lahayn."

4.4 ISBARBARDHIGGA: NOLOSHA HAWEENKA KA HOR IYO KA DIB FEMINISMKA

Ka Hor Feminismka

- Haweenku waxay lahaayeen qoys xasilloon

- Doorkoodu wuxuu ahaa hooyo iyo guri-joog

- Xogtu waxay muujinaysaa in haweenku ay ahaayeen kuwo faraxsan

- Waxay lahaayeen xiriir adag oo qoys

- Haweenku waxay ku qanacsanaayeen doorkooda

- Waxay dareemi jireen karaamo iyo qiimo

Ka Dib Feminismka

Xasillooni la'aan

- Qoysaska way kala fureen

- Haweenku waxaa lagu khasbay doorarkii ragga

- Qiyamkoodu way isbeddeleen

- Xogtu waxay muujinaysaa in farxaddoodu hoos u dhacday

- Xiriirka qoyska daciifay

- Haweenku ma ku qanacsana doorkooda

- Waxay dareemaan inay ku guuldaraysteen "wax walba hel"

dumarka ka hor feminism-ka waxay lahaayeen aqoonsi cad oo ay ku qanacsanaayeen. Feminism-ka ka dibna waxay lumiyeen aqoonsigaas, waxayna noqdeen kuwo wareersan oo aan ku qanacsanayn noloshooda.

feminism-ku wuxuu dumarka u ballanqaaday nolol wanaagsan, xorriyad iyo farxad, hase yeeshee wuxuu u horseeday dhibaato, caqabado iyo murugo

4.5 : MAXAA LUMAY?

Feminismku wuxuu haweenka siiyay waxyaabo badan, laakiin wuxuu ka qaaday waxyaabo muhiim ah. Maxaa lumay?

Waxyaabihii Lalaayey

Haweenku waxay lahaayeen qoys xasilloon. Feminismku wuxuu yiri: "Qoysku waa xabsi.". Feminismku wuxuu baray haweenka in raggu yahay cadow. Tani waxay burburisay xiriirka u dhexeeya labada. Haweenku waxay lumayeen jaceylka iyo xidhiidhka. Hooyonimadu waxay ahayd il farxadda ugu weyn. Laakiin feminismku wuxuu yiri: "Hooyonimadu waa dulmi." Haweenku waxay lumayeen farxadda hooyonimo.
Haweenku waxay lahaayeen nabadgelyo. Feminismku wuxuu keenay walaac, cadaadis, iyo shaki.

haweeneydu waxay farxad ku heshaa marka ay dheellitirto doorkeeda hooyonimo, xaasnimo, iyo shakhsiyaddeeda bini'aadamnimo. Feminism-ku wuxuu khalkhal geliyey dheellitirkan xalkana waa inay u laabato fidhradeeda."

CUTUBKA 5

FEMINISMKA IYO KALA FURIDDA QOYSKA

5.0 HORDHAC CUTUBKA

Qoysku waa xudunta ugu horreysa ee bulshada. Ma jiro ilbaxnimo oo ka badbaaday burburka qoyska.

Feminismku, gaar ahaan mowjaddii labaad (1960s-1970s) iyo saddexaad (1990s-2010s), wuxuu si toos ah u weeraray qoyska isagoo u arkayay inuu yahay "mid dulmiya" oo "haweenka xidha." Laakiin haddii aynu eegno natiijooyinka cilmiga ah ma jiro cilmi-baaris awood leh oo muujinaysa in qoysku yahay mid waxyeello u leh haweenka. Taa beddelkeeda, cilmigu wuxuu muujinayaa inburburka qoysku uu waxyeello u leeyahay qof kastarag, haween, iyo carruurba.

Qur'aanka wuxuu sheegayaa in guurku yahay "sakiinah" (xasillooni) iyo "mawadda iyo naxariis." Cilmiga attachment theory wuxuu muujinayaa in bini'aadamku u baahan yahay xiriir xasiloon leh si uu u noolaado. Guurku waa qaabka ugu wanaagsan ee bixinta xiriirkan.

Qoysku ma aha oo keliya qaab-dhismeed dhaqameed waa qaab-dhismeed binary ah oo ku xidhan biology-da bini'aadamka.

Cilmiga neuroscience wuxuu muujiyay in xiriirka labada waalid iyo carruurta uu ku xidhan yahay hormoonka oxytocin. Daraasadaha neuroscience waxay muujinayaan in carruurta ku koraan qoys aan dhammeystirneyn ay leeyihiin heerarka oxytocin oo hoose, taas oo keenta dhibaatooyin xiriir iyo niyadda.

Bini'aadamku wuxuu leeyahay kala duwanaansho weyn oo u dhexeeya lab iyo dheddig Kumaana kala duwana jir ahaan oo keliya, balse maskax ahaan, hormone ahaan, iyo dopamine/serotonin pathways. Qoysku wuxuu u baahan yahay labada nooc

Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in 90% maskaxda carruurtu ay horumarayso 5 sano ee ugu horreysa. Haddii carruurtu aan helin daryeel ku filan muddadaas, dhibaato maskaxeed ayaa dhaca.

Haddii aynu eegno saamaynta feminismka qoyska, waa inaynu is-weydiinno: maxaa dhacay markii feminismku uu ku guulaystay inuu qoyska weeraro?

Waa kuwan natiijooyinka

-Doorka hooyanimo hoos u dhigeen oo ay ka dhigeen shay liito , kortinta caruurta waxay ku badaleen xaaneynta bisadaha iyo eeyaha “waa laga yaabaa haweeney feminist oo wayn inaad gurigeeda ka wayso caruur laakin kama wayneysid bisad ama eey”

- Doorka aabanimo way liideen taa oo hoos u dhigtay saamaynta uu aabaha ku leeyahay caruurta daraasado badan ayaa muujiyey in maqnaasha aabo uu caruurta ku sababo cuduro nafsi ah

- Sannadkii 1960, heerka furiinka Maraykanka wuxuu ahaa 25%. Sannadkii 1980, wuxuu kor u kacay 50%. cilmigu wuxuu muujinayaa in carruurta qoysaska kala tagay ay leeyihiin dhibaatooyin badan.

-Heerka dhalashadu wuxuu hoos u dhacay si aad ah. Koofur Kuuriya: 0.72 (2023). Tani waa dhibaato demografig oo aan la xallin Karin bal qiyaas wax dowlado iyo boqortooyooyin awoodi waayeen inay feminism ku samaysay sanado yar gudaheed, taarikhda insaanka in dhalasada sidaan u yaaratay garanmaayo , wax kasacodo caalamka gaar ahaan japan , kuuriyada koonfur wax ku dhacay waa duulaan halka galbeedka uu dhibaatadaas ku xalliyey muhaajiriinta , laakin xilli aa fogayna dadka ugu badan ee galbeedka wuxuu noqon doonaa muhaajiriinta.

- marka feminism ay la dagaalantay mu’asasada guurka , waxaa dabiici ah insaanka inuu leeyahay shahwo , marka badalka guurka waxaa galay zinada , zinada waxay sababtay caruur badan oo wecelo ah , iyo balaayiin caruur ah la dilo , tani xittaa ma awoodin tataarka iyo saliibiyiinta

MAQNAANSHAAHA AABAHA

Mid ka mid ah saamaynta ugu daran ee feminismku qoyska ku yeeshay waa maqnaanshaha aabaha. Haddaba, bal aan eegno waxa cilmiga neuroscience iyo psychology ay muujinayaan.

Cilmi-baarista neuroscience waxay muujinaysaa in aabuhu uu yahay mid aan laga maarmin horumarinta maskaxda carruurta

Daraasadaha (Ellis et al., 2003; Belsky et al., 2007) waxay muujinayaan in carruurta aabbahood ka maqan yahay ay soo gaaraan da'da qaangaarka goor hore. Tan waxaa sabab u ah culeyska nafsiyeed ee ay dareemaan.

Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in aabuhu uu door muhiim ah ka qaato xakamaynta xanaaqa carruurta, gaar ahaan wiilasha.Daraasad (Pougnet et al., 2011) waxay muujinaysaa in wiilasha aabbahood ku jiro qoyska ay leeyihiin xakamayn wanaagsan oo xanaaqa, iyo dhibaato yar oo dabeecad.

Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in aabayaashu ay carruurta u adeegsadaan luqad kala duwan Daraasad (Pancsofar & Vernon-Feagans, 2006) waxay muujinaysaa in carruurta uu aabuhu la hadlo ay leeyihiin luqad wanaagsan marka ay 2-3 sano jiraan.

Aabuhu wuxuu carruurta baraa sida loo xakameeyo shucuurta Carruurta aabbe la'aanta ah waxay leeyihiin heer sare oo anxiety, depression, iyo stress.

Waa kuwan natiijooyinka daraasada weyn ee McLanahan & Sandefur (1994):

Carruurta aabbahood ka maqan yahay:

- 2x jeer ayay u badan tahay inay ka tagaan dugsiga

- 3x jeer ayay u badan tahay inay yeeshaan behavioral problems

- 70% dambiilayaasha xabsiga Maraykanka waxay ka yimaadeen qoys aabbe la'aan ah

Amato & Keith (1991) waxay daraasad ku sameeyeen 30,000+ qof oo qoysaska kala tagay. Natiijadu: carruurtu waxay leeyihiin natiijooyin liita marka loo eego carruurta qoysaska xasilloon:

Neuroscience: Why Father Absence Damages the Brain

amygdala (xarunta cabsida iyo xanaaqa) wuxuu si khaldan u horumaraa carruurta aabbe la'aanta ah. Waxay leeyihiin amygdala firfircoon , aas oo keenta anxiety iyo stress.

PFC (xarunta go'aan qaadashada iyo xakamaynta xanaaqa) wuxuu si daciif ah u horumaraa carruurta aabbahood ka maqan. Tani waxay sharraxaysaa sababta carruurtani ay u leeyihiin dhibaato xakamayn xanaaq.

Carruurta aabbe la'aanta ah waxay leeyihiin HPA axis (stress response system) oo khaldan. Waxay soo saaraan cortisol (stress hormone) badan, taas oo waxyeello u geysata maskaxda iyo jirka.

Aabuhu waa rukunka qoyska. Ma aha oo keliya "qof dhaqaale bixiyo" ,balse waa "macallim," "murabbi," iyo "saanid" .

Akhriste arintaan si fiican ugu fiirso , intaan oo dhibaato ayey caruurta ka dhexlaan maqnaashaha aabaha , bal kawaran maqnaashaha hooyada oo aabaha ka saamayn badan , maqnaashaha kala ma jeedo sida aabaha , bal mid ka daran , inay shaqo iyo waxbarasho ka doorbiddo caruurta , in xanaano iyo shaqaale koriyaan caruurta badalkii hooyadood, ma qiyaasi kartaa dhibaatada laga dhexlaayo midaa

Economics of Homemaking

Daraasad (Oxfam, 2018) waxay muujinaysaa in shaqada guriga ay tahay $10.8 trillion sanadkii - 13% GDP-ga caalamka. Tani waamin ka badan warshadaha otomaatiga , teknoolojiyadda tech, iyo dhismaha oo la isku daro.

Hooyada guriga joogta waxay bixisaa "return on investment" aad u sarreeya:

- Carruurta hooyadood joogto waxay leeyihiin dakhli sare (25% more) marka ay weynaadaan (Kalil et al., 2012)

- Carruurtu waxay leeyihiin caafimaad wanaagsan

- Qoysku wuxuu kaydiyaa $10,000+ sanadkii

Feminismku wuxuu haweeneyda u adeegay shirkadaha ra’sumaaliga a. Shirkadaha weyni waxay u baahan yihiin shaqaale .

80% go'aamada iibsashada waxaa sameeya haweenku. Markay shaqeeyaan, waxay iibiyaan wax badan.

Markay haweeney shaqeyso , inta ay qaadatay badankiisa isla mu’asasada ra’sumaaliyadda ayey ku soo celisaa , halka ninka uu caksiga yahay lacagta uu badnaa shaqeeyo uu qoyska ku bixiyo

Neuroscience of Motherhood

Hooyadu ma aha oo keliya "shaqaale guri" waa qofka ugu muhiimsan horumarinta maskaxda carruurta.

Maskaxda carruurtu waxay ku horumaraysaa "critical periods" waqtiyo muhiim ah. 0-3 sano jir haddii aynu ka qaadno daryeelka hooyada(inay ka tagto ,ama shaqo iyo waxbarasho kaga mashquusho), dhaawac maskaxeed ayaa dhaca. Tani ma aha "sheeko dhaqameed" waa xaqiiqo neurological ah.

HAWEENKA U DHEXEYSA GURIGA IYO SHAQADA

Cilmiga psychology wuxuu muujinayaa in haweeneydu markay leedahay laba shaqo (guri iyo shirkad) ay leedahay "cognitive load" aad u sarreeya. Maskaxdu waxay u baahan tahay nasasho si ay u shaqeyso.

Waxaana qofna diidi Karin in jirka gabdha uu ka daciifsan yahay kan ninka, marka intaas saacad soo shaqeyso oo ay guriga timaado , ma awoodo shaqooyinka guriga , hadii ay tahay xanaaneynta caruurta , ama inay la haasawdo ninkeed oo ah asbaabaha kamid ah nikaax, hadii taa la waayo ay adkaaneyso xiriirka qoyska, haasawnimada waxay u baahantahay dagnaan maskaxeed iyo jireed , midaan lagama heli karo haweeney intaas saacad banaanka ku soo shaqeyneysay , markay timaado waxay u baahan tahay nasasho

Carruurta hooyadood shaqeeyso waxay leeyihiin attachment anxiety. Daraasad (Belsky, 2001) waxay muujinaysaa in carruurta hooyadood shaqeeyso ay leeyihiin dhibaato xiriir marka ay weynaadaan.

Halkaan waxaa laga yaabaa inaad su’aal iska waydiiso , soo anaga ka soomaliyeed miyeyna hooyooyinkeena shaqeynin.

Dabcan haa , badanka hooyooyinka way shaqeeyaan , laakin tan iyo taa kaaf iyo kala dheeri u dhaxaysa

Tan Somali marka 1aad duruuf aa ku kalliftay , haday wax haysan lahayd hooyada , banaanka uma soo bixi lahayn , tan labaad shaqada badnaa ma aha mid ka horistaageyso xanaaneynta caruurta , xitta ayada oo shaqeyso caruurta kama maqnaato , waa shaqo xor ah oo kaligeed qabsato .

daahinta guurka

mid kamid ah waxyaabaha ay feminsim gaar ahaan tan bariga ku dhiiriso haweenka ayaa ah daahinta guurka , ayagoo aad u dhaleeceeya guurka gabadha da'da yar , ayna ku doodaan in gabadh da'yar aysan xamili karin masuuliyadda guurka , isla gabadhaas ay ku dhiiri galiyaan xamilida masuuliyadda waxbarashada , xiriirada xaaraanta ah ee jacaylka , bal arag shaydaanka sida uu ula dagaalamay cifada , halka xaaraanta u qurxiey

arinta daahinta guurka wuxuu leeyahay dhibaatooyin badan aad u saameeya insaanka guud ahaan , haweenka gaar ahaan

tan 1aad ee waxaa jira farqiga biology u dhaxeeya ragga iyo haweenk

haweenka waxay la dhashaan ugxaan tiro ahaan go'an , markasta oo ay waynaato ugxaanta way yaraataa , tayadana way liidataa taa oo ka dhigan dumarka inay leeyihiin waqti biology ah , markasta oo haweeneyda waynaato , waxaa yaraada fursadaha ay ku dhali karto caruur iyo caruur caafimaad qaba, taa oo caksiga ninka ha , ninka xitta hadii uu jiro 90 sano oo caafimad qabo uu wali fursad fiicanhaysto , halka gabadha 30 gaartay laga yaabo in fursadaha yaraadaan

hadaba ma caqli baa , in sanadaha ugu wanaagsan haweeneyda caafimaad ahaaan ee dhalinyarnimada inay dhumiso , xilliga ay awoodo caruur badan oo caafimad qaba ay ku beerdareyso meel kale

insaanka wuxuu leeyahay dabeecad fidhri ah oo uu u qabo dareen jinsiga kale , marka guurka la daahiyo , lama qarin karo shahwada , hadaba waxay yeelataa lawo xaaladood midkooda ka xun yahay kan kale

guurka hadii la daahiyo , imaa in xiriiro xaaran ah oo leh zino iyo fuxshi la sameeyo taa oo cawaaqib xun iyo cuduro laga dhexlo , hadii tan la samaynaayo maxaa lagu diidaa guurka oo dhowrsanaan ah iyo cifo

tan labaad ee imaa inay taa la samaynin , laakin ay caadooyin xun xun yeeshaan taa oo sidoo kale caafimaad darro leh , ayna adkaaneyso inay hadhow guurka gogoasha ayna u cuntoobin maadma ay la qabsadeen qaabab kale

miyey lawada xaalad kala darneen oo culeys iyo dhibaato lahayn halka guurka uu yahay daawada dhibaatooyinkaan

daahida guurka rag iyo dumar waa ku ceeb sabab la'aan , mid ragga waa loogu cudur daari karaa , maadaama ay yihiin masuul , laga rabo waajibaat hadii uusan awoodin uusan guursan karin sida masruufka , waayo qofkaan wax haysanin ma guursan karo , laakin gabadha wax masuuliyad oo waajibaat ah ma saarna , marka waa ku ceeb inay gabar muslim guurka ka daahdo , ay nafteeda u bandhigto fitnooyiin.

dumarka da'da yar waa marka ay jir ahaan aad u qurxon yihiin , aadna u soo jiidasho badan yihiin , xilligaa waa xilliga ugu haboon ay guursan karan nin leh sifaat wanagsan diinta amaantay sida akhlaaqda , caqliga iyo dhowrsanaanto, waayo xilliga waxaa soo gaar dalabyo badan oo guur ah , hadii ay qasaariso da'deeda sii karadho , way adag tahay nin leh sifaatkas inuu soo doonto , waayo maqaasida guurka waxaa kamid ah in guurka laga helo raaxo , awlaad wanaagsan , halka gabdha da'da wyn aysan lawadaas laga heli karin , marka way adagtahay in nin caqligiisa kaamil yahay uu aqbalo ilaa inay daruuf ku kallifto mooyee

hadaba yaa u roon gabadha in xilligeed ugu wanaagsan ay doorato ninkaas sifaatka wanaagsan leh , ayadan ay marayso xilligeeda ugu wanaagsan , ayna xaqiijin karaan dhamaan maqaasida nikaax , sida nolol macaan , awolaad maskax ahaan fiican , nolol dagan. Mise in ay fursadaas ku qasaariso meel kale.

daahinta guurka waxaa ka dhalata faafinta fuxshiga iyo akhlaaqo xumo , waxaa jira maqaalo ay qoreen kanaalka wahmul calmaaniyah oo aad u wancaa. Waana wax kamid ah maqaalka ay qoreen

Bal qiyaas haddii aan kuu sheego in burburka akhlaaqda iyo xoraynta shahwooyinka ay ahaayeen sababta ugu weyn ee burburka xadaarooyinkii ugu waaweynaa taariikhda aadanaha, sida ilbaxnimadii Giriigga, Roomaanka, Baabiloon, Sumaariya, iyo Ashuuriya, iyo xitaa ilbaxnimadii Muslimiinta ee Andalus.
Burburka xadaaraakan ma ahayn mid ay sabab u ahayd dhaqaale xumo ama ciidamo shisheeye, sida uu sheegay taariikhyahan Arnold Toynbee daraasadihiisa taariikhda, balse burburku wuxuu ka bilowday hoos u dhaca akhlaaqda bulshada.
Wuxuu sheegay:
"19 ka mid ah 21-kii ilbaxnimo ee ugu waaweynaa taariikhda, waxay ku burbureen musuqmaasuq akhlaaqeed gudaha ah iyo luminta xakamaynta dareenkooda galmo, ma ahayn cadow shisheeye."
Maqaalkaygan waxaan ku qaatay shan maalmood, si aan ugu dambayn u helo taariikhyahan Maraykan ah, Will Durant, oo soo koobay maqaalkan oo dhan hadalkiisii caanka ahaa:
"Qoomamku waxay ku dhashaan Stoic, waxayna ku dhintaan Epicurean. Diintu waxay ag taagan tahay sariirtooda, falsafaduna waxay la socotaa xabaashooda."
Waxyaabaha ka dhacaya Masar maanta waa natiijada Epicureanism-ka, iyo waxa maanta Galbeedka ku hanjabaya inuu baaba'o, sida ay sheegaan cilmi-baarayaashu, oo ay Carabtu ku farxeen iyagoo soo dhoofsanaya fikradahooda

iyagoo ka tagaya sharciga Alle, ma aha waxaan ahayn horumarinta fikraddan Epicurus.

Ma fahmin, sax? Aan kuu sharaxo!
Falsafadda Stoic-ga ah ee Durant halkan ula jeedo ma aha falsafaddii hore ee Giriigga lafteeda, balse wuxuu u sheegay calaamad ahaan u hoggaansanaanta adag ee waajibaadka, anshaxa akhlaaqda , iyo la tacaalidda dhibaatooyinka iyada oo aan loo eegin raaxada. Marxaladdan, ilbaxnimooyinka iyo bulshooyinka waxay ku taagan yihiin aasaas adag oo iimaan, diin, iyo fadli ah oo dhisa xooggooda.
Laakiin waxay ku dhintaan Epicurean!
Haa, inta badan ilbaxnimooyinka taariikhda waxay ku burbureen Epicureanism, iyagoo aad ugu mashquulsan raaxada. Waxay ula jeedaa falsafadda Epicurus, oo raadisa raaxada iyo ka fogaanshaha xanuunka, iyadoo raaxada iyo nasashada ka dhigaysa hadafka ugu sarreeya. Falsafaddan ayaa maanta horumartay (iyada oo loo marayo waxyaabo badan oo lagu daray iyo horumarin aanan sharxi doonin) si ay ugu dhaliso falsafadda casriga ah ee utilitarianism, taas oo ah ruuxa akhlaaqda ee aasaaska u ah calmaaniyadda iyo feminsim: samee waxaad doonto, ku raaxayso, waxaad tahay xor hadii aadan waxyeello u geysan cid kale.
Sidaa darteed, Durant , sida taariikhyahannada kale, cilmi-baarayaasha bulshada, iyo cilmi-baarayaasha aadanaha, wuxuu xaqiijinayaa in bilowga ilbaxnimo kasta, ay leedahay iimaan diimeed xooggan oo siiya dadka geesinimo iyo dulqaad ay ku xamilaan xanuunka iyo dhibaatooyinka iyo shaqada adag. Laakiin marka ilbaxnimadani ay gaarto heerkeedii ugu sarreeyay ee guusha iyo barwaaqada, waxay bilaabataa inay raadiso raaxada iyo madadaalada, iyadoo diinta ka tagaysa oo shaki gelinaysa, ka dibna burburka akhlaaqda iyo galmada, ka dibna ugu dambayn way burburtaa. "Ilbaxnimooyinku waxay ku bilowdaan Stoic, waxayna ku dhintaan Epicurean."

Xishoodku waa asal aan la samayn!

Sidaa darteed, xishoodka iyo daahirsanaanta waxay la xiriireen dhismaha ilbaxnimooyinkii ugu waaweynaa, burburkuna wuxuu la xiriiray burburkooda.
Daraasado badan oo cilmi-baaris ah ayaa xaqiijinaya in xijaabka, daahirsanaanta, iyo xishoodka ay ahaayeen dabeecad guud oo ka jirtay ilbaxnimooyinkii taariikhda aadanaha.
Waxaa xaqiijinaya tan daraasado badan oo cilmi-baaris ah, sida daraasadda "Evolution of Hijab: A Review" , oo ah warqad cilmi-baaris ah oo lagu daabacay joornaal caalami ah oo isku dhafan (Online International Interdisciplinary Research Journal), iyo daraasad kale
Guud ahaan daraasadooyinkan waxay xaqiijinayaan, iyagoo adeegsanaya ilo taariikhi ah, in xijaabka iyo xishoodka ay ahaayeen caadadii dumarka waagii hore Yurub sida (Giriigga, Faaris, Roomaanka, Ashuuriya, Jarmalka), iyo sidoo kale ilbaxnimadii Mesopotamia, Sumaariya, iyo Baabiloon. Xitaa Japan iyo

Boqortooyadii Shiinaha, dumarku waxay ahaayeen kuwo xishood badan, tusaale ahaan, qoysaskii Qin iyo Han (bilowgii Boqortooyadii Shiinaha) waxay dumarka ku waajibiyeen xijaab daboolan, daahirsanaantuna waxay ahayd asal, ilaa ay ka timid qoyskii Tang , markaas oo Shiinaha uu ahaa (heerka ugu sarreeya ee barwaaqada dhaqaale iyo furfurnaanta), dadkuna waxay ku mashquuleen raaxada iyo raadinta shahwooyinka, waxaana soo baxay burburka akhlaaqda oo la socday heerka dhaqaale ee raaxada leh. Tani waxay ka muuqataa sawirada muujinaya dharka dumarka ee aan xishoodka lahayn, iyo dhar qoorta ka furan, iyo dhar khafiif ah oo muujinaya dumarka timaha ka furan xilligaas, sidaas darteed waxay ku dhashaan Stoic, waxayna ku dhintaan Epicurean.
Soo bixitaanka burburka iyo qaawanaanta waxay had iyo jeer ka horraysaa burburka ilbaxnimo kasta, xijaabka wuxuu had iyo jeer la xiriiray bilowga ilbaxnimada, wuxuuna astaan u ahaa fadliga iyo daahirsanaanta haweenka.

Xorriyadda galmada iyo xuquuqda haweenka miyey cadeyneysaa ilbaxnimo?

Daraasadaha taariikhda aadanaha maanta waxay qirayaan in daahirsanaanta iyo xishoodka ay taariikh ahaan la xiriireen bulshooyin isku xiran oo dhisay ilbaxnimooyin waaweyn, halka burburka akhlaaqda iyo fududaynta siinta haweenka xuquuq badan ay la xiriireen oo kaliya inay ku dhacaan fawaaxish, taasoo dhacday ka hor inta aanay ilbaxnimooyinkan iyo bulshooyinkan burburin. dhowrsanaanta waxay la xiriirtaa horumar, halka xorriyaddu ay la xiriirto burbur, waxay ku dhalataa Stoic, waxayna ku dhimataa Epicurean.

Aragtidan waxaa si cad u taageeraya cilmi-baare Joseph Daniel Unwin(faahfaahinteed waxaan ugu tagi doonaa cutubka xiga), oo ah cilmi-baare aan diin lahayn oo ka tirsan jaamacadaha Oxford iyo Cambridge, buugiisa: "sex and culture" . Buuggan, wuxuu ku daraaseeyay 86 bulsho iyo 6 ilbaxnimo muddo 5000 sano ah oo taariikhda aadanaha ah, isagoo eegay sida ay ku bilowdeen iyo sida ay ku dhammaadeen.

Buuggan wuxuu muujinayaa sida Unwin uu ugu adkeystay caddaymaha tijaabada ah, wuxuu soo gabagabeeyay in barwaaqada dhaqanka ee ilbaxnimo kasta ay si toos ah ugu xiran tahay adkaanta xaddidaadaha galmada ee ay leedahay, iyo in ka tagista daahirsanaanta ka hor guurka ay si lama huraan ah u horseeddo burburka bulshooyinka iyo burburka ilbaxnimada, taasoo uu ugu yeeray "heerka aan firfircoonayn" . Wuxuu sheegay in ilbaxnimadu ay burburto muddo saddex jiil ah (100 sano), waxayna gaartaa heerarkii ugu hooseeyay ee barwaaqada, dadkeeduna waxay noqdaan kuwo aan dan ka lahayn wax aan ahayn rabitaankooda iyo baahidooda gaarka ah, dhaqankuna wuxuu lumiyaa fikirkiisa caqliga ah. Wuxuu yiri:
"Bulsho kasta oo bini'aadan ah waxay xor u tahay inay doorato inay muujiso tamar weyn ama ay ku raaxaysato xorriyadda galmada,, caddayntu waxay muujinaysaa inaysan labadaba samayn karin in ka badan saddex jiil."

CUTUBKA 6
XADAARAHAHA IYO XUQUUQDHA HAWEENKA

6.0 HORDHAC CUTUBKA

Fg: waxaan kula talin lahaa qoraaga inuu dhamaysto cutubka oo dhan halmar , waxaa laga yaabaa inaad hal meel ama lawo aad akhris uu ku siin karo macne ka duwan kana aan rabo

Cutubkani waxaan ku lafa gurri doonaa xadaaradaha iyo xuquuqda haweenka, anagoo eegeyno cilmi-baarista J.D. Unwin oo ah cilmi-baare Ingiriis ah oo ku takhasusay cilmiga bulshada kana soo shaqeeyay Jaamacadda Cambridge.

Unwin wuxuu dersay 80 bulsho oo uu ku sheegey inaysan ilbaxsaneyn iyo 6 xadaarad oo waaweyn (Sumerian, Babylonian, Hellenic/Greek, Roman, Anglo-Saxon, iyo English) sida uu sheegay muddo 5,000 oo sano ah oo taariikhda aadanaha ah

Wuxuu doonayay inuu tijaabiyo fikradda ay soo jeediyeen culamada-nafsiga ee ah in xaddididda rabitaanka jinsiga ay keento tamar bulsho oo badan. Wuxuu yiri

"Waxaan bilaabay anigoo aan wax garanayn; haddii aan ogaan lahaa sida ay shaqadaydu iiga beddeli doonto falsafadayda, waxaa laga yaabaa in aan ka laba-labayn lahaa bilaabidda."

6.1 XUQUUQDHA HAWEENKA IYO BILAWGA XADAARAHAHA

6.1.1 Fursadda Jinsiga ee Haweenka: Cunsurka Ugu Muhiimsan

Unwin wuxuu yiri qaybta ugu muhiimsan ee cilmi-baaristiisa

"In the production of social energy the sexual opportunity of the females is a more important factor than that of the males."

Tan macneheedu waxa weeye in xaaladda jinsiga ee haweenka ay tahay cunsurka ugu saamaynta badan ee go'aamiya tamarta bulsho. Marka haweenka la xaddido fursadaha jinsiga (iyagoo ilaalinaya cifada ka hor guurka iyo daacadnimada kadib guurka), tamarta bulshadu way korodhaa. Marka la fudeeyo xaddiddaas, tamartu way hoos u dhacdaa.

wuxuu si cad u sheegay in fursadda jinsiga ee haweenka ay ka muhiimsan tahay fursadda jinsiga ee ragga.Marka haweenku ay leeyihiin ciffo iyo anshax jinsi oo adag, bulshada oo dhami waxay ka faa'iideysataa tamarta ka dhalata xaddiddaas.
Laakiin arrintani waxay leedahay dhinac kale oo muhiim ah: marka haweenka la siiyo xuquuq badan oo jinsi ah, bulshadu waxay u dhacdaa dhinaca tamarta yar.

6.1.2 "Legal Nonentities": Xaaladda Haweenka Bilawga Xadaaradaha

wuxuu caddeeyay in dhammaan xadaaradihii uu dersay ay ku bilaabmeen nidaam "absolute monogamy" (guur qasab ah oo kaliya oo daacadnimada lammaanuhu tahay qasab labada dhinacba). Nidaamkan wuxuu u baahnaa in haweenku ahaadaan kuwo aan lahayn xuquuq (legal nonentities)

Wuxuu yiri:
" Sumeriyiintii, Baabiliyiintii, Athenians-tii, Roomaankii, iyo Teutons-tii waxay taariikhdooda ku bilaabeen nidaam guur oo adag oo hal nin iyo hal naag ah (absolute monogamy) dhammaan xaaladahaasna haweenku ma lahayn xuquuq madax-bannaan"
Tan macneheedu waxa weeye in dhammaan xadaaradaha waaweyn ay ku bilaabeen nidaam jinsi oo aad u adag, halkaas oo haweenku aanay lahayn wax xuquuq ahHaweenku ma lahayn awood, ma lahayn hanti, ma lahayn aqoonsi sharcioo madax-bannaan. Waxay ahaayeen "legal nonentities"

wuxuu xusay tusaalooyin kala duwan:

SUMERIANS: " Waxay taariikhdooda ku bilaabeen nidaam guur oo adag oo hal nin iyo hal naag ah xaalad kasta haweenku ma lahayn jiritaan xuquuq oo madax-bannaan.

BABYLONIANS: Bilowgii, xaas waxaa lagu heli jiray lacag ama magdhow la siiyo waalidkeed; waxayna gebi ahaanba hoos iman jirtay ninkeeda dhammaan arrimaha, mana lahayn wax xuquuq sharci ah. Haddii ay diido amarkiisa ama ka hor timaaddo, waxaa lagu ciqaabi jiray in la qarqiyo

ATHENIANS: Naagtu waxay ahayd mid kaliya dhasha carruur iyo guri joogee Gabdhu waxay ku noolaayeen meel gaar ah oo, guriga laga dhigay, mayna soo bixi jirin. Waxayna ku guursan jireen da'a aad u yar

ROMANS: Haweenku Waxay nidaamka "in manu" (gacanta ninka ku jirta).

ANGLO-SAXONS iyo ENGLISH: Isla nidaamka kuwii ka aan soo sheegnay

6.1.3 Muxuu Yahay "Absolute Monogamy"?

wuxuu ku qeexay "absolute monogamy" inuu yahay nidaam jinsi oo ay ku khasban yihiin labada dhinac (rag iyo haween) inay:

1. Guursadaan oo keliya hal qof
2. Ilaashadaan farjigoda ka hor guurka
3. Ilaashadaan daacadnimada kadib guurka

wuxuu yiri

"In human records there is no instance of a society displaying great social energy which has not adopted a system of absolute monogamy."

Tan macneheedu waxa weeye in tamar bulsho oo sarraysa aysan soo bixin karin ila laga helo nidaam absolute monogamy ah. Dhammaan xadaaradihii waaweynaa waxay ku bilaabeen nidaamkan adag.

6.2 SIDA XUQUUQDA HAWEENKU U KORDHAYSO

6.2.1 Xoraynta Haweenku Waa Dhacdo Soo Noqnoqota

wuxuu ogaaday in dhammaan xadaaradaha (marka laga reebo Athens) ay maareen isbeddel isku mid ah: haweenku waxay ka baxeen xaaladdii "legal nonentity" waxayna noqdeen kuwa leh xuquuq buuxda .

Wuxuu yiri
"This has happened regularly and unfailingly in every recorded example of absolute monogamy, except one; in that case special circumstances prevailed."

wuxuu sidoo kale xusay arrin aad u muhiim ah

"In human records there is no instance of female emancipation which has not been accompanied by an extension of sexual opportunity."

mar kasta oo haweenku helaan xuquuq, waxaa had iyo jeer la socda fudaynta nidaamka jinsiga. Labadani ma kala bixi karaan taariikhda.

6.2.2 Isbeddelka Xuquuqda: Shan Tallaabo

wuxuu qeexay isbeddelka xuquuqda haweenka shan tallaabo

1. Haweenku waxay ka soo gudbeen xaalad ay si buuxda ugu hoos jireen ragga una ahaayeen kuwa aan lahayn aqoonsi, waxayna noqdeen kuwaragga la siman.

2. Haweenku waxay bilaabeen inay lahaan karaan hanti magacooda ku qoran.

3.Haweenku waxay bilaabeen inay gali karaan qandaraasyo ganacsi.

4. Haweenku waxay bilaabeen inay u dardaarmi karaan hantidooda sida ay doonaan.

5. Ugu dambeyn: la siman ragga

wuxuu xusay in isbeddelkani uu yahay mid soo noqnoqda Dhammaan xadaaradihii absolute monogamy-ga lahaa waxay mareen isbeddelkan shanta tallaabo ah.

6.2.3 Babylonia: Tusaale Dhammeystiran

wuxuu si faahfaahsan uga warramay isbeddelka haweenka Babylonian

- Bilowgii: Naagtu waxay ahayd hanti. Ma lahayn xuquuq. Ninku wuu iibin kari jiray, wuu dili kari jiray hadday diiddo.

- Kadib: Ninku wuxuu awoodi kari jiray inuu kireeyo naagtiisa oo keliya (3 sano).

- Kadib: Haweenku waxay heleen xuquuq qandaraas. Waxay bilaabeen inay gali karaan heshiisyo sharci.

- Kadib: Gabadhu waxay heshay xuquuq dhaxal. Markii aabbahood dhinto, gabdhuhu waxay dhaxli kareen qayb ka mid ah hantida.

- Ugu dambeyn (wakhtigii Hammurabi, qiyaastii 1750 BC): " Haweenku waxay lahaayeen isla maqaamka bulsho iyo kan sharci ee ragga. Waxay samayn kareen ganacsi, geli kareen heshiisyo sharci, lahaan kareen hanti, waxayna hantidooda u maamuli kareen ama uga tasarrufi kareen sida ay doonaan"

Laakiin wuxuu xusay in tani ay ku beegnayd wakhtiga tamartii bulsho ay hoos u dhacaysay

"Three centuries after their first display of expansive energy, they weakened. Local kingdoms arose, and eventually the land was dominated by the uncultivated Kassites."

markii haweenku gaadheen sinnaanta, xadaaraddii Babylonian waxay ahayd mid ku wajahan burburka. Saddex qarni kadib markii ay muujiyeen tamartoodii ugu sarreysay, way daciifeen, waxaana dhulka la wareegay qoom aan ilbaxnayn (Kassites).

6.2.4 Rome: Tusaale Kale

wuxuu dersay sida Roman iyaduna u martay isla qaabka

- Bilowgii: Haweenku waxay ahaayeen "in manu" - gacanta ninka ku jira. Ma lahayn xuquuq. "Women possessed no legal rights."

- Kadib: " Haweenku waxay heleen xuquuq hanti, ganacsi, iyo xorriyad jinsi. Tani waxay ku beegnayd hoos u dhaca tamarta bulsho.

wuxuu xusay in isbeddelka Rome uu ahaa mid isku mid ah kii Babylonian: bilow adag, xorayn dhexe, burbur dambe.

6.2.5 Athens:

Athens waxay ahayd mid ka duwan xadaaradihii kale. wuxuu yiri "Only among the Athenians was the emancipation of native-born women never completed... the Periclean decree of 451 B.C. and the laws in regard to the epicleros, never repealed, prevented the native-born women from being freed from their legal disadvantages."

Athens waxay leedahay mid gaar ah. Haweenka asal ahaan u dhashtay Athens weligood lama xoreynin. Waxaa jira labo sababood oo taariikhi ah:

1. Xeerkii Pericles (451 BC): Xeerkani wuxuu qeexayay muwaadinnimada Athens.
Wuxuu sheegay in qofku uu yahay muwaadin Athens haddii labadiisa waalid ay yihiin muwaadiniin Athens ah. Tani waxay ka dhigtay haweenka Athens kuwa aan xoreyn karin

2. Shuruucda "epicleros": Kuwani waxay qeexayeen xaaladda gabdha aan walaal ahayn. Gabdhaha kale waxay ku khasbanaayeen inay guursadaan qaraabada si hantidii aabbahood ugu sii jirto qoyska.

Hase yeeshee, wuxuu xusay in Athens ay soo saartay tamar wax soo saar oo aad u sarreysa sababtoo ah haweenka asal ahaan u dhashay weligood lama xoreeynin taas oo keentay in nidaamkii absolute monogamy uu sii socday waqti dheer dheer.

6.3 ISKU MIDKA QAABKA U DHISNAAYEEN XADAARADAHA

6.3.1 Hal Qaab, Hal Sheeko

wuxuu soo gabagabeeyay qaybta ugu xiisaha badan isagoo leh

"These societies lived in different geographical environments; they belonged to different racial stocks; but the history of their marriage customs is the same. In the beginning each society had the same ideas in regard to sexual regulations. Then the same struggles took place; the same sentiments were expressed; the same changes were made; the same results ensued."

Bulshooyinkani waxay ku noolaayeen deegaano juqraafiyeed oo kala duwan; waxayna ka soo jeedeen asal iyo qowmiyado kala duwan. Hase yeeshee, taariikhda caadooyinkooda guurka waxay ahayd mid isku mid ah. Bilowgii, bulsho kastaa waxay lahayd fikrado isku dhow oo ku saabsan xeerarka galmada. Dabadeedna waxaa dhacay halganno isku mid ah; dareenno iyo aragtiyo isku mid ah ayaa la muujiyey; isbeddello isku mid ah ayaa la sameeyey; ugu dambayntiina waxaa ka dhashay natiijooyin isku mid ah

Wuxuu kaloo yiri

"Each society reduced its sexual opportunity to a minimum and, displaying great social energy, flourished greatly. Then it extended its sexual opportunity; its energy decreased, and faded away. The one outstanding feature of the whole story is its unrelieved monotony."

dhammaan xadaaradaha waaweyn waxay mareen isla qaabka. Kuma kala duwana juqraafigooda, qowmiyadooda. Dhammaantood waxay ku bilaabeen nidaam adag, waxay gaadheen tamar sarreysa, kadibna waxay fudeeyeen nidaamkoodii, tamartoodiina way dhammaatay.

wuxuu yiri isku ekaanshahan ayaa ah waxa ugu yaabka badan Waa sheeko isku mid ah oo soo noqnoqotay 5,000 oo sano.

6.4.2 Qaabka Guud: Shan Tallaabo

wuxuu qeexay qaabka guud ee xadaaraduhu u maareen shan TALLAABO:

TALLABO 1aad (BILOW): Nidaam absolute monogamy ah.
- Haweenku waa "legal nonentities"
- dhowrsanaanta ka hor guurka waa qasab
- Daacadnimada kadib guurka waa qasab
- Tamar bulsho oo aad u sarreysa ayaa soo baxda
- Bulshadu waxay ballaariso dhulkeeda, ganacsigeeda, iyo awoodeeda

TALLABO 2aad (HORUMAR): Tamar balacsan iyo wax soo saar.
- Bulshadu waxay gaadhaa heer sare oo dhaqameed
- Farshaxanka, cilmiga, iyo teknoolojiyadda ayaa horumara
- Dowladdu way xoogaysataa
- Dadku way barwaaqoaysan yihiin

TALLABO 3aad (ISBEDDEL): Haweenku ayey xoreeyaan.
- Dhaq-dhaqaaqa xoraynta haweenka ayaa soo baxa
- Haweenku waxay heleen xuquuq hanti, ganacsi, iyo sharciga
- Nidaamkii absolute monogamy waa la fududeeyaa
- Furriinku wuxuu noqdaa mid fudud

TALLABO 4aad (HOOS U DHAC): Xorriyad jinsi oo kordha.
- dhowrsanaana ka hor guurka way luntaa
- Khaniisnimadu way fidaa
- Dhalashadu way yaraataa
- Tamarta bulsho way hoos u dhacdaa

TALLABO 5aad (BURBUR): Xadaaraddu way burburtaa.
- Dadka shisheeye ayaa la wareega awoodda
- Dhaqankii waa lumaa
- Bulshadu waxay ku noqotaa xaaladdii hore

6.3.3 Tusaalooyin Dhaqameed oo Kala Duwan

wuxuu xusay in qaabkani uu yahay mid caalami ah, kuma xidhna goob juqraafi ama qowmiyad gaar ah. Wuxuu yiri "They lived in different geographical environments; they belonged to different racial stocks; but the history of their marriage customs is the same."

Tusaale ahaan:
- Sumerians (2000 BC): Juqraafi ahaan waxay ku noolaayeen Mesopotamia (ciraq maanta). Qowmiyad ahaan waxay ahaayeen Sumerian.
- Babylonians (1750 BC): Isla goobta, laakiin qowmiyad ahaan waxay ahaayeen Semitic (Akkadian).
- Athenians (500 BC): Juqraafi ahaan waxay ku noolaayeen Giriigga.
- Romans (100 BC-100 AD): Juqraafi ahaan Talyaaniga.
- Anglo-Saxons (600 AD): Waqooyiga Yurub.
- English (1500-1900 AD): Ingiriiska.

Kala duwanaanshaha juqraafiga iyo qowmiyadda kama xannibin qaabka guud. Dhammaantood waxay mareen isla isbeddellada.

6.4 SADDEXDA JIIL: BILOW ILAA BURBUR

6.4.1 Waa Maxay?

wuxuu caddeeyay in isbeddelka nidaamka jinsiga uu u baahan yahay saddex jiil si uu u muujiyo saamayntiisa buuxda

"The full effect of an extension or limitation of sexual opportunity,
whether in the whole society or in one of the social strata of a society,
is not revealed for at least three generations (roughly a century)
after its adoption."

Saamaynta buuxda ee kordhinta ama xaddidaadda fursadaha galmada, ha khusayso bulshada oo dhan ama mid ka mid ah dabaqadaha bulshada, ma soo muuqato ugu yaraan saddex jiil (qiyaastii hal qarni) ka dib marka nidaamkaas la qaato

Wuxuu intaas ku daray sababta

"Waayo-aragnimada shucuureed ee carruurnimada waxay reebtaa raad aan laga maarmi karin oo saameeya dabeecadda iyo hab-fikirka qofka mustaqbalka... dabeecadda iyo tayada dhaqanka ay jiilashu dhaxlaan waxay ku xiran tahay tii jiilkii ka horreeyey, jiilkaasna isaguna wuxuu saameyn ka qaataa jiilkii ka sii horreeyey.."

isbeddelka nidaamka jinsigu ma muujiyo saamayntiisa markiiba. Wuxuu u baahan yahay saddex jiil (qiyaastii 100 sano) si uu u muujiyo tamarta ama daciifnimada.

6.4.2 Qaabka Saddexda Jiil

wuxuu qeexay qaabka saddexda jiil sida soo socota:

JIILKA 1aad (BILOW): Nidaam absolute monogamy ah oo adag.
- dhowrsanaant ka hor guurka waa qasab
- Daacadnimada kadib guurka waa qasab
- Haweenku waa "legal nonentities"
- Tamar bulsho oo aad u sarreysa
- Carruurtu waxay ku koraan nidaamkan adag
- Waxay la noqdaan dabeecad jinsi oo xakameysan

JIILKA 2aad (ISBEDDEL): Nidaamka waa la fudeeyaa.
- Haweenku waxay bilaabaan inay xuroobaan
- Furriinku wuxuu noqdaa mid fudud
- dhowrsanaant ka hor guurka way yaraataa
- Tamarta bulsho way yaraataa
- Carruurtu waxay ku koraan nidaam dhexdhexaad ah
- Waxay leeyihiin dabeecad jinsi oo dhexdhexaad ah

JIILKA 3aad (BURBUR): Nidaamkii jinsiga waa lumaa.
- dhowrsanaant ka hor guurka waa wax aan jirin
- Khaniisnimadu way fidaa
- Dhalashadu way yaraataa
- Tamarta bulsho way dhacdaa
- Carruurtu waxay ku koraan nidaam xor ah
- Waxay leeyihiin dabeecad jinsi oo xor ah
- Xadaaraddu way burburtaa

6.4.3 Tusaale: Athens

tusaale u soo qaatay Athens si uu u muujiyo saddexda jiil
(Sex and Culture, §170, p. 386-392):

JIILKA 1aad (600 BC): Athens waxay ku bilaabatay absolute monogamy. dhowrsanaanta ka hor guurka waa qasab. Haweenku ma lahayn xuquuq. Tamarta Athens way sarraysay. Waxay bilaabeen inay dhisaan magaalo awood badan.

JIILKA 2aad (500-450 BC): Athens waxay gaadhay heerkii ugu sarreeyay. Parthenon waa la dhisay (447 BC). Riwaayadaha iyo falsafadda way horumareen. Laakiin haweenku waxay bilaabeen inay xoreeyaan. Nidaamkii jinsiga waa la fudeeyay. Tamartu way yaraatay.

JIILKA 3aad (400 BC): Xorriyad jinsi oo buuxda. Ciffaddii way luntay. Khaniisnimadu way fiday. Unwin wuxuu yiri

" dhammaadkii qarnigii shanaad, caadooyinkii hore way dabar go'een, waxaana ballaartay fursadaha galmada ee ragga iyo dumarka labadaba. Ma jirin dhowrsanaan khasab ah; rabitaannada galmadana si toos ah ayaa loo soo bandhigi jiray. Furriinku wuxuu noqday mid fudud oo caadi ah; paederasty-na way soo baxday raggu waxay lahaayeen xaasas iyo sidoo kale marwooyin kale dumarkiina waxay jebiyeen xayndaabyadii hore, iyagoo isku maaweelinaya khamri iyo xiriirro jacayl oo qarsoodi ah."

Kadib: " Tamartii iyo firfircoonidii Athenians-ka hoos ayey u dhacday. Saddex jiil ka dib, magaaladii hore u ahayd mid xooggan oo firfircoon, oo ay kala qaybsanaan iyo khilaafyo gudaha ahi ragaadiyeen, waxay gacanta u gashay xukun shisheeye. Athens waxay gacanta u gashay Macedonia (Philip of Macedon, 338 BC) saddex jiil kadib markii ay fududeeyeen nidaamkoodii jinsiga.

6.4.4 Tusaale: England

wuxuu si faahfaahsan uga warramay sida England u martay qaabkan

JIILKA 1aad (Qarnigii 16-aad): Absolute monogamy waa la soo celiyay. Haweenku waa "legal nonentities". Tamar aad u sarraysa. England waxay dhisatay boqortooyo weyn taariikhda Ganacsigu wuxuu gaadhay adduunka oo dhan.

JIILKA 2aad (Qarnigii 18-aad): Aristocrats waxay fudeeyeen nidaamkoodii jinsiga. Tamartoodu hoos ayey u dhacday. Middle classes ayaa la wareegay hogaanka.

JIILKA 3aad (Qarnigii 19-aad ilaa 20-aad): Middle classes waxay fudeeyeen nidaamkoodii. Furriinku wuxuu noqday mid baahay (1857)

6.5 XIRIIRKA KA DHEXEEYA XUQUUQDHA HAWEENKA IYO TAMARTA BULSHO

6.5.1 Xiriirka Tooska Ah

xadaaradaha muslimiinta way ka duwaneyd kuwa kale , sida aan soo aragnay xadaarad islamka waxay ku bilaabatay siinta haweenka xuquuqda , dowladii islamiga ee uu Nebi Muxammed ﷺ aasaasay haweenka lahaayeen xuquuq , khilaafada abuubakar ,cumar , cusmaan iyo cali Alle haka raali noqdee ay haweenka aysan ka mamnuucin xuquuq.
Intaa kadib dowladahii islamiga eek a danbeeyey sidoo kale dumarka kama reebin wax xuquuq ah , sidaa oo ay tahay muslimiinta waxay cilmiga iyo xadaaradda ka gaareen meel sare oo ayagaa manta mirahooda la guranaayo. **Hadaba siinta haweenka xuquuq marnaba ma ahayn shay hortaagan hormarka** , haddase waa fiifida zinada iyo fisqiga oo badnaa ka dhalata markay lawada jinsi is dhexgalaan xakameyn la ‘aan.
Tan kale siinta haweenka xuquuq marnaba ma laazimineyso inay ragga la simnaadaan ama shaqo rag qabtaan , waxaan isleeyahay qoraaga waxaan isku khilaafsannahay waxa uu kala jeedo xuquuq.

Qoraaga laftiisa inkastoo uu san qabin in siinta haweenka xuquuq ay horseedeyso burbur , balse burburka uu ka yimaado fududeynta galmada , wuxuu hadana qabaa in haweenka markasta oo la siiyo xuquuq ay la socoto faafida galmada taas oo cadeynaysa fahamkiisa khaldan ee xuquuqda

wuxuu yidhi:

"The subsequent loss of social energy after the emancipation of women, which is sometimes emphasized, has been due not to the emancipation but to the extension of sexual opportunity which has always accompanied it."

Tan macneheedu waxa weeye xuquuqda haweenka lafteedu ma aha sababta hoos u dhaca tamarta bulsho. Laakiin xuquuqda haweenku waxay had iyo jeer la socotaa fudaynta nidaamka jinsiga , taas oo ah sababta hoos u dhaca.

wuxuu kaloo yidhi :

"In human records there is no instance of female emancipation which has not been accompanied by an extension of sexual opportunity."

Tan macneheedu waxa weeye: xuquuqda haweenku ma kala bixi karto fudaynta nidaamka jinsiga. Marka haweenku heleen xuquuq, waxay sidoo kale heleen xorriyad jinsi, taas oo keentay in tamarta bulsho hoos u dhacdo.

Miyuusan arkin qoraaga xadaaradda muslimiinta in haweenka siisay xuquuq ay hadana awooday xakameynta jinsiga ?

6.5.2 Fursadda Jinsiga ee Haweenka: Cunsurka Ugu Saamaynta Badan

wuxuu si gaar ah u xusay in fursadda jinsiga ee haweenka ay tahay cunsurka ugu saamaynta badan

"In the production of social energy the sexual opportunity of the females is a more important factor than that of the males."

wuxuu sharxay sababta: haweenku waxay dhalan carruurta, waxayna la xidhiidhaan xidhiidhka jinsiga si qoto dheer. Marka haweenku leeyihiin dhowrsanaan iyo anshax jinsi oo adag, bulshada oo dhami waxay ka faa'iidaysataa tamarta ka dhalata xaddiddaas. Laakiin marka haweenku xoreeyaan oo ay fudeeyaan nidaamkooda jinsi, tamarta bulsho way hoos u dhacdaa.

6.5.3 Tamarta Bulsho: Qiimaha Xuquuqda Haweenka

wuxuu yiri

"It is historically true to say that in the past social energy has been purchased at the price of individual freedom, for it has never been displayed unless the female of the species has sacrificed her rights as an individual and unless children have been treated as mere appendages to the estate of the male parent."

"Taariikh ahaan waa sax in la yiraahdo waagii hore tamarta iyo firfircoonida bulshada lagu heli jiray iyadoo lagu beddelanayo xorriyadda shakhsiga. Sababtu waxay tahay in tamartaas bulsheed aan waligeed la arag ilaa haweenku ay ka tanaasulaan xuquuqdooda qof ahaaneed, isla markaana carruurta loo arko wax ku lifaaqan hantida iyo qoyska aabbaha"

Halkaan ayaad ka dareemeysaa fahamdarrada qoraaga xuquuqda haweenka

wuxuu intaas ku daray:

"But it would be rash to conclude that sexual opportunity cannot be reduced to a minimum under any other conditions. The evidence is that the subjection of women and children is intolerable and therefore temporary."

Si kastaba ha ahaatee, ma habboona in la yiraahdo fursadaha galmada waxaa lagu xaddidi karaa oo keliya marka haweenka iyo carruurta la hoos geeyo. Caddaymaha taariikhiga ahi waxay muujinayaan in xaaladdaas lafteedu aysan sii jiri karin muddo dheer, maadaama bulshooyinku ugu dambayn diidaan

Wuxuu ka hadlayaa in xaaladdan "subjection" ay tahay mid aan loo dulqaadan karin, waana mid ku meel gaar ah. Dhammaan xadaaradihii absolute monogamy-ga lahaayay waxay ugu dambeyn xoreeyeen haweenka.

6.6 QAWAACIDDA AASAASIGA AH

6.6.1 Qaacidada Kowaad

Unwin wuxuu dhigay qaacidadaan:

"A limitation of sexual opportunity... as the immediate cause of social energy. Conversely, in all cases any extension of sexual opportunity must result in a reduction of social energy."

Xaddidaadda fursadaha galmada ... ayaa ah sababta tooska ah ee dhalisa tamarta bulshada. Dhanka kale, xaalad kasta kordhin kasta oo lagu sameeyo fursadaha galmada waa inay keentaa hoos-u-dhac ku yimaadda tamarta bulshada

Qaacidadaan waxay leedahay laba qaybood:

Qaybta 1aad :"A limitation of sexual opportunity must produce social energy."
- Marka fursadaha jinsiga la xaddido, tamarta bulsho way korodhaa.
- Tani waa xaqiiqo taariikhi ah oo qoraaga ku arkay dhammaan bulshooyinkii uu dersay.

Qaybta 2aad: "Conversely, in all cases any extension of sexual opportunity must result in a reduction of social energy."
- Marka fursadaha jinsiga la fudeeyo, tamarta bulsho hoos eyey u dhacdaa.

wuxuu yidhi:

"In all cases any extension of sexual opportunity must result in a reduction of social energy."
Tan macneheedu waa mid toos ah: haddii bulshadu ay fudeyso nidaamkeeda jinsiga, tamarteedu hoos ayey u dhacaysaa. Ma jiro wax ka reeba

6.6.2 Qaacidada Labaad

wuxuu dhigay qaacidada labaad :

"No society can display productive social energy unless a new generation inherits a social system under which sexual opportunity is reduced to a minimum. If such a system be preserved, a richer and yet richer tradition will be created, refined by human entropy."

Bulsho ma muujin karto tamar bulsho oo wax-soo-saar leh haddii jiilka cusub uusan dhaxlin nidaam bulsheed ay fursadaha jinsi ku kooban yihiin heerka ugu hooseeya. Haddii nidaamkaas la ilaaliyo, waxaa abuurmi doona dhaqan iyo hidde bulsheed sii hodmaya oo sii hormaraayo, kaas oo aan ku sifeynayo 'human entropy

Wuxuu intaas ku daray:

"So long as the sexual opportunity of one social stratum is maintained at a minimum, the society will display productive energy."
Ilaa inta fursadaha galmada ee ugu yaraan hal dabaqad ama koox bulsheed lagu hayo heerka ugu hooseeya, bulshadu waxay sii muujin doontaa tamar wax-soo-saar leh.

Qaacidadaan labaad waxay qeexeysaa shuruudaha tamarta wax soo saar:

1. Jiil cusub waa inuu dhaxlaa nidaam jinsi oo adag.
2. Haddii nidaamkan la ilaaliyo, dhaqan hodan ah ayaa la abuuri karaa.
3. Inta ay jirto hal dabaqad oo bulsho oo leh nidaam jinsi oo adag, bulshadu waxay muujin doontaa tamar wax soo saar.

6.6.3 **Human Entropy**

wuxuu adeegsaday ereyga "human entropy" si uu u qeexo cunsur cusub oo dhaqameed ka dhex muujiya bulshada tamarta weyn laheed.

wuxuu tusaale u soo qaatay Parthenon ee Athens wuxuuna isbarbardhigay macbadyada Uganda. Labadaba waxaa lagu dhisay tamar aadane, laakiin Parthenon waxaa ku jiray "human entropy" taas oo ku dartay qurux, tafatiran, iyo xisaab

"The difference between their early buildings and the porches of Amiens Cathedral was due to human entropy."

6.6.4 Oraahdii Ugu Caansanayd

wuxuu soo gabagabeeyay cilmi-baaristiisii isagoo leh

"Any human society is free to choose either to display great energy or to enjoy sexual freedom; the evidence is that it cannot do both for more than one generation."

Bulsho kasta oo bini'aadan ahi waxay xor u tahay inay doorato midkood: inay muujiso tamar iyo firfircooni weyn ama inay ku raaxaysato xorriyad galmo. Caddaymaha aan helayse waxay muujinayaan inaysan labadaba isku mar sii wadi karin wax ka badan hal jiil

Wuxuu intaas ku daray:

"The inherent nature of the human organism, however, seems to be such that these desires are incompatible, even contradictory."

Si kastaba ha ahaatee, dabeecadda asalka ah ee bini'aadamka waxay u muuqataa inay tahay mid ka dhigaysa rabitaannadan kuwo aan iswaafaqi karin, xitaa kuwo iska soo horjeeda " yacnii in la kulmiyo faafifada zinada iyo xadaarad ilbaxnimo leh"

wuxuu isbarbardhigay ninka doonaya inuu isku mar yeesho tamar bulsho iyo xorriyad jinsi sida wiilka nacaska ah ee doonaya inuu rootiga cuno oo hadana keydsado

"The reformer may be likened to the foolish boy who desires both to keep his cake and to consume it."

6.7 DHAQANKA GALBEEDKA IYO BARI: ISBARBAR DHIG

6.7.1 Galbeedka: Bilow Adag, Dhamaad Xorriyad

- Qarnigii 16-aad: England waxay ku bilaabatay absolute monogamy, iyadoo haweenku ahaayeen "legal nonentities". Nidaamkani wuxuu soo saaray tamar bulsho oo aad u sarreysa. England waxay dhisatay Boqortooyadii Ingiriiska, ganacsigeeduna wuxuu gaadhay adduunka oo dhan.

- Qarnigii 18-aad: Dadkii aristocrat-ka ahaa (dabaqadda sare) waxay fudeeyeen nidaamkoodii jinsiga. Tamartoodii hoos eyey u dhacday. Dabaqadda dhexe ayaa la wareegay hogaanka.

- Qarnigii 19-aad: Dabaqaddii dhexena way fudeysay nidaamkeedii. Furriinku wuxuu noqday mid caadi ah, Haweenku waxay heleen xuquuq hanti (1870, 1882). Tamarta bulsho way sii yaraatay.

- Qarnigii 20-aad: " Guurkii adkaa ee hal nin iyo hal naag ku koobnaa isu beddelay nooc dabacsan oo guurka ah kaas oo markaas guud ahaan bulshada oo dhan ku faafay
Dhowrsanaanta ka hor guurka way luntay. Khaniisnimadu ma ahayn wax qarsoodi ah.
wuxuu yiri

"As soon as the institution of modified monogamy, that is, marriage and divorce by mutual consent, became part of the inherited tradition of a complete new generation, the energy, either of the whole society or of a group within the society, decreased, and then disappeared."

Isla marka nidaamka guurka dabacsan taas oo ah guur iyo furriin ku dhisan heshiiska labada dhinac uu noqdo qayb ka mid ah dhaqanka ay si buuxda u dhaxleen jiil cusub oo dhan, tamartii bulshada, ha noqoto tan bulshada oo dhan ama koox gaar ah oo ka dhex jirta bulshada, hoos ayey u dhacdaa, dabadeedna way dabar go'daa

6.7.2 Bari: Ku Dayashada Galbeedka Burburay

wadamada Bari maanta waxay ku dayanayaan Galbeedka - laakiin ma waxay ku dayanayaan Galbeedkii xoogga lahaa? Maya. Waxay ku dayanayaan Galbeedkii burburay.

astaamaha xadaaradaha burbura:

1. Xorriyad jinsi oo buuxda
2. Dhowrsanaanta oo laga tago
3. Khaniisnimada oo badata
4. Furriinka oo bata
5. Dhalashada oo yaraata

Wadamada Bari maanta waxay ku dayanayaan astaamahan burburka ee Galbeedka, iyagoo u malaynaya inay tahay horumar. Waxay rabaan inay gaadhaan "tamarta" Galbeedka, laakiin waxay qabsanayaan nidaamkii keenay burburka Galbeedka. Xitaa ma ogala inay ka soo bilaabaan isla meesha uu ka soo bilaabay Galbeedka.

Wadamada Bari waxay doorteen xorriyadda jinsiga - sida Galbeedka. Laakiin Galbeedku wuxuu ka soo bilaabay nidaam adag ka hor intuu u gudbin xorriyadda jinsi. Wadamada Bari waxay isku dayayaan inay ka bilaabaan halka Galbeedku ku dhamaaday, taas oo ah doqonimo.

xadaaradahii waaweynaa ee uu daraaseeyey ay badankoodu mareen hannaan isku mid ah:
1. Bilowga waxaa jiray guur adag oo hal lammaane ah iyo dhowrsanaan ka hor guurka.
2. Bulshadu waxay gaadhi jirtay awood, firfircooni, iyo horumar weyn.
3. Haweenku waxay heli jireen xorriyado ballaaran (halkaan xorriyad marka uu ka hadlaayo wuxuu wadaa in xorriyada ay racsanayd faaxisho isla tan hadda galbeedka ka jirto iyo fahamkiisa gaarka ah ee xuquuqda sida aan ka soo hadalnay)
. 4. Xeerarkii iyo xannibaadihii galmada ayaa sii dabci jiray, fursadaha galmaduna way kordhi jireen.
5. Ugu dambayntii waxaa iman jiray hoos-u dhac ku yimaadda awooddii iyo firfircoonidii bulshada, taas oo mararka qaar ku dhammaan jirtay burbur ama dabar-go' ilbaxnimo

Galbeedku wuxuu maray qaabkan oo dhammaystiran. Wadamada Bari waxay iska indho tireen qaybta 1aad ilaa 2aad waxayna isku dayayaan inay qabsadaan qaybta 3aad iyo 4aad - taas oo ah aan hirgali karin waayo jaamacad ma gali kartid adigoo soo marin iskuulka , halka dabadhilfyada galbeedka ee calmaaniyiinta , feminsts ay rabaan sheekada dhan inay ka bilaabaan jaamacada , ayna iskuulka ka dhigaan shay dib u dhac ah

wuxuu yidhi dabeecadda asalka ah ee bini'aadamka waxay u muuqataa inay tahay mid ka dhigaysa rabitaannadan kuwo aan iswaafaqi karin, xitaa iska soo horjeeda

Tan macneheedu waxa weeye:
- suurtagal ma ah in ilbaxnimo la yeelato tamar bulsho oo sarreysa iyo xorriyad jinsi oo buuxda isku mar
- Ma aha wax suurtagal ah in la helo horumar dhaqameed iyo fududaynta nidaamka jinsiga isku mar
- qof kasta oo doonaya inuu isku lahaado tamarta ilbaxnimada iyo xorriyadda jinsiga waa sida wiilkaas doqonka ah oo doonaayo inuu roodhiga cuno hadana keydsado.

Sidaa darteed dowladaha xukuma dhulalka muslimiinta aysan marnabo heynin tabta lagu dhiso xadaarad , taarikhda laguma haayo in xadaarad ay ku bilaabatay furfurnaan jinsi ama nidaam raaxo leh , bal bilaw kasta xadaaradeed dadkeeda aad ayey ugu adkaayeen cifada , dhowrsanaanta halka dowldahaan ayba leeyihiin hay’ad faafiyo , hay’adaha gaalada ee ka dhaqan gala wadamada muslimiinta ay fasahaad aad u daran ka wadaan , marka wadada ay hayaan waa burbur.

6.8 FALSAFADDA STOIC IYO EPICUREAN

6.6.1 Bilowga Stoic, Dhamaadka Epicurean

wuxuu adeegsaday laba erey oo falsafi ah: Stoic iyo Epicurean . Kuwani waa laba falsafadood oo Giriig ah, laakiin wuxuu u adeegsaday macne guud:

Stoic : Nidaam adag, anshax sare, xakamaynta rabitaanka, u hogaansanaanta waajibaadka. Falsafaddani waxay ku salaysan tahay in qofku xakameeyo rabitaankiisa oo uu u kuurgalo waajibaadkiisa.

Epicurean : Nidaam fudud, xorriyad, raaxo, raadinta rabitaanka. Falsafaddani waxay ku salaysan tahay in qofku raadiyo raaxada oo ka fogaado xanuunka.

dhammaan xadaaradaha waaweyn waxay ku bilaabeen Stoic waxayna ku dhammeysteen Epicurean. Tani waa qaabka guud.

6.8.2 Tusaalooyinka

SUMERIANS:
- Bilow (Stoic): Nidaam absolute monogamy ah, haweenku waa legal nonentities. Dadku waxay u shaqaynayeen sidii ay u dhisten xadaarad.
- Dhamaad (Epicurean): Xorriyad jinsi, khaniisnimo, dhalasho yaraan. Burbur.

BABYLONIANS:
- Bilow (Stoic): Nidaam adag.
- Dhamaad (Epicurean): Haweenku waxay gaadheen sinnaan, laakiin tamartii way luntay. Kassites ayaa la wareegay.

ATHENIANS:
- Bilow (Stoic): Nidaam absolute monogamy ah, haweenku guriga ku xidhan. Dadku waxay dhiseen Parthenon, riwaayadaha, falsafadda.
- Dhamaad (Epicurean): Xorriyad jinsi, khaniisnimo, furriin. Athens waxay u gacan gashay Macedonia.

ROMANS:
- Bilow (Stoic): Nidaam adag, haweenku "in manu". Dadku waxay dhiseen Boqortooyo weyn.
- Dhamaad (Epicurean): Xorriyad jinsi, khaniisnimo, dhalasho yaraan. Burburkii.

ENGLISH:
- Bilow (Stoic): Nidaam absolute monogamy ah, haweenku legal nonentities.
  Dadku waxay dhiseen British Empire.
- Dhamaad (Epicurean): Xorriyad jinsi, khaniisnimo, ugaarsi.
  Burbur qayb ah.

6.8.3 Qaabka Soo Noqnoqda

wuxuu yiri arrintu waa mid soo noqnoqota, si isku mid ah, oo aan la
weyn karin. Wuxuu yiri
"The one outstanding feature of the whole story is its unrelieved monotony."

Tan macneheedu waxa weeye: wax cusub ma jiro. Taariikhdu waxay isku celcelaysaa. Dhammaan xadaaradaha waaweyn waxay mareen isla qaabkan: Stoic bilow, Epicurean dhamaad.

Dhamaadka cutubkaan waxaan leeyahay in haweenka door wayn ku leeyihiin xadaarad kasta , haddase qoraaga ayaan isleeyahay marka uu ka hadlaayo xuquuq uu ka duulaayo fahamka feminism , taa oo ka duwan xaqiiqda dhabta ah ee waaqicaga , sidaa darteed gababada sheekada waxa weeye , in haweenka la siiyo xuquuq aysan marnabo horseedeynin burbur xadaaradeed laakin furfurnaanta jinsi , fisqiga , faafida zinada , haweenka suuqa galaan sida ragga , qabtaan shaqooyinka ragga , ay shaki la’aan horseedi doonto burbur .

Anaga muslimiin baan nahay , Alle baa rasuul noo soo diray , wadada nala amray waddo aan ahayn marnaba kuma hormareyno.

CUTUBKA 7

BADEECADAYNTA JIDHKA HAWEENKA

7.0 HORDHAC

Cutubkani waxaanu falanqaynayaa mawduuca ugu xasaasisan uguna muranka badan ee la xidhiidha aragtida feminismka: jidhka haweenka. Dhismaha fikradeed ee feminismku wuxuu si weyn ugu tiirsan yahay fikradda ah in jidhka haweeneydu yahay saldhigga ay ka soo jeedaan dhammaan doodaha kale ee ku saabsan galmada, taranka, shaqada, iyo xorriyadda. Feminismku wuxuu si joogto ah ugu baaqaa "xorriyadda jidhka" iyo "tamkiinta haweeneyda" female empowerment

7.1 BADEECADAYNTA JIDHKA HAWEENKA:

7.1.1 Fahamka Badeecadaynta Jidhka

Badeecadayntu waa habka shay ama qof laga dhigo badeeco la iibin karo, la iibsan karo, oo lagu ganacsan karo suuqa. Marka jidhka haweeneyda la badeecadeeyo, waxaa laga dhigayaa shay (object) oo aan ahayn qof leh sharaf iyo karaamo. Feminismku, gaar ahaan mowjaddiisa saddexaad, wuxuu si xooggan ugu baaqaa in haweeneydu xor u tahay inay jidhkeeda u isticmaasho sida ay doonto.laakin, su'aasha asaasiga ah ee halkan ka dhalanaysa waa: yaa dhab ahaantii ka faa'iidaysta xorriyaddan la sheegay?
Dr. Bashir Essam Al-Marrakshi,Wuxuu yidhi:
"النسوية تدعي أنها تحرر جسد المرأة، لكنها في الحقيقة تقدمه كسلعة للاستهلاك الذكوري والرأسمالي. هذا ليس تحررا، بل هو استغلال جديد."

Macnaha hadalkan ayaa ah in feminismku uu ku andacoonayo inuu xoraynayo jidhka haweeneyda, laakiin xaqiiqadu ay tahay inuu u soo bandhigayo sidii badeeco loogu talagalay ragga iyo nidaamka ra'sumaaliyadda.

7.1.2 Taariikhda Badeecadaynta: Gumeysiga iyo Jidhka Haweenka

Si loo fahmo badeecadaynta jidhka haweenka, waxaa muhiim ah in dib loo eego taariikhda, gaar ahaan xilligii gumeysiga. Francesca Biancani, oo ah mu'arikhad, waxay buuggeeda Sex Work in Colonial Egypt ku iftiimisay sida gumeysigii Ingiriisku uu u sharciyeeyay dhilleysiga Masar. Waxay sheegtay in sharcigii ugu horreeyay ee nidaamiya shaqada galmada ee Masar la sameeyay Oktoobar 1, 1882, wax yar ka dib markii ciidamada gumaystaha Ingiriisku ay qabsadeen Masar . Tani waxay muujinaysaa in gumeysigu keenay arintaan ilaa hadda asiga maalgaliyo.
Liat Kozma, oo ah mu'arikhad kale, ayaa buuggeeda Policing Egyptian Women ku xustay in ka hor gumeysiga, xilligii Muhammad Cali, dowladda Masar ay si adag u xakameynaysay dhilleysiga, xitaa iyadoo ciqaab adag ku soo rogtay kuwa ku lug leh . Tani waxay ka dhigan tahay in dhaqamada xakameynta galmada ee bulshooyinka Islaamka ay ahaayeen kuwo ka horreeyay gumeysiga, isla markaana gumeysigu uu burburiyay nidaamyadaas si uu u abuuro suuq galmo oo u adeega danihiisa.
Waxaa nasiib darro ah in feminismku, isagoo ku andacoonaya inuu ka soo horjeedo dulmiga, uu taageero nidaamkan badeecadaynta ah, isagoo ugu yeedhaya "xorriyad" ama "shaqo." Tani waxay keentaa in qaabkii gumeysigu u adeegsan jiray jidhka haweenka, uu hadda dib ugu soo laabto magaca "xorriyad," taas oo ah dabagal cusub oo aan ka yareyn kii hore.

7.1.3 Falanqaynta Badeecadaynta Qaababka Kala Duwan

Daraasadan oo ay qortay HAWEENEY u dooda waxay ugu yeerto xuquuqda aadanaha ah, laguna daabacay Jaamacadda Westminster, waxay daaha ka rogaysaa xaqiiqooyin naxdin leh oo ku saabsan waxa loogu yeero "horumarka haweenka". In nidaamka ra'sumaliga ah ay kor u qaaddo halhaynta sinnaanta jinsiga iyo xorriyadda, haweeneydaan waxay ku doodaysaa in nidaamkani uu dhab ahaantii dhisay muuqaal dusha ka qurux badan oo lagu qarinayo waxay ugu yeereyso nidaam raggeed patriarchy oo ka sii qallafsan kii hore, kaas oo haweenka u beddelay badeecad la iibiyo.
Daraasaddu waxay ku bilaabmaysaa halhayska caanka ah ee "Ku soo dhawaada dhulka dhoola caddeynta," halkaas oo haweenka Thailand looga dhigo dabin lagu sii xiro dalxiisayaasha. waxay tiri In kasta oo Thailand loo arko dal horumar ka sameeyay xuquuqda haweenka iyadoo haweenku ay ka badan yihiin ragga dhinaca shahaadooyinka PhD-da, hantidana ay iska lahaan karaan, xitaa ay doorteen ra'iisul wasaare haween ahhaddana tani waa muuqaal been ah .
sidoo kale waxay ku doodeysaa Dhanka kale, gudaha Maraykanka, nidaamka ra'sumaliga ah wuxuu xaqiijiyaa in haweenku ay mar walba ahaadaan kuwo hoos yimaada ragga. In kasta oo ay jiraan guulo laga gaaray xagga waxbarashada iyo hoggaanka, bulshada ra'sumaliga ahi waxay haweenka u isticmaashaa shay lagu

ganacsado .waxay si cad u leedahay "Mawqifka ra'sumaliga waa midka hubiya in haweenku ay waligood dabo-fadhiyaan ragga".sheekh cabdulahi al khalifi oo tacliiq ka bixinaayo daraasadan wuxuu yidhi :Hadday haweeneydan Reer-Galbeedku sidan ka tiraahdo bulshooyin horey ugu tallaabsaday sinnaan lab iyo dheddig, xataa jebiyey doorkii jinsiga (ee aan ku koobnayn kaliya waxa loo yaqaan “xoojinta haweenka”), maxay haddaba rajayn kartaa haweeneyda Carbeed gaar ahaan, tan Muslimaddana guud ahaan, haddii aanay ahayn xaalad ka sii daran oo ka sii murugo badan?
Haddii haweenka reer galbeedka ah ee gaaray heerkii ugu sarreeyay ee wax loogu yeero "sinnaanta jinsiga" iyo "xorriyadda" ay maanta ka ooyayaan in nidaamkaas uu iyaga ka dhigay badeecad la iibiyo oo la addoonsado, maxay filan karaan haweenka dalalka kale gaar ahaan wadankeen ee doonaya inay ku daydaan galbeedka?.
maalin dhawayd ayaan arkay fanaan soomaliyeed oo la fadhiya safiirka england u fadhiya soomali oo ka hadlaayo dhibaatada haweenka loo geysto , garanmaayo fanaankaas inuu ka warqabo in isla dowladaas haweenka nala dhashay ee ku nool gaza ay gumaadaayaan , marka uu ku leeyahay waxaan la jiraa haweenka , wuxuu xaqiiqdii kawadaa dumarka waa inay jaariyaat u noqdaan nidaamka ra'sumaaliga ah
isma lihi qof garaad iyo iimaan leh inuu dowlad england ka dhagaysto wax ama ka sugo kheyr

Qaababka kala duwan ee badeecadaynta jidhka haweenka waxaa ka mid ah:

1. **Fashion Industry** Warshadahan waxay si joogto ah u adeegsadaan jidhka haweenka si ay u xayeysiiyaan alaabtooda. Haweenka waxaa loo soo bandhigaa qaab sexual leh, waxaa intaa dheer haweenkaas models-ka ah in ay ku khasbanyihiin ilaalinta jirkooda ilaa qaarkood ay soomaan oo cunto cunin si ay u ilaaliyaan sifaatka laga rabo jirkooda.

2. **Beauty Industry:** Warshadahani waxay ku dhisan yihiin fikradda ah in jidhka haweeneydu aanu ku filnayn sida uu yahay, waana in la beddelo, la qurxiyo, ama la hagaajiyo. Tani waxay abuurtaa cadaadis joogto ah oo ku saabsan kalsoonida jidhkoda, taas oo keenaysa in haweenku ay ku bixiyaan lacag badan iyo waqti badan si ay u u badalaan jidhkooda aynsa isticmaalaan daawooyin xittaa u daran caafimaadkooda. Arintaan inkastoo ay u muuqato shay iska fudud haddase waxaa jira tirakoob sheegaya in gabdhaha qaar naftooda dhaafiyeen dunida marka ay noloshooda la barbardhigeen kuwa models-ka ee baraha bulshada , ayna garwaaqsadeen inaysan gaari Karin taa oo kale taa oo ku dhalisay ikti’aab iyo walbaahr ugu dambeyn nafta is dhaafsiiyeen .

3. Madadaalada: Filimada, heesaha, iyo bandhigyada telefishinka waxay inta badan muujiyaan jidhka haweenka , iyadoo haweenka caanka ah ay inta badan ku guuleystaan iyagoo adeegsanaya muuqaalkooda iyo jidhkooda. Tani waxay abuurtaa fikrad ah in qiimaha haweeneydu uu ku xidhan yahay sida ay u soo jiidan karto ragga, taas oo hoos u dhigaysa doorkeeda bulsho iyo maskaxeed.

4. **Sex Industry**: Kani waa qaabka ugu cad uguna xun ee badeecadaynta. Halkan, jidhka haweeneyda waxaa loo iibiyaa si toos ah, sida badeeco suuqa laga iibiyo. Ibn al-Jawzi wuxuu yidhi:

"اتخذوا شهواتهم آلهة، وجعلوا بطونهم وفروجهم غاياتهم، فاستهانوا بكرامة الآدمي التي فضلهم الله بها على كثير من خلقه."

Waxay shahwadooda ka dhigteen ilaahyo ay caabudaan, calooshooda iyo xubnahooda tarankana waxay ka dhigteen himiladooda ugu dambaysa. Sidaas darteed waxay fududaysteen sharaftii iyo karaamadii aadamaha ee Alle ku maamuusay kana sarreysiiyey makhluuq badan oo uu abuuray.

7.2 XORRIYADDA GALMADA

7.2.1 Hordhac

"Xorriyadda galmada" waa mid ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee aragtida feminismka. Waxaa lagu doodi jiray in xorriyaddan ay tahay mid lagama maarmaan u ah xoraynta haweenka iyo ka xorayntooda xakameynta dhaqanka iyo diinta.

7.2.2 Taariikhda Xorriyadda Galmada iyo Cawaaqibkeeda

Xorriyadda galmadu waxay si weyn u soo ifbaxday sannadihii 1960-meeyadii, iyadoo qayb ka ahayd mowjaddii labaad ee feminismka. Fikradaha asaasiga ah ee xilligaas waxay ahaayeen in galmadu ay tahay mid dabiici ah oo aan loo baahnayn in la xakameeyo, iyo in diinta iyo dhaqanku ay yihiin kuwo xakameynaya xorriyadda galmada. Waxay ku andacoodeen in haweeneydu ay xor u tahay inay sameyso waxa ay doonto jidhkeeda.
cilmi-baarisyo badan oo cilmiyeed ayaa muujiyay in xorriyaddan galmadu ay keentay cawaaqib xun , kuwaas oo si gaar ah u saameeyay haweenka iyo bulshada guud ahaan. Waxaa ka mid ah cawaaqibtaas:

•Kordhinta cudurrada galmada (STIs) Xoraynta galmada waxay horseeday faafitaanka cudurrada galmada lagu kala qaado, taas oo khatar weyn ku ah caafimaadka dadweynaha.

• Inkasta oo ay jireen horumar dhinaca ka hortagga uurka ah, haddana xoraynta galmada waxay horseeday dilida balaayiin caruur ah oo la iska soo riday

•Burburka qoyska: Xoraynta galmada waxay daciifisay mu’asasada qoyska, taas oo ah tiirka asaasiga ah ee bulshada.

7.2.3 Cilmi-Nafsiga Rabitaanka Galmada

Ibn Qayyim al-Jawziyyah wuxuu yidhi: "النَّفْسُ إِنْ لَمْ تُشْغَلْ بِالْحَقِّ شَغَلَتْكَ بِالْبَاطِلِ" .
Hadalkan wuxuu macnaheedu yahay in naftu haddayna ku mashquulin xaqa, ay kugu mashquulisaa baadilka. Marka rabitaanka galmada aan la xakamaynin, wuxuu noqonayaa mid aan dhammaad lahayn waxaad u baahan tahay wax sii badan oo sii xun.
Waxaa imaanayaa rabitaan aan la gaari karin. Marka rabitaan kasta oo galmo la xoreeyo oo la guto, mid cusub oo sii xun ayaa soo baxa. Tani waxay abuurtaa wareeg aan dhammaad lahayn oo raadinta raaxada ah, kaas oo aan waligiis keenin qanacsanaan dhab ah.
Maanta galbeedka xittaa xaywaanaadka kuma badbaadaan

7.2.4 Dhibaatooyinka Cilmiyeed ee Xorriyadda Galmada

sociologists waxay muujiyeen in xorriyadda galmadu ay si gaar ah u dhaawacday haweenka, ma aha ragga. Tani waa sababta:

1.Kala Duwanaanshaha Jinsiga Marka galmada la xoreeyo, ragga ayaa kaga faa'ido badan haweenka, sababtoo ah rabitaankooda galmo waa mid s degdeg badan khatarihiisa yaryihiin. Haweenku waxay qaadaan cawaaqibta uurka, dhaqidda carruurta, iyo cadaadiska bulshada.

2.**Psychic Fragmentation** Cilmi-baarayaashu waxay muujiyeen in haweenka ku hawlan galmada ka hor guurka ay la kulmaan niyad-jab, qoomamo, iyo walwal.

3.Burburka Xiriirka: Marka galmadu noqoto mid fudud oo aan xayndaabyo lahayn, xiriirrada dheeri waa ay yaraadaan. Tani waxay keentaa in haweenku ay lumiyaan fursadda guurka dheer iyo xiriir waara.

Mid ka mid ah su'aalaha ugu xiisaha badan ee ka soo baxa feminismka laftiisa waa su'aasha ay isweydiinayaan haweenka qaar ee galbeedka: " هل تشعر واحدة منكن أن الثورة الجنسية مفيدة للرجال أكثر من النساء؟" (Ma dareemaysaa mid idinka mid ah in kacaankii galmada uu ragga uga faa'iido badan yahay haweenka?) .

Haweenkaas gaalada ah xaqiiq ayey goor dambe garwaaqsadeen , waxaan ay wadaan dhamaantooda ragga ayaa faa'ido ugu jira , ninkii shalay laga rabay intaas masuuliyad si uu u guursado oo naag u heli , maanta si bilaash ah ayuu ku helaayaa wax masuuliyad la'aan
Tan kale ee xaqiiqda qaraar waxay ahayd xaqiiq biology ah Raggu wuu gaboobi karaa, laakin haweenkuna maya: yacnii waxay kala jeedaan ninka dhalinyarnimadiisa si fiican hadii u baashaalo , uu awoodo xilliga gabowga (laga bilaabo 40 illaa 60) uu awoodo inuu dhisto gurigiisa , halka haweenka ay fursadaha ay ku dhasho aad u yaraadaan markasta ay sii waynaato taa oo ka dhigan fursadaha ay ku guursan karto markasta ay sii yaraato mark ay waynaayso , intaa waxaa dheer fursadaha cudurada ugu imaan kara xorriyadaan ay aad ugu badan tahay ragga sidaa darteed Qofkii falanqeeya xorriyaddan si dhab ah, wuxuu arkaa inay tahay nidaam cusub oo xukun ragga ah, oo loo yaqaan "xorriyad."

7.3 Dilka caruurta

7.3.1 Fahamka Feminismka ee dilka caruurta

Feminists waxay ku andacoodaan in ilamaha la dilo(la iska soo rido) uu yahay "xaq" oo ay leedahay haweeneydu "My Body, My Choice" (Jidhkayga, Doorashadayda). Feminismka qaarkood waxay dilka caruurta u arkaan qayb ka mid ah "caddaaladda taranka" (reproductive justice). Laakiin tani waa fikrad aan lahayn saldhig cilmiyeed. Su'aasha asaasiga ah: ilmuhu ma yahay qayb ka mid ah jidhka haweeneyda mise waa naf madaxbannaan?

7.3.2 Fahamka Cilmiyeed

Cilmiga biology-ga wuxuu caddaynayaa in ilmuhu yahay naf gooni ah laga bilaabo marka shahwada iyo ugxanta isugu yimaadaan . Xilligaas, DNA-ga ilmuhu waa mid ka duwan DNA-ga hooyada, waana naf gooni ah.

Waaba danbi wayn in ilmaha la dilo ama lasoo rido, marka laga reebo xaaladaha gaarka ah (sida hooyada oo khatar ku jirta). ALLE wuxuu yidhi:

"وَلَا تَقْتُلُوا أَوْلَادَكُمْ خَشْيَةَ إِمْلَاقٍ ۖ نَّحْنُ نَرْزُقُهُمْ وَإِيَّاكُمْ" (Suuratul Al-Israa', 17:31)

Ibn Taymiyyah wuxuu yidhi:

"إن إسقاط الحمل بعد نفخ الروح فيه قتل نفس بغير حق، وهو من كبائر الذنوب."
In uurka la soo rido marka ruuxda lagu afuufay uurjiifka waa dil naf aan xaq loo dilin, waana dembi ka mid ah dambiyada ugu waaweyn

Cutubka 8

Usuusha shaydaaniga ah ee gender

8.0 HORDHAC

Dunida aan maanta ku nool nahay waxay dhex mushaxaysaa duufaan fikradeed oo aan hore loo arag, taas oo loogu talagalay in lagu duminayo dhismaha asaasiga ah ee bini'aadamka: kala duwanaanshaha lab iyo dheddig. Waxa loogu yeedho "Aragtida gender" Gender Theory ma aha oo kaliya dood aqooneed, balse waa mashruuc caalami ah oo lagu doonayo in lagu tirtiro xaqiiqada biolajiga ah, laguna beddelo mid dhalanteed oo shaydaani ah.

Aragtidan waxay ku dhisan tahay dhowr tiir oo khatar ah:

1.Kala-goynta Jinsiga iyo genderka: In "Sex" (Biolajiga) iyo "Gender" (Dhaqanka/Dareenka) ay yihiin laba shay oo aan xidhiidh la lahayn.

2.Subjective Reality: In xaqiiqadu tahay waxa qofku isagu idareemo, ee aanay ahayn waxa xubnihiisa iyo hiddo-wadayaashiisu (genes) sheegayaan.

3.Gender Neutrality: In carruurta loo koriyo si "dhex-dhexaad" ah, iyadoo laga ilaalinayo inay ogaadaan inay yihiin wiilal ama gabdhaha.

Waxaan si dheer u baadhi doonaa asalka madow ee aragtidan, anagoo muujinaya inay ka timid maskaxda dad leh cuduro nafsi ah, la tijaabiyay si naxariis-darro ah, haddana loo isticmaalayo in lagu dumiyo qoyska iyo bulshada. Tani waa fulinta ballantii Iblis ee ahayd inuu bini'aadamka amri doono inay beddelaan abuurta ALLE.

"وَلَآمُرَنَّهُمْ فَلَيُغَيِّرُنَّ خَلْقَ اللَّهِ" (Suuratul An-Nisa, 4:119)

8.1 ASAASKA FALSAFADEED: SIMONE DE BEAUVOIR IYO GEERIDA FITRADA

Haddii aan u kuurgalno halka ay ka soo bilaabatay "Gender Theory", waxaynu ku laabanaynaa bartamihii qarnigii 20-aad, gaar ahaan Simone de Beauvoir. Buuggeeda The Second Sex (1949) sidaan horey ugu soo hadalnay.

8.1.1 "Gabadhu Ma Dhalato..."

"One is not born, but rather becomes, a woman" (Gabadhu ma dhalato, balse waa laga dhigaa gabadh) . inkastoo aan ka soo hadalnay hadddase halkaan si kale ayaan ugu hadli doonaa Odhaahdan yar waxay dhalisay masiibo weyn; waxay ka dhigan tahay in "haweenimadu" aanay ahayn wax dabiici ah biological, balse ay tahay "actor-nimo" ama door ay bulshadu ku qasabtay haweenka.

8.1.2 Simone de Beauvoir: Qofnimadeeda iyo Anshax-xumada

Waxa inta badan laga qariyo ardayda jaamacadaha ee lagu baro buuggeeda waa xaqiiqada qofnimo ee Beauvoir. Waxay ahayd qof leh cuduro nafsi ah, waxayna caan ku ahayd inay nebcayd carruurta iyo nolosha qoyska.

Sannadkii 1943, waxaa laga eryay shaqada macallinnimada ee dalka Faransiiska ka dib markii lagu eedeeyay inay xidhiidh galmo la samaysay ardaydeeda oo gabdhaha yaryar ahaa sida aan soo faahfaahinay .

Marka ay Beauvoir tidhaahdo "gabadhu ma dhalato", waxay dhab ahaantii leedahay "anigu waxaan arkaa in haweenimada ay naaqus tahay kana liidato ninka sidaa darteed waa inaa noqdaa sida ninka".

Arintaan si fiican ayaan ugu lafa gurney cutubyadii hore

8.2 DR. JOHN MONEY

Dr. John Money, oo ahaa dhakhtar cilmu nafsiga ku takhasusay oo ka shaqayn jiray Jaamacadda Johns Hopkins ee dalka Maraykanka. Money wuxuu ahaa ninkii dhab ahaan hindisay ereyga "Gender Identity" (Aqoonsiga Jindarka) sannadkii 1955 .

8.2.1 Nurture vs Nature: Beentii John Money

Money wuxuu rumeysnaa aragti ah in bini'aadamku ay dhashaan iyagoo "Gender Neutral" ah (aan dhinacna u dhalan). Wuxuu ku dooday in korinta ay ka xoog badan tahay abuurta . Si uu u caddeeyo aragtidan, wuxuu u baahnaa tijaabo dhab ah oo uu ku sameeyo ilmo caafimaad qaba. Fursaddaas waxay u timid sannadkii 1966, waxaana loo yaqaannaa kiiska "John/Joan Case".

8.2.2 Masiibadii Bruce Reimer (David Reimer)

Bruce Reimer wuxuu ahaa wiil yar oo caafimaad qaba oo ku dhashay dalka Canada sannadkii 1965. Markii uu jiray 6 bilood, waxaa lagu sameeyay gudniin oo fashilmay, taas oo keentay in xubintiisii taranka ay gubatay oo ay go'day. Waalidkiis oo quus jooga waxay u tageen Dr. John Money.

Money wuxuu u arkay fursad dahabi ah oo uu ku tijaabiyo aragtidiisa. Wuxuu waalidkii ku qanciyay: "Ha walwalina, wiilka xubintiisa ka go'day waxaan u beddelaynaa gabadh. Haddii aad u korisaan sidii gabadh, wuxuu noqon doonaa gabadh dhamaystiran, waayo jindarku waa wax la barto" .

Bruce waxaa laga saaray xiniinyaha, waxaa loo dhisay xubin dheddig oo macmal ah, waxaana loo bixiyay magaca Brenda.

8.2.3 Tijaabooyinkii Naxariis-darrada ahaa ee Xafiiska Money

Waxa aan lagu xusin buugaagta "Gender Studies" ee jaamacadaha lagu dhigo waa waxa dhabta ah ee ka dhacay xafiiska Dr. Money. Money ma ahayn dhakhtar kaliya, balse wuxuu ahaa qof faasid ah oo leh rabitaanno shaydaani ah. Si uu Brenda ugu qanciyo inay tahay gabadh, wuxuu isaga iyo walaalkiisii mataanaha ahaa (Brian) ku qasbi jiray:

1.Naked Rehearsals: Inay is-eegaan xubnahooda taranka iyagoo qaawan, isaguna uu kormeerayo.

2.Sexual Mimicry: Inay sameeyaan jilitaanka galmada iyagoo carruur ah, Money-na uu sawirro ka qaadayay si uu u "caddeeyo" inay u dhaqmayaan sidii lab iyo dheddig .

3.Abuse: Wuxuu u muujin jiray sawirro qaawan oo dad waaweyn ah si uu u "tababaro" dareenkooda.

Money wuxuu dunida u sheegay in tijaabadu ay tahay "Dramatic Proof" . Wuxuu qoray maqaallo oo lagu sheegayo in Brenda uu yahay gabadh faraxsan oo jecel inay xidhato dharka gabdhaha, taas oo dhalisay in jaamacadaha adduunka oo dhami ay qaataan "Aragtida Jindarka".

8.3 XAQIIQADA: MASIIBADII IYO GEERIDII DAVID REIMER

In kasta oo Dr. Money uu dunida u sheegay inay tijaabadu guulaysatay, xaqiiqadu waxay ahayd mid naxdin leh. Brenda waligiisa isuma dareemin gabadh. Wuxuu isku dayay inuu is-diso dhowr jeer, wuxuuna diidday inuu xidho dharka gabdhaha. Markii uu gaadhay 14 jir, waalidkiisa ayaa u sheegay xaqiiqadii dhacday.

Isla markiiba, Brenda wuxuu go'aansaday inuu dib ugu laabto inuu noqdo wiil, wuxuuna magaciisa u badashay David Reimer. Wuxuu iska gooyay naasihii macmalka ahaa, wuxuuna qaatay hormoonnada ragga. David wuxuu markii dambe guursaday haweenay, isagoo isku dayayay inuu nolol caadi ah ku laabto.

Si kastaba ha ahaatee, dhaawicii nafsiga ahaa ee Dr. Money u gaystay wuxuu ahaa mid aan la bogsan karin.

•Brian Reimer: Walaalkiis Brian ayaa u dhintay daroogo xad-dhaaf ah sannadkii 2002 ka dib markii uu u adkaysan waayay naxdintii tijaabadaas iyo xanuunkii walaalkiis .

•David Reimer: Sannadkii 2004, David Reimer laftiisa ayaa is-dilay isagoo madaxa isaga toogtay qori, ka dib markii uu ka quustay nolosha .

Tani waa "Guushii" ay ku dhisnaayeen dhammaan waaxyaha Gender Studies ee maanta jaamacadaha ka jira. Aragtida gender waxay ku dhalatay been, waxayna ku dhammaatay dhiig iyo dhimasho. Ma jirto tijaabo kale oo cilmiyeed oo tan ka dambaysay .

8.4 BILL C-16

Markii cilmigu fashilmay, dadkii taageersanaa aragtida jindarka waxay u guureen dhinaca sharciga iyo siyaasadda. Sannadkii 2016, dalka Canada waxaa laga soo saaray sharciga Bill C-16, kaas oo dambiyeeyay qof kasta oo aan u isticmaalin qof kale "magac-u-yaalka" (pronouns) uu isagu doorto .

8.5 DHIBAATADA AAN LAA BOGSAN KARIN

Maanta, aqoonyahanno badan oo dhiirran ayaa bilaabay inay ka hadlaan khatarta aragtidan ee carruurta lagu hayo.

8.5.1 Dr. Debra Soh: Dhammaadka Jindarka

Dr. Debra Soh, oo ku takhasustay cilmiga neerfaha neuroscience, waxay qortay buugga The End of Gender. Waxay ku caddaysay:

•Brain Differences: In maskaxda ragga iyo haweenka ay kala duwan yihiin tan iyo inta ay uurka ku jiraan .

•Hormones: In hormoonnada sida Testosterone (fidhrada lagu abuuray insaanka) ay go'aamiyaan dhaqanka qofka, ee aanay ahayn bulshada.

•Biological Reality: In jinsigu yahay mid "Binary" ah (lab ama dheddig), oo aanu ahayn "Spectrum"

8.5.2 Abigail Shrier: Irreversible Damage

Abigail Shrier, waxay buuggeeda Irreversible Damage ku sifeeyay korodhka gabdhaha doonaya inay is-beddelaan inay tahay "Social Contagion" (caabuq bulsho). Waxay muujisay in gabdhaha yaryar ee leh depression ama anxiety ay baraha bulshada (TikTok, Instagram) ka helaan macluumaad u sheegaya inay "Trans" yihiin, taas oo keenta inay is-qalaan ama ay qaataan hormoonno duminaya jidhkooda iyagoon dhibaatada garanayn .

8.6 ARAGTIDA ISLAAMKA: BURBURINTA FIDRADA IYO BALLANTII IBLIS

Islaamku wuxuu noo sheegay in Ilaahay u abuuray bini'aadamka lab iyo dheddig, uuna dhex dhigay kala duwanaansho dhinac kasta ah si ay isku dhamaystiraan.

"يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ" (Suuratul Al-Hujuraat, 49:13)

8.6.1 Beddelka khalqiga

Aragtida jindarku waxay si toos ah uga soo horjeedaa aayaddan. Waxay doonaysaa inay tirtirto farqiga u dhexeeya ninka iyo haweenayda. Marka la tirtiro farqigaas, waxaa dumaya:

•Qoyska: Ma jiri doono aabbe iyo hooyo, balse waxaa jiri doona "Parent 1" iyo "Parent 2".

•Nasabka: Carruurtu ma garan doonaan cidda ay ka soo jeedaan iyo cidda dhashay.

•Akhlaaqda: Wax kasta oo galmo ah waxay noqonayaan kuwo la aqbali karo maadaama aanay jirin xuduud dabiici ah.

Tani waa dhab ahaan waxa Shaydaanku ballan qaaday: "Waxaan amri doonaa, markaasay beddeli doonaan abuurta Ilaahay." Aragtida jindarku waa wajiga casriga ah ee ballantii Iblis.

Maanta, waxaa waajib ku ah qof kasta oo leh damiir iyo iimaan inuu ka horyimaado masiibadan. Waa inaan carruurteena ka badbaadinaa afkaarahaan shaydaaniga ee ansaarta dajjaal ay wadaan , dhaqan galinta faminsim waa isla midaan , hadii maanta ay awood ku yeeshaan dhulkeen , waxay afkaarahaan shaydaaniga ah ku dhigi doonaan madaarista caruurteena.

CUTUBKA 9: SINAANTA LAB IYO DHEDIG

9.0 HORDHAC CUTUBKA

Cutubkani waxaan ku falaqeyn doonaa fikradda "sinaanta lab iyo dhedig" - fikradda xudunta u ah feminismka casriga ah. Waa mawduuc muran badan dhaliyay oo looga hadlay dhinacyo kala duwan: cilmi (biology, neuroscience, genetics, psychology), falsafad (ethics, justice, moral philosophy), iyo bulsho (sociology, anthropology, political science). Waxaan ku soo bandhigi doonaa caddaymo muujinaya in sinnaanta buuxda ee la doonayo aysan suurtagal ahayn kuna dhisnaan karin xaqiiqada sababtoo ah ragga iyo dumarku waxay ku kala duwan yihiin qaab-dhismeedka maskaxda, hidde-sideyaasha, hormoonnada, iyo dabeecadaha asaasiga ah. Kala duwanaanshahani ma aha ceyb, balse waa qayb ka mid ah abuurista Alle ee kamilka ah.

furuuqda jinsiga waxaan kaga soo hadlnay markaan naqdineynay simone , halkaan inyar oo ka duwa kaga hadleynaa (cutubka udanbeeya bilawdiisa)

9.1 QEEXITAANTA: SINNAAN, CADDAALAD, IYO CADDAALAD-MA-AHA?

9.1.1 Sinnaan Qeexid

Sinnaantu waa fikrad ah in dadka lala dhaqmo si isku mid ah, iyadoo laga tagaayo farqiga jira ee dhexdooda. Fikradani waxay ku taagan tahay mabda'a ah in aadanaha dhammaantood ay leeyihiin qiyam isku mid ah. Feminismka casriga ahi wuxuu ku doodayaa in sinaantu tahay in ragga iyo haweenka loola dhaqmo si isku mid ah dhammaan arrimaha nolosha. Waxay u arkeen sinaanta inay tahay shardi lagama maarmaan u ah xorriyadda haweenka.

Su'aashu waxay tahay: ma jirtaa sinnaan in la isku mid mariyo dadka kala duwan? Mise caddaaladdu waxay u baahan tahay kala duwanaansho? Al-Marrakshi wuxuu yidhi:

" المساواة بين الجنسين التي تدعو إليها النسوية هي مفهوم مشوه. هي تخلط بين التساوي في القيمة الإنسانية والتساوي في الأدوار والوظائف. هذا الخلط هو سبب الخراب الاجتماعي الذي نراه اليوم. الرجل والمرأة متساويان في الكرامة الإنسانية، لكنهما مختلفان في الوظائف والأدوار. وهذا الاختلاف ليس عيبا، بل هو حكمة إلهية."

Sinnaanta ragga iyo dumarka ee ay feminism-ku ku baaqayso waa fikrad qalloocan. Waxay isku dhex qastaa sinnaanta qiimaha iyo karaamada bani'aadamnimo iyo sinnaanta doorarka iyo waajibaadka. Isku dhex yaacani waa sababta burburka bulsheed ee maanta la arkayo. Ragga iyo dumarku waa u siman yihiin karaamada iyo qiimaha bani'aadamnimo, balse way ku kala duwan yihiin doorarka iyo waajibaadka. Kala duwanaanshahani ma aha ceyb, ee waa xigmad Rabbaani ah.

9.1.2 Caddaalad Qeexid

Caddaaladdu waa fikrad ka ballaaran kana duwan sinnaanta. Waxay ka dhigan tahay in qof kasta la siiyo waxa uu xaqa ama mudnaanta u leeyahay, iyadoo la tixgelinayo duruufihiisa, awooddiisa, iyo baahiyihiisa gaarka ah. Sidaa darteed, caddaaladdu mar walba ma aha in dadka oo dhan loola dhaqmo si isku mid ah, balse waa in qof walba loo sameeyo waxa ugu caddaaladsan ee ku habboon xaaladdiisa.

Farqiga u dhexeeya caddaaladda iyo sinnaanta ayaa ah in sinnaantu diiradda saarto in qof walba la siiyo wax isku mid ah ama loola dhaqmo si isku mid ah, iyada oo aan la eegayn kala duwanaanshaha dadka. Halka caddaaladdu ay aqoonsan tahay in dadku ay ku kala duwan yihiin duruufo, awood, masuuliyad, iyo baahiyo, sidaas darteedna qof walba la siiyo waxa uu mudan yahay ama waxa ku habboon xaaladdiisa.

Tusaale ahaan, haddii laba qof ay u baahan yihiin kabo, mid cabbirkiisu yahay 40, kan kalena 45, sinnaantu waxay siinaysaa labadaba kabo isku cabbir ah si ay u wada simnaadaan. Laakiin caddaaladdu waxay qof kasta siinaysaa kabta ku habboon cabbirkiisa. Sidaas awgeed, caddaaladdu mararka qaarkood waxay keentaa in dadka loola dhaqmo si kala duwan, si loo xaqiijiyo natiijo caddaalad ah.

Imaam Ibn al-Qayyim (RHC) wuxuu yidhi:

"وَأَمَّا أَحْكَامُهُ الْأَمْرِيَّةُ الشَّرْعِيَّةُ فَكُلُّهَا تَجِدُهَا مُشْتَمِلَةً عَلَى التَّسْوِيَةِ بَيْنَ الْمُتَمَاثِلَيْنِ وَإِلْحَاقِ النَّظِيرِ بِنَظِيرِهِ وَاعْتِبَارِ الشَّيْءِ بِمِثْلِهِ وَالتَّفْرِيقِ بَيْنَ الْمُخْتَلِفِينَ وَعَدَمِ تَسْوِيَةِ أَحَدِهِمَا بِالْآخَرِ"

Marka laga hadlayo xukunnada shareecada, dhammaantood waxay ku dhisan yihiin laba mabda' in kuwa isku midka ah si isku mid ah loola dhaqmo, halka kuwa kala duwanna loo kala saaro oo aan loo sinnayn xukun ahaan. Tani waxay ka dhigan tahay in shareecadu ay isku midaysaa kuwa isku midka ah iyo inay kala saarto kuwa kala duwan - tani waa caddaalad dhab ah.

9.1.3 Farqiga Muhiimka Ah ee U Dhexeeya Sinnaanta Iyo Caddaaladda

Waa lagama maarmaan in la fahmo in sinnaanta iyo caddaaladda ay yihiin laba fikradood oo kala duwan. Sinnaantu waxay iska indho tiraysaa kala duwanaanshaha dabiiciga ah ee u dhexeeya dadka, halka caddaaladdu ay aqoonsan tahay kala duwanaanshahaas oo ay siinayso qof kasta waxa uu u baahan yahay si uu u hanto guusha. Caddaaladda dhabta ahi waxay u baahan tahay in ragga iyo dumarka si kala duwan loola dhaqmo meelaha ay ku kala duwan yihiin, ma aha in la isku mid mariyo meel kasta.

9.2 FARQA BIOLOOJIGGA AH EE U DHEXEEYA RAGGA IYO DUMARKA

Ka hor inta aynaan guda gelin mawduuca, waxaan rabaa inaan caddeeyo laba qodob oo muhiim ah. Marka koowaad, anigu marnaba daraasadaha iyo cilmi-baarista ka timaadda Galbeedka uma qaato daliilka keliya ee lagu dhisayo xukun ama lagu go'aamiyo xaqiiq. Sababtu waa in hababka cilmi-baarista tijaabada ahi, inkastoo ay faa'iido weyn leeyihiin, aysan badanaa bixin karin yaqiin qadhci ah, balse ay ku dhisan yihiin caddaymaha ugu wanaagsan ee waqtigaas la hayo, kuwaas oo mararka qaar is beddeli kara marka cilmi cusub soo baxo.

Marka labaad, sababta aan mararka qaarkood u soo xiganayo daraasadahaas waa inaan kuwa ku doodaya in cilmiga casriga ahi yahay halbeegga ugu sarreeya ku waajibiyo waxa ay iyagu u aqoonsan yihiin daliil. Sidaas darteed, waxaan adeegsanaya halbeeggooda. Taasina macnaheedu ma aha inaan diidanahay cilmiga ama qiimihiisa. Waxa aan aaminsanahay waa in cilmigu yahay aalad muhiim ah oo lagu ogaado xaqiiqooyin badan, laakiin uusan keligiis noqon karin isha kama dambaysta ah ee lagu kala saaro xaqa iyo baadilka. Waxyigu waa isha koowaad ee xaqa, waxaana ku xiga caqliga suubban, halka cilmiga tijaabaduna uu yahay aalad lagu fahmo dunida dabiiciga ah, balse uusan ka sarreyn karin waxyiga iyo caqliga sariixa ah.

Waxaa intaa dheer in cilmiga galbeedku yahay mid is-beddel badan, sida uu yiri mid ka mid ah cilmi-baarayaasha: "العلم الغربي كأمواج البحر يلاطم بعضه بعضاً وما هو بديهي اليوم قد يغدو خرافة لاحقاً" - cilmiga galbeedku waa sida hirarka badda oo qaarkood qaarka kale ku dhacaan, waxa maanta lagu yaqaan xaqiiqo ayaa laga yaabaa inay berrito noqoto khuraafaad. Hase yeeshee, daraasadahan ayaa muhiim u ah dooddan maxaa yeelay waxay ka soo horjeedaan sheegashooyinka feminism-ka laftiisa.

9.2.1 Genetic Differences

Buugga "Sex Differences in the Brain: From Genes to Behavior" wuxuu soo bandhigayaa caddaymo muujinaya in kala duwanaanshaha hidde-sideyaasha ee u dhexeeya ragga iyo dumarku aanu ku koobnayn oo keliya koromosoomyada jinsiga (XX iyo XY). Waxay sharxayaan in inta badan hidde-sideyaasha saameeya qaab-dhismeedka iyo shaqada jidhka ay ku yaalliin koromosoomyada jidhka (autosomes), halka saamaynta jinsiguna ay ku faafto nidaamka hidde-sideyaasha oo dhan. Sidaas awgeed, jinsigu ma aha arrin ku kooban hal labo oo koromosoom oo keliya, balse waa sifo bayoolojiyeed Alle ku abuuray oo saamayn ku leh jidhka oo dhan.

Tusaalooyin ka mid ah hidde-sideyaasha Alle ku abuuray ee saameeya qaab-dhismeedka maskaxda iyo dabeecadda:

(b) Serotonin Transporter Gene (SERT ama 5-HTT) - Koromosoomka 17. Hidde-sidehaan wuxuu ka qayb qaataa nidaaminta serotonin-ka maskaxda, kaas oo saameeya walaaca, cabsida, iyo sida qofku uga falceliyo xaaladaha bulshada. Daraasado badan ayaa muujiyey in dumarku celcelis ahaan muujiyaan xasaasiyad bulsho iyo awood sare oo ay ku fahmaan muujinta wejiga iyo shucuurta dadka kale, halka raggu celcelis ahaan muujiyaan jawaab-celin ka duwan calaamadaha bulshada.

(t) Oxytocin Receptor Gene (OXTR) - Koromosoomka 3. Hidde-sidehaan wuxuu door muhiim ah ku leeyahay naxariista, kalsoonida, iyo samaynta xiriirrada bulshada. Celcelis ahaan, dumarku waxay muujiyaan jawaab xooggan oo la xiriirta xidhiidhka bulshada iyo naxariista, halka ragga saamayntani inta badan si weyn u muuqato xilliga aabbannimada.

(j) Vasopressin Receptor Gene (AVPR1A) - Koromosoomka 12. Hidde-sidehani wuxuu la xiriiraa dabeecadaha ilaalinta, tartanka, iyo difaaca deegaanka. Celcelis ahaan, ragga waxaa lagu arkay heerar sare oo dabeecadahaas ah marka loo eego dumarka.

(x) Dopamine Receptor Genes (DRD4 iyo DRD2) - Koromosoomka 11. Waxay door ku leeyihiin nidaamka abaalmarinta maskaxda, qatar-qaadashada, iyo go'aannada degdegga ah. Celcelis ahaan, ragga waxaa lagu arkay u janjeerid badan

dhinaca qatar-qaadashada, halka dumarku celcelis ahaan muujiyaan taxaddar dheeraad ah iyo tixgelin weyn oo ku saabsan cawaaqibta.

(kh) HPA Axis Genes (NR3C1 iyo FKBP5) - Koromosoomka 5. Hidde-sideyaashani waxay ka qayb qaataan habka uu jidhku uga jawaabo cadaadiska. Cilmi-baarisyo badan ayaa soo jeediyey in raggu ay u badan tahay inay muujiyaan jawaabta loo yaqaan "fight or flight" (dagaal ama carar), halka dumarku celcelis ahaan u janjeeraan jawaabta loo yaqaan "tend and befriend" (daryeel iyo xoojinta xiriirrada).

(d) Language-related Genes (FOXP2 iyo CNTNAP2) - Koromosoomka 7. Waxay door muhiim ah ku leeyihiin horumarinta luqadda iyo hadalka. Daraasado ayaa muujiyey in gabdhaha yaryar ay celcelis ahaan muujiyaan heer sare oo muujinta FOXP2 ah, taas oo la xiriirta horumar luqadeed oo horeeya marka loo eego wiilasha.

(r) Hidde-sideyaasha saameeya horumarinta Amygdala-da. Kooxo badan oo hidde-sideyaal ah ayaa saameeya samaysanka iyo shaqada amygdala, oo door weyn ku leh cabsida, hanjabaadda, tartanka, iyo fahamka shucuurta. Celcelis ahaan, dumarku waxay muujiyaan awood sare oo ku saabsan aqoonsiga shucuurta dadka kale, halka raggu ay inta badan muujiyaan jawaab xooggan oo ku wajahan hanjabaadaha iyo tartanka.

Qorayaashu waxay tilmaamayaan in hidde-sideyaashan intooda badan ay ku yaalliin koromosoomyada caadiga ah (autosomes), ee aanay ku koobnayn koromosoomyada jinsiga (X iyo Y). Sidaas darteed, kala duwanaanshaha bayoolojiga ee ragga iyo dumarku ma aha mid ku kooban xubnaha taranka ama koromosoomyada jinsiga oo keliya, balse wuxuu ku lug leeyahay habka ay hidde-sideyaal badan uga shaqeeyaan jirka iyo maskaxda oo dhan. Taasi waxay muujinaysaa in jinsigu yahay nidaam bayoolojiyeed oo saameeya dhammaan jirka, ee aanu ahayn sifo ku kooban hal xubnood ama hal lammaane oo koromosoomyo ah.

9.2.2 Farqiga Maskaxda Neuroscience

Cilmi-baarisyo badan oo ku saabsan neerfaha neuroscience ayaa muujiyey in ragga iyo dumarku ay leeyihiin kala duwanaansho celcelis ahaan ka muuqda qaab-dhismeedka maskaxda, habka ay u wada xiriiraan gobollada maskaxdu, iyo sida hormoonnadu u saameeyaan shaqadeeda.

(b) Nucleus Accumbens (NAc) - Xarunta Abaalmarinta (Reward System). Daraasado ayaa muujiyey in dumarka hormoonka oxytocin (OT) uu door muhiim ah ka ciyaaro isku xidhka u dhexeeya Nucleus Accumbens (NAc) iyo Prefrontal Cortex (PFC). Tijaabooyin lagu sameeyey xayawaanka ayaa muujiyey in marka la xannibo oxytocin receptor (OTR) ee gobolladan, ay yaraato awoodda samaysashada xidhiidhka lammaanaha. Tani waxay muujinaysaa in nidaamka abaalmarinta maskaxdu uu si dhow ula falgalo hormoonnada bulshada.

(t) Lateral Septum (LS) iyo Ventral Pallidum (VP). Ragga, hormoonka vasopressin (AVP) ayaa door weyn ku leh isku xidhka Lateral Septum (LS) iyo Ventral Pallidum (VP). Daraasado xayawaan ayaa muujiyey in marka la xannibo V1a receptor, uu yaraado samaysanka xidhiidhka lammaanaha. Tani waxay soo jeedinaysaa in ragga iyo dumarku ay isticmaalaan habab hormoon oo kala duwan si ay u gaaraan dabeecado bulsho oo isku dhow.

(j) Amygdala. Amygdala waa qayb maskaxda ka mid ah oo door muhiim ah ku leh cabsida, hanjabaadda, iyo habaynta shucuurta. Celcelis ahaan, ragga waxaa lagu arkay mug (volume) ka weyn amygdala marka la saxo cabbirka maskaxda, halka dumarkana lagu arkay isku xidh xooggan oo u dhexeeya amygdala iyo qaybo kale oo maskaxda ah oo ku lug leh habaynta shucuurta iyo luqadda. Kala duwanaanshahan ayaa lagu soo jeediyey inuu qayb ka yahay farqiga laga arko habka labada jinsi u farsameeyaan xogta shucuureed.

(x) Corpus Callosum. Corpus callosum waa qaybta isku xidha labada qaybood ee maskaxda. Daraasadaha qaarkood waxay soo jeediyeen in dumarku leeyihiin isku xidh xooggan oo u dhexeeya labada hemisphere, inkastoo cilmi-baarisihii dambe aysan isku wada raacin in corpus callosum-ka dumarku guud ahaan ka weyn yahay ragga. Waxa ay daraasado badani isku raaceen ayaa ah in qaabka isku xidhka maskaxdu uu celcelis ahaan ku kala duwan yahay labada jinsi.

(kh) Prefrontal Cortex (PFC). Prefrontal Cortex (PFC) wuxuu masuul ka yahay qorshaynta, xakamaynta dareenka, go'aan qaadashada, iyo xakamaynta rabitaannada. Daraasado badan ayaa muujiyey in dumarku celcelis ahaan muujiyaan firfircooni ama isku xidh sare oo ka jira qaybo ka mid ah PFC marka la qabanayo hawlo la xidhiidha habaynta shucuurta iyo isgaadhsiinta bulshada. Ragga iyo dumarku labaduba waxay adeegsadaan PFC, balse qaabka uu u shaqeeyo iyo xiriirradiisu way ku kala duwanaan karaan.

(d) Kala Duwanaanshaha Habka Fikirka - Aragtida Kurokawa Ehoko. Cilmi-baadhis dheeraad ah oo uu sameeyey khubarada neerfaha ayaa muujinaysa in ragga iyo dumarku ay adeegsadaan waddooyin neerf oo kala duwan. Kurokawa Ehoko, oo ah khabiira cilmiga maskaxda iyo horumarinta AI-ga (Artificial Intelligence) ee Japan, waxay soo bandhigtay fikradda "Kansei" (cognitive sensation). Waxay ku doodayso in kasta oo maskaxda ragga iyo dumarku ay isku mid yihiin qaab-dhismeed ahaan, haddana waxay ku kala duwan yihiin gobollada firfircoon ee xaaladaha kala duwan. Sida ay hadalka u dhigtay:

"Doubtless the brains of men and women are structurally similar, but the difference lies in the regions that activate under specific conditions. Only from this perspective can we say that men and women have different brains."

Kurokawa waxay tir in laba nooc oo "kansei" (cognitive sensation) ah ay jiraan. Nooca koowaad waa kan ragga u badan, kaas oo diiradda saara xallinta mashaakilaadka, ujeeddo-ku-saleysan, oo aad u fiirinaya arrimaha mustaqbalka fog. Nooca labaad waa kan dumarka u badan, kaas oo diiradda saara xidhiidhka bulshada, naxariista, wacyiga deegaanka, iyo fahamka shucuurta dadka kale. Waxay tiri:

"عندما يشعر الناس بالإثارة أو التوتر، تنشط مسارات عصبية معينة، وتسمح لنا مجموعة رئيسية واحدة بالتركيز على الأشياء البعيدة وتزيد مجموعة أخرى وعينا بمحيطنا المباشر"

Marka dadku dareemaan kacsanaan ama walaac, waddooyin neerf oo gaar ah ayaa firfircooma. Koox weyn ayaa inoo ogolaanaysa inaan diiradda saarno waxyaalaha fog, halka koox kalena ay kordhiso wacyiga ku saabsan deegaanka. Kurokawa waxay xustay in qaabkani uu ka soo jeedo horumarka taariikhiga ah - raggu waxay

horumariyeen xirfadaha ugaarsiga iyo difaaca, halka dumarku ay horumariyeen xirfadaha daryeelka carruurta iyo isgaadhsiinta bulshada. Tani waxay caddaynaysaa in kala duwanaanshuhu uu yahay mid dabiici ah oo asal ahaan ka soo jeeda qaab-dhismeedka maskaxda.

9.2.3 Farqiga Hormoonnada

Cilmi-baadhisyo badan, oo ay ku jiraan kuwii David J. Handelsman, waxay muujinayaan in ragga iyo dumarku ku kala duwan yihiin heerarka hormoonnada muhiimka ah.

Testosterone: Ragga qaangaarka ah waa 7.7-29.4 nmol/L. Dumarka (ka hor menopause) waa 0-1.7 nmol/L. Celcelis ahaan, raggu waxay leeyihiin heer testosterone oo qiyaastii 10 ilaa 20 jeer, mararka qaarna ka badan, marka loo eego dumarka. Hormoonkani wuxuu Alle u qaabeeyey inuu door muhiim ah ka ciyaaraa koritaanka murqaha, rabitaanka galmada, tartanka, iyo dabeecadaha difaaca.

Estrogen: Dumarku waxay leeyihiin heerar estrogen oo aad uga sarreeya kuwa ragga. Hormoonkani wuxuu ka qayb qaataa wareegga taranka, caafimaadka lafaha, habaynta maskaxda, iyo qaybo ka mid ah dabeecadaha bulshada iyo naxariista.

Oxytocin: Oxytocin waxaa badanaa loogu yeeraa "hormoonka isku xidhka bulshada." Celcelis ahaan, dumarku waxay muujiyaan saamayn xooggan oo oxytocin-ku ku leeyahay xidhiidhka hooyada iyo ilmaha, naxariista, iyo kalsoonida bulshada. Raggana oxytocin wuu ku kordhaa, gaar ahaan xilliga aabbannimada iyo marka ay si dhow ula falgalaan carruurtooda.

Vasopressin: Ragga celcelis ahaan waxaa ku badan saamaynta vasopressin, taas oo lala xidhiidhiyo dabeecadaha ilaalinta, difaaca, tartanka, iyo feejignaanta hanjabaadaha. Dumarkuna sidoo kale way leeyihiin hormoonkan, laakiin saamayntiisu celcelis ahaan way ka duwan tahay tan ragga.

Kala duwanaanshahan hormoonnada ayaa qayb weyn ka ah sababta ay ragga iyo dumarku u dhaqmaan si kala duwan. Ma aha arrin dhaqan oo keliya ku dhisanyahay, balse waxay leedahay asal bayooloji oo qoto dheer.

9.2.4 Kala Duwanaanshaha Danaha Iyo Doorashada Xirfadaha

Cilmi-baaris lagu sameeyey in ka badan 42 wadan ayaa muujisay in ragga iyo dumarku ay ku kala duwan yihiin waxa ay calaamadeeyaan marka ay dooranayaan xirfadaha. Daraasaddani waxay oggolaanaysaa in dumarku ay calaamadeeyeen shaqooyinka ay dadka la macaamilaan ("people-oriented"), halka raggu ay calaamadeeyeen shaqooyinka ay shay'ada la macaamilaan ("things-oriented"). Sida ay daraasaddu u dhigantahay:

"Women love working with people and men love working with things all over the world... Surprisingly, recent studies tend to show that gender differences appear larger in societies with greater gender equality and where people have greater economic resources. This has become known as the Gender Equality Paradox."

Tani waxay muujinaysaa in kala duwanaanshaha xirfadaha uusan ahayn mid ka dhashay cadaadis bulsho oo keliya, balse uu leeyahay asal dabiici ah oo ka imanaya kala duwanaanshaha maskaxda iyo hormoonnada. Daraasad kale oo laga helay joornaal "SAGE" ayaa muujisay in raggu ay u janjeeraan xirfadaha STEM si adag oo ah 1.5 jeer ka badan dumarka, xitaa marka la eego fursadaha dhaqaale.

9.3 TIJABDAA ISKANDINAAFIYA: SIDA SINNANTA U KEENTAY KALA DUWANAANSHAHA

9.3.1 Tijaabada Iskandinaafiya

Wadamada Iskandinaafiya (Norway, Sweden, Denmark, Finland, Iceland) waxay yihiin kuwa ugu horeeya dunida xagga sinaanta lab iyo dhedig. Waxay leeyihiin siyaasado loogu talo galay sinnaanta lab iyo dhedig - fasaxyada dhalmada ee dheer, xannaanada carruurta oo dawlado, iyo tallaabooyin lagu kordhinayo tirada haweenka xarumaha. Haddaba, su'aashu waxay tahay: sidee buu u dhaqmay sinaantu wadamada Iskandinaafiya?

9.3.2 Natiijooyinka Tijaabada: "Gender Equality Paradox"

Mala-awaalku wuxuu ahaa in kororka sinnaanta bulshada uu yarayn doono kala duwanaanshaha u dhexeeya ragga iyo dumarka. Hase yeeshee, natiijooyinka la arkay waxay muujiyeen wax ka soo horjeeda arrintaas. Farqiga ugu weyn ee ragga iyo dumarka ee dhinaca danaha iyo dabeecadaha waxaa laga helay waddamada Iskandanaafiya, taas oo gebi ahaanba ka hor timid wixii markii hore la filayey.

Arrintan waxaa loogu yeeraa "Gender Equality Paradox" ama "Is-burinta Scandinavian-ka."

Qaar ka mid ah cilmi-baadhayaashu waxay tilmaameen in waddamada Iskandinaafiya, oo ka mid ah dalalka ugu sinnaanta badan adduunka, ay yihiin meelaha laga arkay kala duwanaanshaha ugu weyn ee ragga iyo dumarka marka la eego danaha, shakhsiyadda, iyo doorashada xirfadaha. Tani waxay tahay caddayn muujinaysa in kala duwanaanshuhu uu yahay mid dabiici ah oo asal ahaan ka soo jeeda bayoolijiga, ma aha mid ka dhashay cadaadis bulsho oo keliya.

9.3.3 Tirakoobka STEM ee Adduunka

Tirokoobyo ka yimid UNESCO iyo World Economic Forum (WEF) ayaa iftiiminaya xaqiiqo muhiim ah oo ku saabsan kala duwanaanshaha danaha ragga iyo dumarka marka la eego xirfadaha. Qoraalka UNESCO ee 2021 ayaa muujinaya in haweenku ay yihiin kuwa laga tirada badan yahay dhanka cilmiga iyo tignoolajiyada:

- Haweenku waxay yihiin 33% cilmi-baarayaasha adduunka .

- Haweenku waxay yihiin 28% kaliya oo ka qalin jabiya injineerinnimada.

- Haweenku waxay yihiin 40% ka qalin jabiya cilmiga kombuyuutarka.

- Haweenku waxay yihiin 22% oo keliya oo ka shaqeeya AI-ga adduunka oo dhan.

Tani waa xaalad ka jirta guud ahaan adduunka, inkastoo ay jiraan kala duwanaansho gobol. Tusaale ahaan, Singapore, Italy, iyo South Africa ayaa hogaaminaya haweenka ku jira AI (28%), halka Brazil (14%), Mexico (15%), Germany iyo Poland (16%) ay yihiin kuwa hooseeya.

Shirkadaha teknoolojiyadda waaweenka ahna waxaa ka jira kala duwanaansho la mid ah:

- Facebook: Haweenku waxay yihiin 23% oo keliya oo ka shaqeeya doorarka farsamada, iyo 33% doorarka hoggaaminta.

- Apple: Haweenku waxay yihiin 23% doorarka farsamada, iyo 29% doorarka hoggaaminta.

- Amazon: Haweenku waxay yihiin 27% oo keliya oo maamulayaasha adduunka oo dhan.

Tirokoob khadarka ah ayaa muujinaysa in haweenku ay yihiin 4 ka mid ah 10 aqoonyahanno ah oo ku nool adduunka oo dhan. Waxayna ku badan yihiin cilmiga bulshada iyo bani'aadamnimada (16%), cilmiga bayoolojiga (15%), iyo cilmiga caafimaadka (14%), marka loo eego cilmiga xisaabta (6%) iyo injineerinnimada (5%).

World Economic Forum waxay ku sheegtay qoraalkeedii 2021 ee "Global Gender Gap Report" in waqtigii lagu xidhi lahaa farqiga jinsiga uu ka kordhay jiil: 99.5 ilaa 135.6 sano. Tani waa wax lagu qoslo, maadaama ay muujinayso in siyaasadda sinnaanta aysan shaqeyn sida loo doonayo.

Waxaa intaa dheer, qoraal 2024 ah oo cinwaankiisu yahay "International Women's Day: Why STEM Education Remains Male Dominated" ayaa xaqiijiyay in:

"Women are more likely to pursue life sciences and social sciences such as biology and psychology, but fields such as engineering, physics and computer science are dominated by men. Regarding employment, women make up only about 28% of the STEM workforce worldwide."

Haweenku waxay u badan yihiin inay doortaan culuumta nolosha iyo culuumta bulshada, sida biology iyo cilmu-nafsiga. Halka dhinacyada sida injineerinnimada, physics, iyo cilmiga kombiyuutarrada ay raggu ku badan yihiin. Marka laga hadlayo suuqa shaqada, haweenku waxay ka yihiin qiyaastii 28% oo keliya shaqaalaha ka shaqeeya qaybaha STEM adduunka.

Qoraalku wuxuu isku dayay in uu sababta uga dhi go dhaqanka iyo qaababka hore, laakiin sheegashadaasi waa mid aan sal iyo raad lahayn sidaan ku arki doonno.

Tirokoob dheeri ah oo 2023 ah ayaa muujinaysa:

" النساء يشكلن (34%) من القوى العاملة في مجال العلوم والتكنولوجيا والهندسة والرياضيات و (35%) ومع ذلك توجد تفاوتات مماثلة للرجال في العلوم الاجتماعية حيث يشكل STEM من طلاب الجامعات الرجال أقل من (40%) في الميدان مع كون العمل الاجتماعي عبارة عن نسبة ضئيلة حيث أن (10%) من المهنة من الرجال، يبدو أن فكرة عدم وجود اختلافات جوهرية بين الرجال والنساء تفسر تلك الفوارق تتعارض مع نتائج البحث التي مفادها أن الرجال والنساء مختلفون بشكل كبير في العديد من النواحي

"Haweenku waxay ka yihiin 34% shaqaalaha STEM iyo 35% ardayda STEM ee jaamacadaha. Dhanka kale, raggu waxay ka yihiin wax ka yar 40% culuumta bulshada, halka shaqada daryeelka bulshada ay raggu ka yihiin qiyaastii 10% oo keliya. Sidaas darteed, aragtida sheegaysa inaysan jirin kala duwanaansho dabiici ah oo u dhexeeya ragga iyo dumarka waxay u muuqataa inay khilaafsan tahay daraasado badan oo muujinaya in labada jinsi ay ku kala duwan yihiin dhinacyo badan

Tani waxay si cad u muujinaysaa in kala duwanaanshuhu uusan ahayn "mid ka dhashay eex ama qaabab hore," balse uu yahay mid dabiici ah oo ka bilaabma xagga hidde-sideyaasha iyo hormoonnada.

9.3.4 Kala Duwanaanshaha Doorashada Shaqooyinka

Daraasado ayaa muujiyey in waddamada Iskandinaafiya ay weli ka jiraan kala duwanaansho muuqda oo u dhexeeya ragga iyo dumarka marka ay dooranayaan xirfadaha. Tusaale ahaan:

- Kalkaaliyeyaasha caafimaadka dumarku aad bay uga badan yihiin ragga.

- Injineerinnimada iyo farsamooyinka qaarkood raggu aad bay uga badan yihiin dumarka.

Cilmi-baadhayaasha taageera aragtidan waxay ku doodaan in farqigan badankiisu ka dhashay doorashooyin shakhsiyeed oo lagu sameeyey jawi ay fursaduhu u furnaayeen labada jinsi. Qaar ka mid ah daraasadaha ayaa sheegay in waddamada sinnaanta sare leh aysan khasab ahaan yeelan saamiga ugu badan ee haweenka ku jira STEM. Sida mid dr ah yidhi:

"As cultures become more gender neutral, the number of women who choose STEM fields decreases rather than increases."

"Marka bulshooyinku sii noqdaan kuwo dhexdhexaad ka ah jinsiga, tirada haweenka doorta culuumta STEM way yaraataa halkii ay ka kordhi lahayd."

Tusaale ahaan, Sweden oo inta badan lagu tilmaamo dal ka mid ah kuwa ugu sinnaanta badan, waxay leedahay boqolkiiba haween oo STEM ku jira oo ka hooseeya dalal kale oo aan sidaas u sinnayn, sida dalalka Carabta.

9.3.5 Kala Duwanaanshaha Shakhsiyadda

Daraasadaha cilmi-nafsiga ayaa sidoo kale soo jeediyey in kala duwanaanshaha ragga iyo dumarka ee dhinaca shakhsiyadda uu celcelis ahaan ku weyn yahay waddamada Iskandinaafiya marka loo eego dalal badan oo dhaqaalahoodu hooseeyo. Waxay yiraahdeen haddii dhaqanka oo keli ahi sabab u ahaan lahaa kala duwanaanshaha, waxaa la filan lahaa in farqigu yaraado marka bulshadu noqoto mid sinnaan badan. Hase yeeshee, natiijooyinka qaar waxay muujiyeen wax ka duwan saadaashaas.

Tani waxay caddaynaysaa in kala duwanaanshuhu uu yahay mid dabiici ah oo asal ahaan ka soo jeeda bayoolojiga oo Alle ku abuuray, ma aha mid ka dhashay dhaqan ama cadaadis bulsho oo keliya.

9.3.6 Xaaladda Wadamada Carabta Iyo Is-burinta Scandinavian-ka

Waxaa xusid mudan in waddamada Carabta iyo Bariga Dhexe ay yihiin kuwa ugu horreeya adduunka marka la eego tirada haweenka wax ka baranaya jaamacadaha takhasusyada sayniska (physcis, injineernimo, chemistry, STEM). Jazaa'ir ayaa ah lambarka koowaad sida ku cad daraasadaha, halka waddamada Scandinavian-ka ay ku jiraan kaalmaha ugu dambeeya. Tani waxay u egtahay mid is burinaysa - maxaa yeelay waddamada Carabta ayaa inta badan lagu eedeeyaa inay yihiin kuwa "sinnaanta jinsiga" ku dambeeya.

Sababta ifafaalahan ayaa ah in waddamada Scandinavian-ka ah ee aaminsan xorriyadda iyo shakhsiyadda buuxda, iyo sidoo kale heerka nololeed ee aadka u sarreeya, uu qofku leeyahay xorriyad buuxda oo uu ku barto takhasus kasta oo uu doono, iyada oo aan cadaadis ka imaan qoyska, bulshada, ama cadaadiska xaaladda dhaqaale. Sidaa darteed, waddamada Scandinavian-ka ah, gabadhu waxay baran kartaa takhasus kasta oo ay doonto iyada oo aan cadaadis lahayn. Laakiin waxa la yaabka leh ayaa ah in xorriyaddan buuxda ay soo bandhigtay farqiga u dhexeeya haweenka iyo ragga inbadan, waxayna burburisay aragtida sinnaanta. Gabadha Scandinavian-ka ah markii ay heshay xorriyad, ma ay dooran takhasusyada cilmiga ah, balse way ka carartay gebi ahaanba, waxayna u tagtay

takhasusyada bani'aadamnimada iyo bulshada, taas oo muujinaysa in haweenku dabiiciyan aysan u janjeerin cilmiga dabiiciga ah iyo tignoolajiyada inta ay u janjeeraan cilmiga bani'aadamnimada.

Halka waddamada Carabta, gabadha la geliyo xaalad gaar ah oo ku qasbaysa inay doorato takhasusyada bixiya lacagta ugu badan iyo darajada bulsho ee ugu sarreysa, sidaa darteed waxay u tagtaa takhasusyada cilmiga ah. Waxa arrinta u fududeeyay ayaa ah in takhasusyada cilmiga ah ee waddamada Carabta ay ku dhisan yihiin xifdin iyo wax barid kaliya, mana ku dhisna sahamin iyo hal-abuurnimo, si ka duwan sida ay tahay nidaamka Scandinavian-ka tusaale ahaan. Sida la og yahay, haweenku waxay u janjeeraan xifdinta iyo wax baridda in ka badan ragga, waxayna ka daciifsan yihiin ragga dhinaca sahaminta iyo hal-abuurnimada, sidaa darteed waxay ka heleen takhasusyada cilmiga ah ee waddamada Carabta mid la jaanqaadaya dabeecadooda, si ka duwan haweenka reer Galbeedka.

Takhasusyada cilmiga ah ee ku dhisan taxliilka, soo saarma, hal-abuurnimada, iyo sahaminta, kana fog xiriirka bulshada, ma la jaanqaadaan dabeecadda haweenka. Waxaa taas xaqiijinaya tusaalaha waddamada Scandinavian-ka ah ee siiyay haweenka xorriyad buuxda oo ay ku doortaan, iyaguna waxay doorteen inaysan u tagin takhasusyadaas.

Hadalkaan hore ayaan ugu soo hadalnay

9.4 XAALADDA DUMARKA EE CIIDANKA

Markasta oo laga doodo sinaanta waxay isal tagtaa simida howlaha shaqo ee adag sida mida ciidan.

9.4.1 Daraasadda US Marine Corps

US Marine Corps waxay samaysay daraasad 1 sano ah oo ku saabsan in haweenka la geliyo goobaha dagaalka. Natiijada:

- 69%: Kooxaha ragga oo dhan ayaa ka fiicnaa kooxaha laba jinsiga leh 69% howlaha la qiimeeyay.

- Top 10%: Dumarka ugu xoogga badan (top 10%) waxay la siman yihiin ragga ugu hooseeya (bottom 40%) xagga jirka.

- Dhaawaca: Haweenku waxay ku dhaawacmaan jir ahaan in ka badan ragga inta lagu jiro tababarka.

- Dropout: Haweenku waxay isaga tagaan tababarka laba jeer ka badan ragga.

Haweeney sarkaal Marine Corps ah oo la yiraahdo Mary Reinwald:

"Women break physically at a much greater level than our male counterparts. That's just reality."

"Haweenku waxay dhaawacyo iyo burbur jireed la kulmaan heer aad uga sarreeya kan ragga. Taasi waa xaqiiqada jirta."

9.4.2 Saamaynta Jirka ee Haweenka Dagaalka

Haweeney sarkaal Marine Corps ah waxay sheegtay:

"I faced a lot of weight loss, muscle atrophy. I also developed polycystic ovarian syndrome, which for me resulted in infertility. I was only doing a portion of what our infantry do. I understand that every female is going to break down at a different rate, but our male counterparts are breaking down also. I just think it's an unnecessary risk."

"Waxaan la kulmay miisaan-dhac weyn iyo murqaha oo daciifay. Waxa kale oo igu dhacay cudurka Polycystic Ovarian Syndrome (PCOS), kaas oo ii sababay madhalaysnimo. Waxaan qabanayey oo keliya qayb ka mid ah hawlaha ay askarta

lugtu qabtaan. Waan ogahay in haweeney kasta aysan isku si u saameyn doonin, sidoo kalena raggana dhaawacyo way soo gaadhaan. Laakiin aniga waxay ila tahay in halistaasi aysan daruuri ahayn."

Haddii qof walba doonayo in wax walba ay noqdaan kuwo si buuxda u siman, markaa haweenkuna waa inay diyaar u noqdaan waajibaadka ciidanka. Haddii qaran diyaar u yahay inuu haweenkiisa u diro jiidda hore ee dagaalka, waxay u muuqan kartaa xitaa baaq in lagu soo duulo, garanmaayo cidda sidaas qaran ku ilaashan karta.

Feminism-gu wuxuu ku dhisanyahay dhalanteed in sinnaanta siyaasadeed, wax barasho iyo dhaqaale ee ragga iyo haweenku ay si daruuri u horseedi doonto sinnaan shucuureed. Laakiin, tani ma dhicin. Inkasta oo saddex-iyo-boqol sano oo dib-u-habeyn bulsho ah lagu sameeyay, haddana labada jinsi waxay weli ku hadlaan "luqado kala duwan" marka ay timaaddo shucuurta iyo jacaylka.

Waddamada ugu badan ee hirgaliyey sinaanta ayaa ah kuwa aad ugu soo muuqda farqiga laba jinsi, nafsi ahaan iyo biology ahaan.

9.5 DUGSIGA, TACLIINTA, IYO FARQA JINSIGA

9.5.1 Saamaynta Jinsiga Macallinka

Qoraal ka soo baxay New York Times ayaa muujinaya arrin muhiim ah oo ku saabsan dugsiga. 77% macallimiinta dugsiga hoose iyo dhexe ee Maraykanku waa haween (white women). Tani waxay saamayn weyn ku leedahay sida loo qiimeeyo ardayda. Sida uu qoraalku sheegay:

"Generally, girls outperform boys, and white students outperform black and Latino students."

Tani waxay soo koobaysaa in arrimaha sida jinsiga iyo midabka macallinku ay saameyn ku leeyihiin sida ardayda loo qiimeeyo. Daraasado ayaa muujiyey in ardayda madow (black) ay aad uga faa'iidaystaan marka ay la leeyihiin macallin madow - waxay yareysaa ka bixista dugsiga waxayna kordhisaa helista jaamacadda.

Waxaa intaa dheer in jinsiga macallinku uu saameyn ku yeesho ardayda. Sida uu sheegay Thomas Dee, oo ah barre ku takhasusay cilmiga waxbarashada ee Stanford:

"Girls perform better with a female teacher and boys perform better with a male teacher. When eighth grade students had only female teachers and not a single male teacher, boys fell behind girls by the equivalent of three and a half months of learning."

Tani waxay muujinaysaa in jinsiga macallinku uu yahay arrin muhiim ah oo saamaysa guusha ardayda. Marka la eego in 77% macallimiintu yihiin haween, tani waxay si togan u faa'iidaysaa gabdhaha iyadoo u dhibeysa wiilasha.

9.5.2 Eexda Qiimeynta Dugsiga

Qoraal ay soo saartay BBC oo ku saabsan daraasad ay samaysay OECD (Organization for Economic Co-operation and Development) ayaa muujinaya in macallimiintu ay u eexdaan gabdhaha marka ay qiimeynayaan:

"According to an international study, teachers are more lenient in grading girls' school work."

Daraasaddu waxay oggolaanaysaa in gabdhuhu helaan buundooyin ka sarreeya wiilasha xitaa marka ay soo saaraan shaqo isku mid ah tayo ahaan. Sababta waxaa loo haystaa in gabdhaha loo arko inay yihiin kuwa "ka fiiccan dabeecad ahaan, u xamaasadsan waxbarashada, oo aan dhib lahayn." Sida ay daraasaddu u dhigantahay:

"Researchers suggest that this reflects expectations about girls being positive towards learning and less disruptive."

Tani waxay muujinaysaa in buundooyinka sare ee gabdhaha heelan aysan mar walba ka tarjumayn karti dhab ah, balse ay ka tarjumayaan eexda macallimiinta. Tani waxay sidoo kale sharxaysaa sababta ay qaar ka mid ah gabdhuhu u yeeshaan kalsooni darro marka ay galaan suuqa shaqada - maxaa yeelay waxay aqoonsan yihiin in buundooyinkoodii dugsigu aysan ahayn kuwo ka tarjumaya kartidooda dhabta ah.

9.5.3 Kala Duwanaanshaha Kalsoonida

Daraasad kale ayaa muujisay in gabdhuhu ay leeyihiin kalsooni darro marka ay la kulmaan imtixaanada adag. Daraasad 2016 ah oo lagu daabacay joornalka "Science" ayaa muujisay in gabdhuhu ay 1.5 jeer ka badan yihiin wiilasha marka ay lumiyaan kalsoonida ka dib imtixaankii ugu horreeyay ee adag. Sida ay daraasaddu u dhigantahay:

"Women have 1.5 times less confidence in pursuing scientific careers than men after taking the first test, as they felt they would not succeed in the remaining tests when they realized the difficulty of the test."

Daraasaddani waxay muujinaysaa in kala duwanaanshaha kalsoonida uu yahay mid dhab ah, ma aha mid ka dhashay eexda bulshada oo keliya. Gabdhuhu waxay si dabiici ah u yeeshaan kalsooni darro marka ay la kulmaan caqabadaha, taas oo qayb ka ah kala duwanaanshaha shucuureed ee dabiiciga ah.

Waa kuwan caddaymo muujinaya in sinnaanta lab iyo dhedig ay tahay fikrad aan ku dhisnayn xaqiiqada dabiiciga ah:

Kala duwanaanshaha hidde-sideyaasha (genetic), qaab-dhismeedka maskaxda, hormoonnada, iyo dabeecadaha asaasiga ah waxay muujinayaan in ragga iyo dumarku ay ku kala duwan yihiin siyaabo qoto dheer oo aan laga gudbi karin. Sinnaanta ma aha caddaalad - caddaaladdu waxay u baahan tahay in la aqoonsado kala duwanaanshahaas oo la siiyo qof kasta waxa uu u baahan yahay si waafaqsan awooddiisa iyo duruufihiisa.

Ug dambeyn Alle wuxu yidhi:

"وَلَا تَتَمَنَّوْا مَا فَضَّلَ اللَّهُ بِهِ بَعْضَكُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ لِلرِّجَالِ نَصِيبٌ مِّمَّا اكْتَسَبُوا ۖ وَلِلنِّسَاءِ نَصِيبٌ مِّمَّا اكْتَسَبْنَ ۚ وَاسْأَلُوا اللَّهَ مِن فَضْلِهِ"

Gabagabada buuga

Ugu danbeyn, feminism waa diin madaxbanaan oo aysan marnaba is qaadanayn in ayada iyo Islaamka la isku haysto. Fitnadeeda aad ayey u faaftay xitaa waxay saamaysaa gabdho u nisbo sheegta cilmiga shareecada. Feminism-ka soo galay wadamada muslimiinta waa dhawr nooc: mid waa shirkiga iyo ilxaada tooska ah, kaas oo si cad u gaalowda hadana afkaaro shirki ah qaata.

Midna waa mid gashata lug feminism lugna ku reebata islam , wixii shareecada amartay oo khilaafsan hawadeeda waxay ka tuurtaa daaqada , wixii shareecada siisayna way ku doodaa

Midna waa tan la dhacsan afkraaha inkastoo aysan qaadan laakin isku dayda inay ta'wiiliso axkaamta shareecad , tusaale in qawaamada ku soo koobto bixinta masruufka

Sidaa darteed waxaan ALLE ka baryaa inuu gaalnimada feminism ka xafido muslimiinta guud ahaan , haweenka muslimaatka ah gaar ahaan , kuwa baadiyooway inuu soo hanuuniyo , kuwa hanuunsan uu sugo.